

**JAMHUURIYADDA
SOMALILAND**



**REPUBLIC OF
SOMALILAND**

**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE**

FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

النَّشْرَةُ الرَّسْمِيَّةُ لْجُمْهُورِيَّةِ صُومَالِيْلَانْد

Sannadkii 12aad

Cadad Gaar ah

*Taariikhda Daabacaada
06/05/2023*

**XEERKA MACDANTA SOMALILAND
XEER LR. 100/2023**

**Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web: www.garyaqaankaguud.com**

*Lama iibin karo
Not for sale*

Sannadka 2023



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-1006/042023

Taar: 17/04/2023

Wareegto Madaxweyne

Dhaqan-galka Xeerka Macdanta Somaliland

Xeer Lr. 100/2023

Markaan Arkay: Qodobka 90^{aad} ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobka 38^{aad}, 75^{aad}, 76^{aad} iyo 77 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Helay: Go'aanka Golaha Wakiillada ee Summaddiisu tahay GW/KF-05/962/2023, kuna taariikheysan 28/03/2023, Ujeedadiisuna tahay soo-gudbinta Go'aanka ansixinta Xeerka Macdanta Somaliland ee Xeer Lr. 100/2023;

Waxaan soo-saaray:

Dhaqan-gelinta Xeerka Macdanta Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr. 100/2023.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland





Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Macdanta Somaliland
XEER LR: 100/2023

Golaha Wakiiladdu

Markuu Arkay: Qodobbada **12aad, 74aad, 75aad, 77aad iyo 78aad** ee Dastuurka Somaliland.

Markuu Aqoonsaday: In dhammaan kheyraadka macdantu tahay hanti qaran oo qayb weyn ka qaadanaayo horumarka dhaqaalaha dalka, qaranku waa inuu hubiyaa dhawrista iyo horumarinta kheyraadkaasi si ay faa'iido ugu helaan bulshadu

Markuu Xaqiiqsaday: Doorka muhiimka ah ee maalgashiga ganacsiga gaarka ahi u leeyahay raasamaal abuurista, tignoolajiyadda sahaminta iyo suuq gaynta macdanta.

Markuu tix-galiyay: In sahaminta iyo manaafacaadsiga kheyraadka macdantu ay tahay in loo sameeyo si waafaqsan mabaa'dii sugan oo ah dhawrista kheyraadka iyo in la' horumariyo khibradda qaran ee qaybta macdan qodista.

Markuu Arkay:-

Go'aanka Ansixinta **Xeerka Macdanta Somaliland Xeer Lr. 100/2022** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhsanayd **21/11/2022** kalfadhigii **4aad** fadhigiisi **23aad**

Markuu Arkay:-

In Golaha Guurtida Dib-u-eegis iyo wax-ka-bedel ku sameeyeen kuna ansixiyeen **(49)** cod **Xeerka Macdanta Somaliland Xeer Lr. 100/2023.**

WUXUU

Cod aqlabiyad ah oo afar iyo afartan **(44) cod** oo gacan taag ah ku Ansixiyay **Xeerka Macdanta Somaliland Xeer Lr.100/2023.**

ALLAA MAHAD LEH

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL



Md. Siciid Mire Faarax (Giire)
Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad, ahna ku simaha
Gudoomiyaha Golaha Wakiillada JSL



JAMHUURIYADDA SOMALILAND

GOLAHA WAKIILLADU

- Markuu Arkay: -** Qodobbada 12aad, 74aad, 75aad, 77aad iyo 78aad ee Dastuurka Somaliland.
- Markuu Aqoonsaday: -** In dhammaan kheyraadka macdantu tahay hanti qaran oo qayb weyn ka qaadanayso horumarka dhaqaalaha dalka, qaranku waa inuu hubiyaa dhawrista iyo horumarinta kheyraadkaasi si' ay faa'iido ugu helaan bulshadu.
- Markuu Xaqiiqsaday: -** Dooraka muhiimka ah ee maalgashiga ganacsiga gaarka ahi u leeyahay raasamaal abuurista, tignoolajiyadda sahaminta iyo suuq gaynta macdanta.
- Markuu Tixgaliyey: -** In sahaminta iyo manaafacaadsiga kheyraadka macdantu ay tahay in loo sameeyo si' waafaqsan mabaa'dii sugan oo ah dhawrista kheyraadka iyo in la' horumariyo khibradda qaran ee qaybta macdan qodista.
- Markuu u codeeyay** Wax ka badelka iyo Kaabista Golaha Guurtidu ku soo sameeyeen Xeerka Macdanta Qaranka, Golahuna cod gacan taag ah ugu codeeyay Fadhiigii 9^{aad} ee Kal-fadhiga 5^{aad} taariikhdu markay ahayd 14 March 2023.

Wuxuu Ansixiyay

Xeerka Macdanta Somaliland

Xeer Lr. 100/2023



Tusmada xeerka

CUTUBKA KOWAAD	12
QODOBO HORDHAC AH.....	12
Qodobka 1 ^{aad}	12
Magaca xeerka	12
Qodobka 2 ^{aad}	12
Erey-bixin.....	12
Qodobka 3 ^{aad}	20
Xadka dabbagaadda Xeerkan	20
Qodobka 4 ^{aad}	21
Ujeedooyinka Xeerkan	21
CUTUBKA LABAAD.....	21
MAAMULKA MACDANTA	21
Qodobka 5 ^{aad}	21
Lahaanshaha iyo Gacan ku haynta Macdanta	21
Qodobka 6 ^{aad}	21
Mamnuucidda sahaminta macdanta ogolaansho la'aan	21
Qodobka 7 ^{aad}	22
Noocyada Ruqsadaha Macdaneed	22
Qodobka 8 ^{aad}	23
Goobaha ka reebban in ruqsado Macdaneed lagu bixiyo.....	23
Qodobka 9 ^{aad}	23
Ogolaansho.....	23
Qodobka 10 ^{aad}	24
Shaqaalaynta iyo Tababaridda Muwaadiniinta Somaliland	24
Qodobka 11 ^{aad}	24
Mudnaan Siinta Waxyaalaha Dalka Gudahiisa Lagu Sameeyo	24
Qodobka 12 ^{aad}	24
Ka qaybqaadashada iyo ka qaybgalka dawladda.....	24
CUTUBKA SADDEXAAD	25
Qodobka 13 ^{aad}	25
Awoodaha Iyo Waajibaadka Wasaaradda	25
Qodobka 14 ^{aad}	26



Dhulka ka reeban Macdan Qodista.....	26
Qodobka 15 ^{ad}	26
Cidda ay ka reebantahay Ruqsadda Xuquuq Macdaneed	26
Qodobka 16 ^{ad}	27
Waxyaabaha Shirkadda looga baahan yahay.....	27
Qodobka 17 ^{ad}	27
Macdanaha istaraatiijiga ah.....	27
Qodobka 18 ^{ad}	27
Diiwaanka Ruqsadaha macdaneed	27
Qodobka 19 ^{ad}	28
Warbixinaha loo baahan yahay in la geliyo diiwaanka.....	28
Qodobka 20 ^{ad}	28
Awoodda Sixidda Diiwaanka iyo Caddaymaha Shahaadooyinka	28
Qodobka 21 ^{ad}	28
Beddelidda Waraaqaha Asalka ah	28
Qodobka 22 ^{ad}	28
Mamnuucidda daahfurka xogta.....	28
Qodobka 23 ^{ad}	29
Aasaasidda Hay'adda Korjoogteynta Macdanta Qaranka	29
Qodobka 24 ^{ad}	29
Guddiga Hay'adda Korjoogteynta Macdanta Qaranka	29
Qodobka 25 ^{ad}	29
Kal-fadhiyadda Guddida Korjoogtaynta	29
Qodobka 26 ^{ad}	30
Waayidda xubinnimada Guddida Hay'adda.....	30
Qodobka 27 ^{ad}	30
Shaqooyinka Hay'adda Korjoogteynta Macdanta Qaranka.....	30
Qodobka 28 ^{ad}	30
Wajibbaadka Guddoomiyaha Hay'adda.....	30
Qodobka 29 ^{ad}	31
Wajibbaadka Guddoomiye kuxigeenka Guddida Hay'adda korjoogtaynta Macdanta ee Qaranka.....	31
Qodobka 30 ^{ad}	31
Awoodaha baadhiseed iyo kormeer	31
CUTUBKA AFRAAD	32
HESHIIS MACDANEED	32



Qodobka 31 st	32
Heshiis macdaneed	32
Qodobka 32 nd	33
Faafinta Heshiisyada Macdaneed ee gaarka ah	33
CUTUBKA SHANAAD	33
RUQSADDAHA MACDANTA	33
Qodobka 33 rd	33
Ruqsadda ka ganacsi Macdanta	33
Qodobka 34 th	33
Shuruudaha Ruqsadda ka ganacsiga Macdanta	33
Qodobka 35 th	33
Codsiga Ruqsadda kaganacsiga Macdanta	33
Qodobka 36 th	34
Bixinta Ruqsadda kaganacsiga Macdanta	34
Qodobka 37 th	34
Muddada iyo cusboonaysiinta Ruqsadda kaganacsiga Macdanta	34
Qodobka 38 th	35
Waajibaadka Ruqsadlaha Kaganacsiga Macdanta	35
Qodobka 39 th	35
Xuquuqaha Ruqsadda Kaganacsiga Macdanta	35
Qodobka 40 th	35
Waxyaalaha ka reebban Ruqsadda Kaganacsiga Macdanta	35
Qodobka 41 st	35
Soodeejinta iyo dhoofinta macdanta	35
Qodobka 42 nd	36
Muddada ogolaanshaha, dhoofinta iyo soo dejinta macdanta	36
MACDAN QODISTA QADIIMKA AH	36
Qodobka 43 rd	36
Macdan qodista qadiimiga ah	36
Qodobka 44 th	37
Shuruudaha ogolaansha macdan qodista qadiimiga ah	37
Qodobka 45 th	37
Codsiga ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah	37
Qodobka 46 th	37
Bixinta ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah	37



Qodobka 47 ^{ad}	37
Muddada iyo cusboonaysiinta ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah	37
Qodobka 48 ^{ad}	37
Wareejinta ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah	37
Qodobka 49 ^{ad}	37
Waajibaadka haystaha ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah	37
Qodobka 50 ^{ad}	38
Xuquuqda haystaha ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah	38
Qodobka 51 ^{ad}	38
Goobta ogolaanshaha Macdan qodista qadiimiga ah	38
RUQSADDA SAHANKA HORDHACA AH	39
Qodobka 52 ^{ad}	39
Sahanka hordhaca ah	39
Qodobka 53 ^{ad}	39
Shuruudaha ruqsadda Sahanka hordhaca ah	39
Qodobka 54 ^{ad}	39
Codsiga Ruqsadda Sahanka hordhaca ah	39
Qodobka 55 ^{ad}	40
Bixinta Ruqsadda Sahanka hordhaca ah	40
Qodobka 56 ^{ad}	40
Muddada iyo cusboonaysiinta Ruqsadda Sahanka hordhaca ah	40
Qodobka 57 ^{ad}	41
Waajibaadka ruqsaddaha haysta ruqsadda sahanka hordhaca ah	41
Qodobka 58 ^{ad}	41
Xuquuqaha Ruqsadda Sahanka hordhaca ah	41
Qodobka 59 ^{ad}	42
Waxyaalaha ka reebban ruqsadda sahanka hordhaca ah	42
Qodobka 60 ^{ad}	42
Goobta ruqsadda sahanka hordhaca ah	42
Qodobka 61 ^{ad}	42
Warbixinta Sannadlaha ah	42
RUQSADDA SAHAMINTA MACDANTA	42
Qodobka 62 ^{ad}	42
Ruqsadda sahaminta macdanta	42
Qodobka 63 ^{ad}	42



Shuruudaha ruqsadda Sahaminta Macdanta.....	42
Qodobka 65 ^{ad}	43
Codsiga ruqsadda sahaminta macdanta.....	43
Qodobka 66 ^{ad}	44
Bixinta Ruqsadda Sahaminta Macdanta	44
Qodobka 67 ^{ad}	44
Muddada iyo cusboonaysiinta ruqsadda sahaminta macdanta	44
Qodobka 68 ^{ad}	44
Wajibbaadyada Ruqsadda Sahaminta Macdanta	44
Qodobka 69 ^{ad}	45
Xuquuqaha Ruqsadda Sahaminta Macdanta	45
Qodobka 70 ^{ad}	46
Khidmadaha maamulka, cusboonaysiinta, sanadlaha iyo codsiga.....	46
Qodobka 71 ^{ad}	46
Xaqa beddelaadda Ruqsadda Sahaminta.....	46
Qodobka 72 ^{ad}	46
Goobta Ruqsadda Sahaminta	46
Qodobka 73 ^{ad}	47
Warbixinta Sannadlaha ah	47
RUQSADDA MADCAN QODISTA KOOBAN	47
Qodobka 74 ^{ad}	47
Macdan qodista kooban	47
Qodobka 75 ^{ad}	47
Shuruudaha macdan qodista kooban	47
Qodobka 76 ^{ad}	47
Codsashada ruqsadda macdan qodista kooban	47
Qodobka 77 ^{ad}	48
Bixinta ruqsadda macdan qodista kooban	48
Qodobka 78 ^{ad}	48
Muddada iyo cusboonaysiinta ruqsadda macdan qodista kooban	48
Qodobka 79 ^{ad}	49
Wajibbaadka ruqsadlaha macdan qodista kooban	49
Qodobka 80 ^{ad}	50
Xuquuqda ruqsadleyaasha ruqsadda macdan qodista kooban	50
Qodobka 81 ^{ad}	50



Warbixinta Sanadlaha ah.....	50
Qodobka 82 nd	50
Goobta ruqsadda macdan qodista kooban.....	50
Qodobka 83 rd	51
Wareejinta Ruqsadda	51
RUQSADDA MACDAN-QODISTA.....	51
Qodobka 84 th	51
Macdan qodista	51
Qodobka 85 th	51
Shuruudaha ruqsadda Macdan Qodista	51
Qodobka 86 th	51
Codsiga Ruqsadda Macdan Qodista	51
Qodobka 87 th	53
Bixinta ruqsadda macdan qodista	53
Qodobka 88 th	53
Muddada iyo cusboonaysiinta ruqsadda macdan qodista	53
Qodobka 89 th	53
Waajibaadka ruqsadlaha macdan qodista.....	53
Qodobka 90 th	54
Xuquuqda ay leedahay cidda haysata ruqsadda macdan qodista.....	54
Qodobka 91 th	55
Dhulka ruqsadda macdan qodista.....	55
Qodobka 92 nd	55
Faafinta go'aanka codsiga ruqsadda macdan qodista	55
Qodobka 93 rd	55
Joojinta hawlaha macdan qodista.....	55
Qodobka 94 th	56
Awoodda wasaaradda ee joojinta macdan qodista	56
Qodobka 95 th	56
Warbixinaha iyo buug xisaabeedyada sanadlaha ah	56
RUQSADDA SII HAYSASHADA MACDANTA	56
Qodobka 96 th	56
Ruqsadda Sii-haysashada Macdanta.....	56
Qodobka 97 th	56
Shuruudaha ruqsadda Sii-haysashada Macdanta	56



Qodobka 98 ^{ad}	57
Codsiga ruqsadda sii haysashada	57
Qodobka 99 ^{ad}	57
Bixinta ruqsadda sii-haysashada dhul macdaneed.....	57
Qodobka 100 ^{ad}	57
Xuquuqda iyo waajibaadka Ruqsadda sii-haysashada.....	57
Qodobka 101 ^{ad}	57
Muddada iyo cusboonaysiinta ruqsadda sii-haysashada dhul-macdaneed	57
Qodobka 102 ^{ad}	58
Dib-u-eegista Muddada Ruqsadda sii-haysashada	58
CUTUBKA LIXAAD.....	58
BAADHITAANKA SHILALKA	58
Qodobka 103 ^{ad}	58
Waajibaadka ammaanka ruqsaddaha ruqsadda macdan qodista.....	58
Qodobka 104 ^{ad}	58
Baadhista waxyeelada	58
Qodobka 105 ^{ad}	59
Awoodaha baadhista fal-dambiyada iyo shilalka.....	59
Qodobka 106 ^{ad}	60
Soo sheegidda shilalka	60
Qodobka 107 ^{ad}	60
Wareejinta.....	60
Qodobka 108 ^{ad}	61
Dhaqan-galka shahaada wareejinta	61
Qodobka 109 ^{ad}	61
Hakinta ama joojinta ruqsadda macdanta	61
Qodobka 110 ^{ad}	62
Keenista xogta marka la tirtirayo xuquuqda macdaneed	62
Qodobka 111 ^{ad}	63
Ajuuro maamuseedka.....	63
Qodobka 112 ^{ad}	63
Waxyaabaha ka reebban ajuurada	63
Qodobka 113 ^{ad}	64
Ajuuradda sanadlaha ah ee xuquuqaha macdaneed	64
Qodobka 114 ^{ad}	64



ku guuldaraystaha bixinta ajuurada.....	64
CUTUBKA SAGAALAAD.....	64
CAAFIMAADKA, AMNIGA IYO ILAALINTA DEEGAANKA.....	64
Qodobka 115 ^{aad}	64
Ka shaqaynta caafimaadka iyo badbaadada	64
Qodobka 116 ^{aad}	65
Ilaalinta kheyraadka dabiiciga ah iyo tixgalinteeda	65
Qodobka 117 ^{aad}	65
Wajjibaadka guud ee ilaalinta deegaanka iyo yaraynta wasakheynta	65
Qodobka 118 ^{aad}	65
Qiimaynta saamaynta deegaanka	65
Qodobka 119 ^{aad}	66
Warbixinta deegaanka ee sanadlaha ah	66
Qodobka 120 ^{aad}	66
Qorshaha xidhisto macdan qodaalka iyo dayactirka deegaanka	66
Qodobka 121 ^{aad}	66
Dayac tirka socoda ee deegaanka.....	66
Qodobka 122 ^{aad}	67
Jihada u hogaansamidda ilaalinta deegaanka.....	67
Qodobka 123 ^{aad}	67
Aasaaska sanduuqa dayac tirka iyo ilaalinta deegaanka.....	67
CUTUBKA TOBNAAD.....	68
DAMBIYADA GANAAXYADA IYO WAXSOOSAARAYAASHA.....	68
Qodobka 124 ^{aad}	68
Awoodda joojinta iyo qabashada macdanaha lagu diray boosta iyo waraaqaha	68
Qodobka 125aad	68
Awoodda Xadhiga.....	68
Qodobka 126 ^{aad}	69
Awaamiirta maxkamadda ee joojinta hawlaha macdaneed.....	69
Qodobka 127 ^{aad}	69
Awooddaha dacwad oogista	69
Qodobka 128 ^{aad}	69
Dambiyadda la xidhiidha hawlaha aan ogolaansha loo haysan	69
Qodobka 129 ^{aad}	69
Dambiyadda la-xidhiidha haysasho macdaneed si'aan sharci ahayn.....	69



Qodobka 130 ^{aad}	70
Danbiyadda la'xidhiidha xuquuqaha macdaneed ee ruqsadleyaasha	70
Qodobka 131 ^{aad}	70
Danbiyadda la'xidhiidha kormeerka iyo dabagalka	70
Qodobka 132 ^{aad}	70
Danbiyadda la xidhiidha diiwaannadda iyo warbixinaha	70
Qodobka 133 ^{aad}	71
Danbiyadda laxidhiidha xaaladdaha ruqsadda iyo ogolaanshaha	71
Qodobka 134 ^{aad}	71
Danbiyadda laxidhiidha marin-habaabinta	71
Qodobka 135 ^{aad}	71
Danbiyadda la xidhiidha ku xasaynta macdanta dhismeyaal kale dadka leh dhibaato uga soo gaadho	71
Qodobka 136 ^{aad}	71
Danbiyadda la xidhiidha ka takhalusidda, soodajinta iyo dhoofinta macdanta ee aan xeerka waafaqsanayn	71
Qodobka 137 ^{aad}	72
Danbiyadda la xidhiidha bixinta xogta sirta aheen xeerka waafaqsanayn	72
Qodobka 138	72
Danbiyadda ay Sababaan Falalka Taxadaradda iyo Feejignaan La'aanta ee ka yimaada Dhinaca Ruqsadlaha:	72
Qodobka 139	72
Noocyada Dhaawacyada	72
Qodobka 140 ^{aad}	73
Danbiyadda ay galaan shirkadaha, iskaashatooyinka maamuleyaasha iyo shaqaaluhu	73
Qodobka 141 ^{aad}	73
Isku-dayidda iyo caawinta fal-danbiyeedka	73
Qodobka 142 ^{aad}	73
Masuuliyadda caddaynta	73
Qodobka 143 ^{aad}	74
Awaamiirta Maxkamadda ee La noqoshada Ruqsadda iyo Ogolaansha Macdaneed	74
CUTUBKA KOW IYO TOBNAAD	74
QODOBO QUBANE AH	74
Qodobka 144 ^{aad}	74
Wadaagga waxsoosaarka macdanta	74
Qodobka 145 ^{aad}	74
Kal-dhaafigga takaaliifta cashuureed iyo faa'iidooyinka Kale:	74
Qodobka 146 ^{aad}	75



Xalinta khilaafadka	75
Qodobka 147 ^{aad}	75
Wareejinta ruqsadda macdaneed	75
Qodobka 148 ^{aad}	76
Macdanaha shucaaca leh	76
Qodobka 149 ^{aad}	76
Ogolaanshaha gurashada ciidaha iyo dhagxaanta dhismaha	76
Qodobka 150	76
Xidhiidhka ka dhexeeya xeerkan iyo xeerarka kale ee ciqaabta ee dalka	76
Qodobka 151 ^{aad}	76
Xeer-nidaamiye	76
Qodobka 152 ^{aad}	77
Dhaqan-galka Xeerka	77



**CUTUBKA KOWAAD
QODOBO HORDHAC AH**

**Qodobka 1^{aad}
Magaca xeerka**

Xeerkan waxa lagu magacaabaa Xeerka Macdanta Somaliland Xeer Lr. 100/2023

**Qodobka 2^{aad}
Erey-bixin**

- Agaasimaha Baadhitaanka Jiyoolajiyeed:** Waxa loola jeedaa Agaasimaha baadhitaanka jiyoolajiyeed ee lagu magacaabay si'waafaqsan xeerkan
- Agaasimaha Waaxda Macdanta:** Waxa loola jeedaa Agaasimaha waaxda Macdanta ee ku magacaaban xeerkan.
- Ajuuro-Sannadeed:** Waxa loola jeedaa khidmad kasta oo sannadle ah oo uu bixiyo ruqsadle macdaneed si'waafaqsan xeerkan.
- Dhagaxaanta dhismaha lagu qurxiyo:** Waxa loola jeedaa dhagax kasta sida marmarka ah oo loo soo saaray in loo isticmaalo sharraxaad, qurxin IWM. Hase ahaatee aan loogu talo galin dhisme iyo in wax lagu dhiso toona.
- Baadhis:** Waxa loola jeedaa baadhista macdanta iyo keydadkeeda, iyada oo la'adeegsanayo si'waafaqsan xeerkan.
- Baarlammaan:** Waxa loola jeedaa labada Gole ee Wakiillada iyo Guurtida Jamhuuriyadda Somaliland.
- Biraha qaaliga ah:** Waxa loola jeedaa macdanaha ku xusan faqradda (c) ee Jadwalka koowaad.
- Bixinta dhul-macdaneed gaar ah:** Waxa loola jeedaa heshiis u dhexeeya dawladda iyo ruqsadlayaasha.
- Baloog (Block):** Waxa loola jeedaa dhul qaabkiisu leydi yahay oo loogu talo galay sahamin ama qoditaan macdaneed, cibbirkiiisuna yahay 4 kiloomitir bari illaa galbeed iyo 2 kiiloomitir waqooyi illaa koonfur ah.
- Barnaamijka hawlaha macdan qodista:** Waxa loola jeeda: -
- b- Barnaamij uu diyaariyey ruqsadlaha oo loogu talagalay hawlaha macdan sahaminta iyo qodista, ansixiyeyna agaasimaha macdantu si' uu u qaato ruqsad ama u cusboonaysiisto.
 - t- Barnaamijka oo wax-ka-beddel lagu sameeyo si'waafaqsan xeerka.



Barnaamijka ilaalinta iyo dayactirka deegaanka:	Waxa loola jeedaa barnaamijka ilaalinta iyo dayactirka deegaanka oo salka ku haysa hab-dhaqanka ugu fiican ee sahanka iyo soosaarista macdanta si'waafaqsan xeerarkan iyo xeerarka kale ee khuseeya.
Barnaamijka maareynta deegaanka:	Waxa loola jeedaa qorshe lagu ilaalinayo deeganka si'waafaqsan dhammaan shuruucda waddanka
Biyaha dhulka hoostiisa ku jira:	Waxa loola jeeda macnaha uu siiyay sharciga maamulka biyaha.
Bulsho:	Waxa loola jeedaa:
	<ul style="list-style-type: none"> b- Dadka ku ag nool goobaha hawlaha sahaminta iyo macadan qodistu ka socoto. t- Dadka laga yaabo in ay ka soo barokaceen dhul loogu talo galay hawlaha sahaminta iyo macdan qodista.
Xeel-dheeraha aqoonta dhulka (Geologist):	Waxa loola jeedaa qof kasta oo aqoon sare u leh cilmiga dhulka, sitana shahaado jaamacadeed oo laga aqoonsan yahay Somaliland iyo caalamkaba.
Ciddii hor timaadda ayaa loo hor adeegayaa:	Waxa loola jeedaa siyaasadda tixgalinta iyo ansixinta codsiyada ee ku salaysan qaabka ay u soo kala horreeyaan codsiyadaasi.
Codsi:	Waxa loola jeeda dalabka in la' bixiyo, la' cusboonaysiiyo, lala kala wareego, la'siiyo ama la' dhiibo xuquuq macdaneed.
Culuunta dhulka (Jiyooloji):	Waxa loola jeedaa cilimiga barashada dhulka iyo hannaanka qaabeeya dhulka.
Daah ka qaadis ganacsi gal ah:	Waxa loola jeeda helitaan keyd macdaneed oo ay suurogal tahay inuu ganacsi galo.
Dawladd:	Waxa loola jeedaa Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland.
Deebaaji macdaneed:	Waxa loola jeedaa lacag waajib ah oo looga baahan yahay ruqsadle kasta, si' loo dammaanad qaado inuu fuliyo barnaamijkii macdan qodista ee loo ansixiyay si'waafaqsan xeerkan.
Dhaqdhaqaaqyada la ogol yahay:	Waxa loola jeedaa sahamin, macadan qodis ama dhaqdhaqaaqyada la'xidhiidha ee la'fuliyay si'waafaqsan ruqsadda ama ogolaanshaha.
Dheeman (diamond):	Waxa ay koobsanaysaa dheemanta la' soo saaray ee aan la'qorin.



Dhul macdaneed qadiimiya:	Waxa loola jeedaa dhulka loo haysto ruqsadda hab macdaneedka qadiimiga ah.
Dhulka Sahan hordhac ah:	Waxa loola jeedaa dhulka loo haysto ruqsadda sahanka kooban ama sahanka hordhaca ah.
Dhulka Laxafiday:	Waxa loola jeedaa dhulka loo haysto ruqsadda ilaalinta ama xafidaadda.
Dhulka ruqsadaysan:	Waxa loola jeedaa qayb kasta oo ka mid ah dhulka waddanka oo ruqsad macdaneed loo qaatay si'waafaqsan xeerkan.
Diiwaan:	Waxa loola jeedaa diiwaanka lagu keydiyo ama lagu ilaaliyo xuquuqda macdaneed ee lagu aasaaasay xeerkan.
Duruuf Dhaqaale:	Waxa loola jeedaa duruuf kasta oo ay shirkaddu ku caydhoobi karto sida: <ul style="list-style-type: none"> b- Marka ay shirkaddu xaraash u taagan tahay t- Fulinta go'aan maxkamadeed oo ah in la'kala diro j- In ay magdhaw lacageed siiso shirkadaha daynta ku leh ee ka sugaya.
Ganacsade Macdaneed:	Waxa loola jeedaa qofka ruqsad loo siiyay si' uu uga ganacsado macdanta sida: <ul style="list-style-type: none"> b- Macdan iibiye t- Macdan iibsade j- In macdan adeeg kale lagu baddasho x- Jaridda, dhalaalinta, farsamaynta, sifeynta iyo dib u habeynta macdanta.
Ganacsi Macdaneed:	Waxa loola jeedaa ka ganacsi macdaneed.
Macdanta Qurxinta:	Waxa loola jeedaa nooc kasta oo macdaneed taas oo caadi ahaan la'jaro ama la'qoro si'loogu isticmaalo isqurxinta marka laga reebo dheemanta oo iyada loo tixgalinaayo sida macdanta.
God Macdaneed:	Waxa loola jeeda: <ul style="list-style-type: none"> b- Marka loo isticmaalo magac ahaan, waxa uu koobsanayaa dhammaan noocyada kala duwan ee gododka loo qodo si' loo soo saaro macdanta.



	t- Marka loo isticmaalo ficil ahaan waxa uu macnihiisu yahay fulinta hawlaha macdan qodista sida hadhaaga macdanta.
God qodid:	Waxa loola jeedaa dhammaan noocyada kala duwan ee qoditaanka godadka iyo shaqo kasta oo la'xidhiidha sahanka iyo soosaarista xaq macdanta.
Goobta qodista macdanta:	Waxa loola jeedaa qayb ka mid ah dhulka oo hoos imanaysa ruqsadda macdan qodiseed.
Goobta ruqsadda:	Waxa loola jeedaa goob ka mid ah dhulka Somaliland oo hoos imanaysa ruqsadda loo bixiyay si'waafaqsan xeerkan.
Goobta ogolaanshaha:	Waxa loola jeedaa goobta uu koobsanayo ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah.
Goobta dib u dhigashada:	Waxa loola jeedaa dhulka loo haysto ruqsadda dib u dhigashada.
Goobta ruqsadda macdan qodista kooban:	Waxa loola jeedaa goobta loo qaatay ruqsad macdan qodis kooban.
Goobta sahanka hordhaca ah:	Waxa looga jeedaa goobta ogolaanshaha ruqsadda sahanka hordhaca ah loo siiyay.
Gudbin/Wareejin:	Waxa loola jeedaa dhiibista dhammaan ama qayb ka mid ah xaq macdaneed.
Guddi:	Waxa loola jeedaa guddida Hay'adda Korjoogteynta waddaniga ah ee macdanta taas oo lagu aasaasay Qodobka 23aad ee Xeerkan.
Shaqada Ballaadhan:	Waxa loola jeedaa hawlaha ballaadhan ee sahminta iyo qodista si'waafaqsan xeerkan.
Hawlaha macdan qodista qadiimiga ah:	Waxa loola jeedaa hawlo macdan qodiseed taas oo aan qotadeedu dhaafayn 10 mitir.
Hawlaha macdan-qodiseed:	Waxa loola jeedaa samaynta ficil kasta oo suurta gal ka dhigaya:
	b- In keydadka macdaneed laga soo saaro halka ay ku jiraan.
	t- In macdanaha qaaliga ah laga soo saaro macdanta kale ee ay ku dhex jirto ama in dib loo farsameeyo si'qiimaheedu sare ugu kaco, si'waafaqsan xeerkan.



Hawlaha macdanta:	Waxa loola jeedaa samaynta ficil kasta oo suurta gal ka dhigaya keydadka macdaneed laga soo saaro macdan, qalab dhisme, gemstone ama artstone la'farsameeyo oo la'iibiyo si'waafaqsan ruqsadda ama ogolaanshaha.
Hawlaha Sahanka:	Waxa loola jeedaa ficil kasta oo lagu baadhayo ama lagu ogaanayo baaxadda keyd macdaneed laguna go'aaminayo qiimaha dhaqaale ee ay leedahay.
Haydarokarboon:	Waxa loola jeedaa walax kasta oo dabiici ah oo ka kooban curiyeyasha karbon iyo haydarajin oo ay ku jiraan saliidda qaydhiin, gaaska dabiiciga ah iyo dhammaan walxaha kale ee macdaneed ee la' soo saaray ama laga helay hawsha macdan qodista marka laga reebo dhuxul dhagaxda.
Heshiis Macdaneed:	Waxa loola jeeda heshiiska maalgashiga macdaneed ee u dhexeeya dawladda iyo shirkadaha macdanta ee maalgalintoodu ay ka badan tahay laba boqol oo malyan USD.
Heshiiska horumarinta bulshada:	Waxa loola jeedaa heshiis ka dhexeeya Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta iyo ruqsaddaha qodista macdanta si'loo horumariyo bulshada.
Jamhuuriyadda:	Waxa loola jeedaa Jamhuuriyadda Somaliland.
Keyd Macdaneed:	Waxa loola jeedaa macdan kasta oo si' dabiici ah ugu badan lagana helay lakabka sare ee dhulka.
Kooban:	Waxa loola jeedaa ruqsadda macdan qodista kooban ee Wasaaraddu u bixisay si'waafaqsan xeerkan.
Kormeeraha Macdanta:	Waxa loola jeedaa sarkaal dawladeed oo Hay'adda Korjoogtaynta ama wasaaraddu u xilsaarto arrimo kormeer si'waafaqsan xeerkan.
Macdan:	Waxa loola jeedaa walax dabiici ah oo qiime dhaqaale leh oo ku samaysan gudaha iyo qolofa dhulka waxaana ku jiraa keyd dhuleedka, biraha qaaliga ah, dheemanta iyo macdanaha warshadeed oo aanay ku jirin haydarokarboonnada iyo biyuhu.
Maxkamad:	Waxa loola jeedaa maxkamadaha Somaliland.
Maxsuulka macdanta:	Waxa loola jeedaa wax kasta oo ka soo baxa hawlaha macdan qodiseed ee biraha ama macdanta qaaliga ah iyo maxsuulka faa'iido ee hawlaha macdan qodiseed oo aanay ku jirin qashiinka iyo hadhaagu.



Maalin:	Waxa loola jeedaa xilliga ku cad jaantuska sannadka.
Macdan qodis kooban:	Waxa loola jeeda hawlo macdan soo saaris ah iyada oo la adeegsanaayo mashiino, Lana qodaayo godad aan qoto ahaan ka badneyn 20 mitir.
Macdan qodista qadiimiga ah:	Waxa loola jeedaa hawlaha macdan qodista ee ku salaysan hab dhaqameedka qadiimiga ah ee qalabka la' isticmaalayaana yahay mid aasaasi ah sida majarafado, sabarado IWM.
Macdanta shucaaca leh:	Waxa loola jeedaa macdanta ay ku jirto ugu yaraan culayskeeda (0.05%) oo ah Yuraaniyam (Uranium), Tooriyam (Thorium) ama isku jirka labada macdanood. Sidoo kale waxa soo galayaa oo aan ku koobnayn ciidda monasayt iyo biraha kale ee ay ku jiraan macdanta karnotayt (carnotite) iyo bitbilen (pitchblende)
Macaamil aan dano gaara lahayn:	Waxa loola jeedaa gadashada, kala iibsiga shaqo ama is dhiibin ee xaq macdanta ah ama suuqa kala iibsiga macdanta iyo iibkeeda.
Mishiin:	Waxa loola jeedaa qalab kasta oo aan ku shaqayn xoogga aadamaha.
Ogolaanshaha ka ganacsiga macdanta:	Waxa loola jeedaa ogolaansho loo soo saaray si'waafaqsan xeerka.
Ogolaansho macdaneed:	Waxa loola jeedaa ogolaansho macdaneed oo lagu bixiyay si'waafaqsan xeerkan.
Ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah:	Waxa loola jeeda ogolaanshaha macdan qodis qadiimi ah oo la bixiyo si'waafaqsan cutubka 10 ^{aad}
Ogaansho keyd ganacsi:	Waxa loola jeedaa ogaansho ama daah ka rogga macdan dhaqaale ama ganacsi ahaan loo soo saari karo.
Qalabka dhismaha:	Waxa loola jeedaa qalab kasta oo loo soo saaray si' loogu dhiso dhismeyaasha, waddooyinka, biyo xidheennada iyo waxyaabaha la'mid ah sida dhagaxaanta waaweyn, dhagaxaanta yaryar, Jayga, ciidda, dhoobada iyo nuuradda oo aanay ku jirin macdanaha warshadeed.
Qorshaha dayactirka iyo xidhitaanka god macdaneedka:	Waxa loola jeeda qorshe lagu baabinayo god macdaneedka laguna soo celinaayo dhulka sidii uu ahaa macdan qodista ka hor, si'loogu isticmaalo wixii loogu talo galay macdan qodista ka dib.



Qashinka iyo hadhaaga god macdaneedka:	Waxa loola jeedaa hadhaaga hawlaha macdan qodista ee koobsanaya Jayga, Ciidda, Dhoobada ama walxaha kale ee la'tuuro, inta la'wado hawlaha macdan qodista iyo kala saaridda
Qiimaha guud:	Waxa loola jeedaa qiimaha kala iibsiga macdanta inta aan laga jarin qiimo dhimista, faa'iido dul saaridda iyo qiimaha kale ee ka go'aya.
Macdan qodiseed:	Waxa loola jeedaa barnaamij loogu talo galay hawsha macdan qodista qofka ruqsadda macdaneed dalbanaaya wasaaradduna uu ansixiso marka la'bixinayo ama la'cusboonaysiinayo ruqsadda.
	b- Qof la'siiyay ama loo soo wareejiyay xuquuq macdaneed. t- Qof kasta ama shirkad kasta oo si'xeerkan waafaqsan loo siiyay ruqsad ama ogolaansho macdaneed.
Ruqsad:	Waxa loola jeedaa ruqsadaha ama ogolaanshaha sahaminta, baadhista iyo qodista macdanta ee ay bixiso Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta.
Ruqsad Macdaneed:	Waxa loola jeedaa ruqsad macdaneed oo loo bixiyay si'waafaqsan xeerkan.
Ruqsada Macdan Qodista:	Waxa loola jeeda ruqsad la bixiyo oo uu ugolaanaysa cidda haysataa in ay fuliso hawlo macdan qodis oo waaweyn.
Ruqsada Macdan Qodista Kooban:	Waxa loola jeedaa ruqsadda macdan qodista kooban ee ay bixisay wasaaraddu si'waafaqsan xeerkan.
Ruqsad sahamin:	Waxa loola jeedaa ruqsad ama ogolaansho lagu fuliyo hawsha sahaminta loo bixiyay si'waafaqsan xeerkan.
Ruqsadda qiimeynta ee saameynta ku imanaysa deegaanka:	Waxa loola jeedaa ruqsadda qiimeynta saameynta ku imanaysa deegaanka oo lagu bixiyay si'waafaqsan shuruucda deegaanka Somaliland
Ruqsada sahanka hordhaca ah:	Waxa looga jeeda ruqsadda lagu bixiyay si'wafaqsan cutubka afraad ee xeerkan.
Ruqsada sahanka kooban:	Waxa loola jeeda ruqsadda loo bixiyay si'waafaqsan cutubka 4aad ee xeerkan.



Ruqsadleh:	Waxa loola jeedaa:
	b- Cid kasta ama shirkad kasta oo haysta ogolaansho ama ruqsad lagu bixiyay si'waafaqsan xeerkan
	t- Cid kasta oo haysta xuquuq macdaneed oo loo qoondeeyay ama loo beddeley.
Ruqsadda Sii-haysashada:	Waxa loola jeeda ruqsad lagu bixiyay si'waafaqsan Cutubka 8 ^{aad} ee xeerkan.
Sahamin:	Waxa loola jeeda sahaminta iyo baadhista macdanta iyo keydadka iyada oo la'adeegsanayo hababka jiyoolajiyeed, jiyookimikeed, jiyoofisikeed iyo hababka kale ee la'xidhiidha sida qodaalka gudboon, qodaalka joogga iyo muunad qaadista.
Sahanka hordhaca ah:	Waxa loola jeedaa hawlaha iyo shaqooyinka macdaneed ee loo fulinayo si aan qoto dheerayn, sida kormeerrada dhulka, sahanada goobaha, sahanada dhulka ee dusha laga sawirayo ama la'adeegsanayo xeeladaha kale ee casriga ah, sida satalaytka oo aanay ku jirin qodista macdantu.
Sarkaalka Macdanta:	Waxa loola jeedaa sarkaalka dawladeed ee lagu magacaabay si'waafaqsan xeerkan.
Shaqadda Lafasaxay:	Waxa loola jeedaa shaqo kasta oo macdan sahamineed ama macdan qodiseed ah oo si xeerkan waafaqsan ruqsaddeeda ama ogolaashaheeda loo bixiyay.
Shirkad:	Waxa loola jeedaa sida lagu qeexay xeerka shirkadaha Somaliland.
Hay'adda Korjoogtaynta:	Waxa loola jeedaa Hay'adda Korjoogtaynta Macdanta ee wadaniga ah, taas oo lagu aasaasay cutubka saddexaad ee xeerkan Qodobkiisa 24aad.
Soonaha Badda:	Waxa looga jeedaa macnaha lagu qeexay shuruucda badda Somaliland iyo kuwa caalamiga ahba.
Tirtirid /dhammaad:	Waxa loola jeedaa dhammaadka xaq macdaneed ama dhicitaan ha ku dhamaato ama wareejin ama joojine.
Dalka:	Waxa loola jeedaa waddanka jamhuuriyadda Somaliland.
Walxaha qarxa:	Waxa loola jeedaa dhammaan walax kasta oo qaraxda oo loo adeegsado hawlaha sahanka iyo qodista macdanta.
Warbixin Jiyooloji:	Waxa loola jeedaa warbixinta uu qoro qof jiyoolojiis ahi.



Wasaaradda:	Waxa loola jeedaa Wasaaradda ka masuulka ah macdanta dalka.
Wasiir:	Waxa loola jeedaa Wasiirka ka masuulka ah macdanta dalka.
“Xafide” ama ilaaliye lacageed:	Waxa uu koobsanayaa maamule, khasnaji ama sarkaal kasta oo kale oo kaga shaqeeynaya awoodahaa hore shirkad ku hawlan ganacsiga bangiyada Somaliland gudaheeda, si’waafaqsan xeerka bangiyada Somaliland.
Xaqa helidda ruqsadda:	Waxa loola jeedaa dariiq kasta oo ay lagama maarmaan u tahay in loo maro helidda ruqsadda ama ogolaanshaha lagu fulinayo hawlaha macdan qodiseed.
Xeerka Macdanta:	Waxa loola jeedaa xeerkan, xeerka macdanta Somaliland.
Xeer-nidaamiye:	Waxa loola jeedaa xeer-nidaamiye kasta oo ka farcama xeerkan.
Xubin:	Waxa loola jeedaa xubin ka mid ah guddida lagu magaacabay xeerkan.
Xuquuqda Macdanta:	Waxa loola jeedaa: <ul style="list-style-type: none"> b- Ruqsadda dib u dhigasho t- Ruqsadda macdan qodis kooban j- Ruqsadda macdan qodis qadiimiya x- Ruqsadda macdan qodista kh- Ruqsadda Sahamineed d- Ruqsadda Sahaminta kooban

Qodobka 3^{aad}
Xadka dabbaqaadda Xeerkan

1. Xeerkan waxa lagu dabbaqayaa dhammaan noocyada macdanaha kala duwan ee ku jira dhulka dhaca gudaha xuduudaha jamhuuriyada Somaliland.
2. Sharcigani waxa uu ku dabbaqmayaa dhulka Somaliland oo koobsanaya oogada sare ee dhulka, ciidda dhexdeeda, ciidda hoosteeda, webiyada, marin-biyoodyada, xuduudaha badda iyo godan-badeedka berriga xiga ee Jamhuuriyadda Somaliland oo ay ku jirto goob dhaqaaleedka gaarka ahi.
3. Xeerkan waxa lagu dabbaqayaa kheyraadka macdanaha oo keliya ee lagu dabbaqi maayo shiidaalka iyo gaasta dabiiciga ah iyo macdanaha kale.



Qodobka 4^{aad}
Ujeeddooyinka Xeerkan

1. In lagu xaqiijiyo illaalinta iyo horumarinta kheyraadka macdanta si' loogu faa'iideeyo shacabka Somaliland.
2. In la' xaqiijiyo in qodista kheyraadka macdanta loo fuliyo si' waafaqsan aqoonta casriga ah ee ku munaasibka ah iyo habka wacan ee ilaalinta kheyraadka macdanta iyo horumarinta khibradda dadka ee mihnada macdan qodista leh.
3. In loo fuliyo sahaminta iyo qodista macdanta hab bulsho ahaan, dhaqaale ahaan iyo deegaan ahaanba wax tar u leh ka, farsamo ahaana lagu kalsoonaan karo.
4. In lagu dabgalo qaabka macdan qodista, ilaalinta badqabka gudaha, agagaarka godad-macdaneedyada iyo masuuliyadaha saaran ruqsadlayaasha.
5. Si loo bixiyo qaab-hawleed isku dhafan oo nidaaminaya hawlaha sahaminta macdata iyo qodista godad-macdaneedyada.)
6. in lagu maamulo dhammaan kheyraadka macdanta ee waddanka Somaliland
7. In lagu kala xadeeyo ajurooyinka ay kala leeyihiin degmooyinka, gobollada iyo dawladda dhexe, sida uu dhigayo qodobka 111aad.
8. In la' helo lana suurta galiyo hab isku dhafan oo lagu maamulo bixinta ruqsadaha hawlaha macdan baadhista iyo macdan qodista.
9. In la' dhiso hay'adihii macdan qodiseed, lana caddeeyo masuuliyadahoodii, xaq macdanta, kormeerka iyo indha'indhaynta ammaanka goobaha macdanta.
10. In la' illaaliyo bed-qabka deegaanka, dadka ku dhaw godadka macdanta laga qodaayo iyo shaqaalaha ka shaqaynayaba.

CUTUBKA LABAAD
MAAMULKA MACDANTA

Qodobka 5^{aad}
Lahaanshaha iyo Gacan ku haynta Macdanta

1. Macdan kasta oo iyada oo dabiici ah laga helo dhulka Somaliland hoostiisa ama guudkiisa, dooxyada, meelaha biyuhu maraan, aagga dhaqaale ee gaarka ah iyo dhulka ku guda jira xeyndaabka baddeed ama godan-badeedka berriga ku dhow ee Somaliland, waa hanti ay leedahay Jamhuuriyadda Somaliland waxayna ka talinteedu gaar u tahay dawladda dhexe ee Somaliland, waxaana uga masuul ah Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta.

Qodobka 6^{aad}
Mamnuucidda sahaminta macdanta ogolaansho la'aan

1. Qof ama Shirkadi toona macdan Kama baadhi karaan ama hawlgallo macdan qodis ah Kama samayn karaan dhulka hoose ama oogada dhulka Jamhuuriyadda Somaliland iyaga oo aan haysan ruqsad ama ogolaansho ay bixisay wasaraddu si'waafaqsan xeerkan.



2. Dhammaan dhulka laga helay macdan xaddigeedu gaadhsiisanyahay heer ganacsi, laga bilaabo maalinta xeerkan dhaqan galo waxa ku waajib ah cida ogolaanshaha sharciga ah ku heshay in ay uga qaadato liisanka ganacsi ee ku waaajibay, si'waafaqsan qodobbada xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka ee dhaqan galka
3. Hantida kheyraadka macdaneed waxa ay si'xeerkan waafaqsan ugu wareegaysaa qofka ama shirkadda ruqsadda macdaneed loo siiyay si sharci ah.
4. Iyada oo la raacayo xeerkan:
 - b- Xidhmo cabbir dhul oo gebi ahaanba ku yaal gudaha Somaliland uu yahay baloog
 - t- Dhul loo haysto ogolaansho ama ruqsad macdaneed oo wasaaraddu u bixisay si'xeerka waafaqsan.
 - j- Qof ama shirkad midna lama siin karo ruqsadda xidhmooyin dhul (baloogyo) badan oo isku deegaan ku yaal kuwaasi oo ay ku jiraan macdano kala duwan. si' loo ilaaliyo xaq muwaadiniintu u leeyiin in ay helaan fursadaha macdan qodista.
5. Badbaadinta asaarta, lama taaban karo wixii aasaar ah sababta oo ah aasaartu waa hidaha iyo sooyaalka ee umada kaydka u ah.
6. Wasaaraddu marka ay ogolaanshiyo ka hesho Madaxweynaha Somaliland waxa ay u ogolaan kartaa qof ama shirkad in muunad macdan laga baadhayo ka qaataan goobaha ay aasaartu taallo.
7. Goob macdaneed oo ruqsad loogu qaatay si'waafaqsan xeerka waxa muunad (sample) macdaneed looga qaadi karaa cabbirka ugu yar ee nooc macdan kasta oo la saddex jeer laabay, haddii aanu khabiir macdaneed ku talin marka la'eego nooca macdanta in cabbir muunad ah oo cabbirkaasi ka badan loo baahanyahay si' loo gaadho u jeeddada laga leeyahay qaadista muunadda macdanta ee lagu xusay xeerkan.
8. Qaranku waxa uu xuquuq u leeyahay in uu wada iibsado ka hor inta aan la' iibin dhammaan macdanaha istaraatiijiga ah ee laga helay ama laga soo saaray gudaha xuduudaha Somaliland.
9. Helitaanka keyd Macdaneed.
 - b- Qofkii ka hela keyd macdaneed meel aanu ruqsad u haysan ama cid kale aanay ruqsad u lahayn, waxa uu keydka uu helay warbixintiisa u soo gudbinayaa wasaaradda.
 - t- Wasaaradu, waxay isla marka ay hesho war bixinta ku qoran farqadda (8.1) ay samayn doontaa jawaab celin qoraal ah oo cadaynaysa inuu helay warbixinta.
 - j- Qofka oo soo gudbiya warbixinta helitaan keyd macdaneed, waxa la' siin doonaa xuquuqda ugu horraysa ee ah in uu soo dalbado ruqsadda macdaneed ama xuquuq kale oo u dhiganta iyo tixgalin shaqaale.

Qodobka 7^{aad}

Noocyada Ruqsadaha Macdaneed

1. Ruqsadda Xuquuqaha Macdaneed ee soo socda ayaa lagu bixiyaa si'waafaqsan xeerkan:



- b- Ruqsadda Sahan Hordhac ah: waxa ay ruqsadlaha siinaysaa xuquuq sahan oo aan iyaga keliya u gaar ahayn (non-exclusive right) oo ay ku sameeyaan sahamin kheyraad macdaneed sida uu dhigayo xeerkani.
- t- Ruqsadda Sahaminta Macdanta: waxa ay ruqsadlaha siinaysaa xuquuq gaar ah (Exclusive right) oo ay ku sameeyaan baadhitaan kheyraad macdaneed oo ah sida uu dhigayo xeerkani.
- j- Ruqsadda Macdan Qodis Qadiimiga ah: waxa ay ruqsadlaha siinaysaa xuquuq uu ku sameeyo macdan qodis qadiimi ah sida uu dhigayo xeerkani.
- x- Ruqsadda Macdan Qodis Kooban: waxa ay ruqsadlaha siinaysaa xuquuq gaar ah si' ay u sameeyaan hawlgallo macdan qodis kooban sida uu dhigayo Xeerkani.
- Kh- Ruqsadda Macdan Qodista: waxa ay ruqsadlaha siinaysaa xuquuq gaar ah si' ay u sameeyaan hawlgallo macdan qodis sida uu dhigayo xeerkani.
- d- Ruqsadda Siihaysasho: waxa ay ruqsadlaha siinaysaa xaquuq loogu ilaaliyo keydka macdaneed sida uu dhigayo xeerkani.

Qodobka 8^{aad}

Goobaha ka reebban in ruqsado Macdaneed lagu bixiyo

1. Wasaaraddu ma bixin doonto ruqsado macdaneed oo cid awood u siinaya hawlgallo macdan sahamin ama qodis oo laga sameeyo: dhulka ka reebban in la' bixiyo si'waafaqsan xeerkan iyo Xeerka Maamulka Dhulka Xeer Lr. 17/2001 iyo Xeerarka Maareynta Deegaanka Xeer Lr.79/2018 iyo Beeraha Xeer Lr.08/1998 ee dhaqan-galka ah sida:
 - b- Dhulka seerayaasha ah
 - t- Goob xilligaa loo haysto ogolaansho ama ruqsad kale
 - j- Ceel-biyoodyada
 - x- Dhul si' gaar ah loo leeyahay ha noqoto cidda lihi qof ama shirkad ama iskaashato ama cid kale oo shaqsiyad qaanuuni ah leh.
 - Kh- Iyo dhammaan goobaha kale ee xeerarka kale ee dhaqan-galka ah lagu sheegay.

Qodobka 9^{aad}

Ogolaansho

1. Masuul kasta oo laga codsado in uu bixiyo dhul hay'ad dawli ahi leedahay si' looga baadho macdan waa in muddo 30 maalmood gudahood ah ku bixiyaan ogolaansho ama diidmo sababeysan.
2. Dhulka daaqsinka ah waxa isla'ogolaanaya Wasaaradda Macdanta, Wasaaradda Deegaanka Iyo Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, iyaga oo la'kaashanaya degmada iyo deegaanka.
3. Qof kasta ama shirkad kasta ama cid kasta oo qaanuuni ahi dhulka ay leedahay haddii ay dawladdu u baahato in macdan laga baadho ama la' farogaliyo waa in ay weydiisato ogolaansho qofkaas ama shirkaddaas ama iskaashatadaas.



4. Qof kaas ama shirkaddaas ama iskaashatadaasina waa in ay kaga soo jawaabaan muddo 60 cisho gudohood ah oo uu ku diidaa ama uu ku ogolaadaa haddii uu kasoo jawaabi waayo waxa loo qaadanayaa in aanu ogolaan, wax farogalin ahna laguma samayn karo.

Qodobka 10^{aad}

Shaqaalaynta iyo Tababaridda Muwaadiniinta Somaliland

1. Si' loo xaqiijiyo xirfad gudbinta iyo kobcinta aqooneed ee muwaadiniinta, cidda haysata ruqsadaha macdaneed waa in ay wasaaradda u soo gudbisaa barnaamij faahfaahsan oo ah shaqaalaynta iyo tababaridda muwaadiniinta Jamhuuriyadda Somaliland, wasaaraddu waa in ay bayaan ku soo bandhigtaa warbixintan oo ku qortaa bogga rasmiga ah ee internet-ka ee wasaaradda.
2. Gudbinta iyo ansixinta barnaamijka uu dhigayo faqradda 1^{aad} ee qodobkani waa in uu ahaadaa shuruud lagu xidho siinta ruqsad macdaneed.
3. Wasaaraddu waxa ay samayn doontaa hagid siyaasadeed oo wax ka badan ka sheegaysa dhaqan gelinta qaybtan.
4. Cidda haysata ruqsad macdaneed waxa ay mudnaanta kala doorasho ee shaqaalaynsiin doontaa xubnaha bulshada deegaanka iyo muwaadiniinta kale ee Somaliland.
5. Marka ay tahay hawlgaal baaxad weyn, cidda haysata ruqsad macdaneed waxay:
 - b- Samayn doontaa barnaamij tababar oo loogu talo galay in ay ka faa'iidaan shaqaaluhu.
 - t- Aqoon kobcin u samayn doontaa shaqaalaha.
6. Waxa waajib ku ah loo shaqeeyaha in uu xaqiijiyo fayo-qabka iyo nabadgalyada qofka shaqaalaha ah ee u shaqaynaya iyo cid kasta oo soo booqanaysa ama imanaysa meesha ay ka socoto.

Qodobka 11^{aad}

Mudnaan Siinta Waxyaalaha Dalka Gudahiisa Lagu Sameeyo

1. Cidda haysata xuquuq macdaneed, marka ay samaynayaan hawlo macdan sahamin, qodis, kala sifayn, kala shaandhayn iyo hagaajin, safrin ama wax kale oo macaamil ah oo macdanaha la' xidhiidha waa in ay mudnaanta ugu badan ee suurtoagal ah siiyaan:
 - b- Waxyaalaha lagu semeeyo Somaliland gudaheeda
 - t- Adeegyada ay bixiyaan xubnaha bulshada deegaanka iyo muwaadiniinta Somaliland
 - j- Shirkadaha ama ganacsiyada ay leeyihiin muwaadiniinta Somaliland.

Qodobka 12^{aad}

Ka qaybqaadashada iyo ka qaybgalka dawladda

1. Marka ay ruqsadda macdaneed tahay mid la'xidhiidha hawlgaal macdan qodis baaxad weyn, Qaranku waxa uu ku yeelan doonaa boqolkiiba toban (10% of Mineral Value) oo ah saami bilaa kharash loogu xambaarayo saamiyada raasamaalka, kaas oo aan Qaranku bixinayn wax dhaqaale ah oo uu hawlaha kaga qayb qaadanayo.



2. Qaranku Shirkadda waxa uu ku yeelanaya saami, kaas oo ay isla'ogalaanayaan shirkadda ama ganacsadaha haysta ruqsadda macdaneed.
3. Jamhuuriyadda Somaliland waxa ay xaq ugu leedahay shirkadda ruqsadda ama ogolaanshaha macdan qodista la'siiyay boqolkiiba toban (10%) oo faa'iido ah iyada oo lagu xisaabinaayo qiimaha macdanta oo aan waxba looga baahnayn in ay Somaliland ku darsato wax qaadhaan ah, raasamaal ah ama kharash ah.
4. Qaddarka cashuurta ah ee la'saarayo faa'iidada shirkaddu macdanta ka heshay waa boqolkiiba toban (10%) oo loo xisaabiyo si'waafaqsan xeerarka maaliyadeed ee Somaliland:

b- Wasiirku waxa uu xaq u leeyahay in uu u beddelo nidaamka cashuurta faa'iidada shirkadda mid ku salaysan habka qaybsiga waxsoosaarka.

x- Dhammaan wixii tabarucaad ah ee loogu talo galay in deegaanka la' siiyo waxa laga jarayaa cashuurta waqtiga la'bixiyo.

Kh- Ruqsadleyaasha ogolaanshaha macdaneed waxa la'siinayaa dammaanad maaliyadeed, halkas oo wax-ka-beddel kasta oo degdeg ah oo lagu sameeyo xeerkani aanu saamaynayn ruqsaddii macdaneed ee la'siiyay ka hor wax-ka-beddelka iyada oo wax laga beddelo qodobbada dhammaan lacag bixinta mooyaane.

CUTUBKA SADDEXAAD

Qodobka 13^{aad}

Awoodaha Iyo Waajibaadka Wasaaradda

1. In ay dejiso siyaasadda Xukuumadda ee ku waajahan sidii loo sahamin lahaa, isla markaana looga faa'iidayasan lahaa kheyraadka dabiiciga ah ee dalka.
2. In ay bixiso, sidoo kalana maamusho ruqsadaha hawlaha sahaminta, baadhista iyo qoditaanka macdanta si'xeerarka waafaqsan.
3. In ay ku kala xadayso saamiga degmooyinka, gobolladda iyo dawladda dhexe si' waafaqsan xeerkan.
4. In ay horumariso arrimaha khuseeya daahfuridda macdanta.
5. In ay dejiso qorshayaasha iyo barnaamijyada lagaga faa'iidaysto kheyraadka macdanta iyada oo lagu xisaabtamayo arrimaha deegaan iyo dhaqaale.
6. In ay ka hawl gasho ilaalinta, isticmaalka iyo maamulka kheyraadka dabiiciga ah ee dalka si'waafaqsan xeerkan.
7. In ay bixiso ruqsadaha macdanta.
8. In ay horumariso cilmibaadhista la'xidhiidha baahida tiknoolajiyadeed ee macdanta.
9. In ay diyaariso qorshaha xukuumadda ee fududaynta hawlaha macdan baadhista si' loo dhiirrigaliyo maalgashiga.



10. In ay ururiso, keydiso sidoo kalana xafiddo xogaha keydka macdanta dalka iyo samaynta bangi lagu keydiyo macluumaadka cilmiyeed ee la'xidhiidha macdanta si' loo ogaado xaddiga kheyraad macdaneedka Somaliland leedahay.
11. In ay diiwaangeliso ilaalisana diiwaannada shirkadaha wada hawlaha macdaneed iyo mashaariicda kale ee ku lammaan.
12. In ay samayso habraacayada deegaanka iyo shuruudaha looga baahan yahay hawlaha macdan qodiseed.
13. In ay diyaariso siyaasado dhammaystiran oo khuseeya kheyraadka macdanta Somaliland, kana warbixiso fulintooda, lana wadaagto guddi-hoosaadka Golaha Wakiillada ee ay khusayso.
14. Iyo in ay fuliso xilalka iyo waajibaadyada kale ee ay u xilsaaraan xeerarka dalku.
15. In ay u'eegto ku habboonaanta macdan qodista iyo deegaan ku haboon si'waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dhanqan-galka ah, iyada oo tixgalinta koowaad la' siin doono ilaalinta bii'adda.
16. Ilaalinta macdanta kale ee ku jirta goobo ruqsadda loo siiyay shirkadaha ama ilaalinta macdan kale oo ku jirta goobtaa shirkada ruqsadda loo siiyay.

Qodobka 14^{aad}

Dhulka ka reeban Macdan Qodista

1. Wasaaraddu ma bixin karto ruqsado macdaneed oo cid awood u siinaya hawlgalo macdan sahamin ama qodis oo laga sameeyo:
 - b- Wax dhul ah oo ay wasaaraddu ku sheegtay, isaga oo ku qoraya wargeyska bayaaminta, in uu yahay dhul ka reebban hawlgallada noocaas ah ama seereha iyo ceel-biyoodyada.
 - t- Goob xilligaa loo haysto ogolaansho ama ruqsad hore.

Qodobka 15^{aad}

Cidda ay ka reebbantahay Ruqsadda Xuquuq Macdaneed

1. Xuquuqaha macdaneed la' siin maayo:
 - b- Shaqsi da'ddiisu ka yar tahay shan iyo toban (15) jir.
 - t- Shaqsi dhaqaale ahaan caydhoobey oo si' rasmi ah loogu caddeeyey amaba loogu dhawaaqay in uu dhaqaale ahaan caydhoobey, iyada oo ay caddaynayso qoraal sharci ah ama uu heshiis ama qorshe la'midoobid ah la'galay ciddii daynta ku lahayd ama uu uga faa'iidaynaya cidda deynta ku lahayd.
 - j- Qofka waalan iyo qof kasta oo shuruucaddu ka reebtay qadashada bixinta xaquuq macdaneed.
 - x- Shirkad la'xaraashay haddii aan xaraashiddu ahayn mid qayb ka ah qorshaha dib u qaabaynta ama iskudhafidda cid kale in lagula midoobay.
 - Kh- Haddii amar xaraashid ah ay maxkamad garsoor sugani ka soo saarto in shirkaddaas albaabada loo xidhay ama la' kala diray guddidii shirkadda.



d- Cid la'midawday ciddii daynta ku lahayd.

2. Xuquuq macdaneed la' siin maayo shakhsi ama iskaashato ama shirkad ama cid kale oo iskaashato ah, daneeyayaal iskaashato ama shirkado oo ku daymoobay ruqsad macdaneed kale ama ay ka dhacday ama laga joojiyay ruqsad macdaneed kale.
3. Qof kasta oo dawladda ka tirsan ama shaqaale dawladeed ah ama shirkad kasta oo xidhiidh si' toos ah ula leh cidda maareynaysa Xeerka Macdanta ma heli karaan mana haysan karaan wax xuquuq ruqsadeed ah.
4. Wasaaraddu waxa ay diidi kartaa in uu ruqsad u ogolaato qof ama shirkad taas oo hore u haysatay ruqsad lala noqday ama fal dambi lagu helay si'waafaqsan xeerkan ama xeerarka kale ee khuseeya.

Qodobka 16^{aad}

Waxyaabaha Shirkadda looga baahan yahay

1. In shirkadda shatiga la'siinayaa tahay mid dhaqan wanaagsan iyo aaminaad ku sifaysan oo lagu yaqaano si' loogu aamino kheyraadka dalka.
2. In ay tahay shirkad leh hanti ma guurto ah.
3. In ay haysato dhaqaale ku filan oo ay baadhis, soo saaris iyo daboolidda khasaaraha ay gaysatoba leedahay.
4. Ruqsad-hayste kastaa marka aanu ku sugnayn Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu magacaabanayaa wakiil deggan waddanka gudahiisa oo uga wakiil ah dhammaan arrimaha la'xidhiidha ruqsadda, hawlaha la'qabanaayo ee la'ansixiyey ama waajibaadka uu xambaaray xeerkan.
5. Ruqsad-hayste kasta oo haysta ruqsad macdaneed waa in uu leeyahay cinwaan rasmi ah oo lagala soo xidhiidho muddada ruqsaddiisu shaqaynayso.

Qodobka 17^{aad}

Macdanaha istaraatiijiga ah

1. Wasaaraddu waxa ay talo bixin u gudbin kartaa, ansixinna ka dalbi kartaa Golaha Wasiirrada, in macdanaha qaarkood ama keydad macdaneed loo bayaamiyo in ay yihiin macdano ama keydad macdaneed oo istaraatiiji ah.
2. Dhammaan macdanaha leh shucaaca (radioactive) waa macdano istaraatiiji ah.

Qodobka 18^{aad}

Diiwaanka Ruqsadaha macdaneed

1. Wasaaraddu waxa ay yeelanaysaa diiwaan guud ee Ruqsadaha Macdaneed oo koobsanaya dhammaan xogaha ruqsadlayaasha ka diiwaan gashan wasaaradda.
2. Diiwaanka Ruqsadaha Macdaneed waxa uu noqonayaa waraaqo qoran oo dawladeed waxaana loo baadhi karaa si'waafaqsan xeerkan marka la'bixiyo ajuurada loo dajiyay.



Qodobka 19^{aad}

Warbixinaha loo baahan yahay in la geliyo diiwaanka

1. Diiwaanka la'sameeyay ee ku xusan qodobka 18^{aad} ee xeerkan waxa uu ka koobnaan doonaa macluumaadka codsadhaha, bixinta ruqsadda, shaqada, ogaysiiska, kala wareejinta, iska soo celinta iyo ka joojinta Ruqsad Macdaneed.
2. Wasaaradda ayaa soo jeedinaysa xogaha iyo tilmaamaha kale ee laga yaabo in la geliyo diiwaanka.

Qodobka 20^{aad}

Awoodda Sixidda Diiwaanka iyo Caddaymaha Shahaadooyinka

1. Sarkaalka u xilsaaran Diiwaanka Macdanta ee wasaaradda ayaa saxaya hadii: -
 - b- Qalad lagu sameeyay diiwaanka.
 - t- Arrin si'aan sax ahayn loo galiyay ama lagu qoray diiwaanka.
 - j- Diyaarinayaa, ansixinayaa, caddaynayaa isla markaana u soo saarayaa ruqsadlaha nuqulkii asalka ahaa, marka uu bixiyo ajuurada ku waajibtay.

Qodobka 21^{aad}

Beddelidda Waraaqaha Asalka ah

1. Sarkaalka u xilsaaran Diiwaanka Macdanta marka uu xaqiijiyo in la'bixiyay ajuurada waajibtay, waxa uu soo saarayaa shahaado caddaymeed muujinaysa: -
 - b- Ruqsad bixinta, shaqada, hakinta, ruqsad kala noqoshada iyo tirtiridda Ruqsad Macdaneed si'waafaqsan xeerkan.
 - t- In qayb dhul ah oo la'caddeeyey in uu la'xidhiidho xuquuq macdaneed kaas oo leh taariikhda lagu caddeeyay shahaadada.
 - j- In macdanta shahaadada ku qeexan ahayd tu la'xidhiidhay xuquuqda macdaneed.
 - x- In qofka shahaadada ku qorani ahaa ama yahay qofka xuquuqda macdaneed leh ama lahaa.
 - Kh- In shuruudda lagu qeexay shahaadada ay tahay ama ahayd shuruudda xuquuqda macdaneed.
 - d- In la'diiwaan geliyay taariikhda shahaadada layska soo celiyey.

Qodobka 22^{aad}

Mamnuucidda daahfurka xogta

1. Lama shaacin karo wax macluumaad ah oo la'xidhiidha xogta ku jirta warbixinta loo soo gudbiyay si'waafaqsan xeerkan ee uu soo gudbiyay ruqsadle xuquuq macdaneed, inta xuquuqda macdaneed ee ruqsadlaha la'siiyay ka shaqaynaayso dhulka ay xogtu la' xidhiidho, haddii aan ogolaansho laga helin ruqsadlaha haysta xuquuqdaa macdaneed.
2. Xogta aan la'shaacin karin ee faqadda 1^{aad} ee qodobkani sheegay waxa ka reebban: -
 - b- Arrin la'xidhiidha maamulidda xeerkan: Ujeeddo dacwad maxkamadeed.
 - t- Sababo sahamineed ama xog raadin oo loo fuliyo sida xeerkani dhigayo.



- j- Xogtaasi la'siiyo sarkaal dawladdeed ama lataliye dawladdeed oo awood loo siiyey in uu xogtaas helo.
- x- Ama Arrimo la'xidhidha diyaarinta xogta xisaab-cabbireedka sahaminta iyo qodista macdanta ee dawladda ama cid ka wakiil ahi diyaarinayso.
- Kh- In haddii Guddi-hoosaadyada Goleyaasha Baarlammaanka ee u qaabilsan arrimaha deegaanka iyo kheyraadka dabiiciga ah ay ka soo dalbadaan wasaarad xogtaasi in ay waajib tahay in uu la'wadaago.

Qodobka 23^{aad}

Aasaasidda Hay'adda Korjoogteynta Macdanta Qaranka

1. Guddida Korjoogteynta Macdanta Qaranka oo ahaan doonta laanta ganacsi ee dawladda ee la'xidhiidha macdanaha, waxa lagu aasaasi doonaa laba sanno gudahood oo ka bilaabmayso ansixinta xeerkan.
2. Guddida Korjoogteynta Macdantu waxa ay ahaan doontaa hay'ad leh jiritaan sharci, lehna astaan ama summad iyo shaambad shirkadeed.
3. Hay'addu waxa ay yeelan doontaa guddi iyo sarkaalka madaxa fulinta.

Qodobka 24^{aad}

Guddiga Hay'adda Korjoogteynta Macdanta Qaranka

1. Guddida hay'adda korjoogteynta Qaran oo la shaqayn doona wasaarada macdanta waxa ay ka koobnaan doontaa guddidu Toddoba (7) xubnood oo ka kala iman doona: -
 - a-. Saddex (3) xubnood oo ka socda Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta oo Wasiirku ku soo magacaabo aqoontooda heer jaamacadeed oo ku saabsan cilmiyada Geology-ga iyo baadhista macdanta.
 - t-. Laba (2) xubnood oo ay soo magacaabaan Ruqsadlaha, Shirkadaha iyo Iskaashatooyinka macdantu.
 - j-. Laba (2) xubnood oo ay soo magacaabaan baarlamaanku Guurtida iyo wakiiladu.
2. Guddidu waxa ay fadhigooda ugu horreeya iska dhex dooranayaan guddoomiye iyo kuxigeen.
3. Muddada ay xilka xafiiska haynayaan xubnaha guddidu waa saddex sanno, waana la' cusboonaysiin karaa hal muddo xileed oo kaliya.

Qodobka 25^{aad}

Kal-fadhiyadda Guddida Korjoogteynta

1. Guddidu waxa ay fadhiisanayaan bishiiba hal mar:
 - a- Gudoomiyaha ayaa gudoominaya kal-fadhiyadda Guddida
 - t- Gudoomiye kuxigeenka ayaa gudoominaya kal-fadhiyadda guddida marka gudoomiyuhu maqan yahay.



- j- Kal-fadhiga guddidu waxa uu ku ansaxmayaa saddex xubnood.
- 2. Kal-fadhiyada aan caadiga ahayn waxa ay u dhici karaan:
 - b- In guddoomiyuhu isagu yeedho
 - t- Marka wasiirku dalbado.
 - j- In saddex meelood hal meel guddidu codsato.
 - x- In uu dalbado madaxa fulinta ee shirkaddu.

Qodobka 26^{aad}
Waayidda xubinnimada Guddida Hay'adda

- 1. Qofku waxa uu ku waayayaa xubinnimada, haddii uu:
 - b- Uu is casilo, isaga oo ogaysiis siinaya wasiirka.
 - t- Uu ka maqnaado saddex kulan oo isku xiga ee kal-fadhiga guddida isaga oo aan wax ogolaansho ah ka haysan guddoomiyaha.
 - j- Lagu helo fal-dembiyeed oo lagu xukumo xabsi muddo sannad ah.
 - x- Uu awood ahaan gudan kariwaayo in uu fuliyo waajibaadkiisa xubin guddi ahaaneed, taas oo ay sababtay caafimaad darro jidheed ama maskaxeed oo muddo dheer ah.

Qodobka 27^{aad}
Shaqooyinka Hay'adda Korjoogteynta Macdanta Qaranka

Shaqooyinka Hay'addu waxa ay noqon doontaa in ay:

- 1. In ay fuliso hawlaha sahaminta macdanta si'waafaqsan xeerka: -
- 2. In ay fuliso qoditaan macdaneed si'waafaqsan xeerkan iyo xeer-nidaamiyayaasha kale.
- 3. In ay geli karto heshiisyo ganacsi oo dhinaca macdanta ah iyada oo la'tashanaysa wasaaradda iyo hay'adaha ay ksayso.
- 4. In ay iibsano karto saami shirkad kale iyada oo la'tashanaysa wasaaradda iyo hay'adaha ay khusayso.
- 5. In ay kormeerto sida ay u socodaan hawlaha macdan qodistu.
- 6. In ay cid dacwayso iyadana la'dacwayn karo.
- 7. In ay ka talo bixiso qaabka ugu habboon ee macdanta dalka looga faa'iidayso karo.

Qodobka 28^{aad}
Waajibaadka Guddoomiyaha Hay'adda

Waajibaadka Guddoomiyaha Guddidu waa:

- 1. In uu isugu yeedho guddida.
- 2. In uu guddoomiyo shirarka guddida.



3. In uu warbixin siiyo hay'adaha ay khusayso.
4. In uu saxeexo dhammaan warqadaha sharci ee shirkadda.

Qodobka 29^{aad}

Waajibaadka Guddoomiye kuxigeenka Guddida Hay'adda korjoogtaynta Macdanta ee Qaranka

Waajibaadka Guddoomiye Kuxigeenka Guddidu waa:

1. In uu guddoomiyo shirarka guddida marka guddoomiyuhu maqan yahay.
2. In uu qabto shaqooyinka guddoomiyuhu u igmado.
3. In uu qabto hawlaha guddoomiyaha marka guddoomiyuhu kaga maqan yahay hawlo shaqo iyo caafimaad.

Qodobka 30^{aad}

Awoodaha baadhiseed iyo kormeer

1. Hay'adda Korjooteynta Macdanta Qaran waxa ay samayn karaan kormeeris iyo baadhis iyada oo aan waxba loo dhimayn dhammaan shuruucda jirta, iyaga oo marka ay doonaan: -
 - b- Geli kara, baadhi kara dhulka hawlaha macdaneed laga wado ama dhulka ruqsad macdaneed loo haysto.
 - t- Gali karaan dhul, dhisme, gaadhi, koontiinar, diyaarad ama dhul hay'addu aaminsantahay in loo isticmaalo hawlaha macdan qodiseed.
 - j- Fulin kartaa kormeerro lagu sameeyo dhismeyaasha dhulka aan ka baxsanayn inta ruqsadda macdanta khusaysa ee loo isticmaalo ama loo isticmaalay hawlaha macdanta.
 - x- Marka loo baahdo waxsoosaar, waa la'kormeereri karaa waana la'baadhi karaa, qaadi kartaa nuqullada ruqsadaha, ogolanshaha, diiwaannada iyo keydka nooc kasta oo qoraallo la'xidhiidha xeerkan iyo fulinta hawlaha ay ogolaadeen xaq macdanta, ruqsad ama ogolaansho lagu bixiyay si'waafaqsan xeerkan.
- Kh- waxayna u diraysaa muunadahan tijaabo iyo baadhis sida lagu heshiiyo.
- d- Qaban kartaa walax kasta, Koontinar kasta, gaadhi kasta, qalab kasta, alaab kasta iyo shay kasta oo hay'addu uu u aragto ama rumaysto in lagu galay fal dambiyeed xeerkan ama xeerar kale sheegeen in uu danbyahay.
- r- Marka ay siiso ruqsadlaha saddex (3) bilood oo ogaysiis ah, waxa ay u dhigi kartaa qalab kasta dhulka dushiisa, dhismeyaasha, kontiinnarrada, baabuurta si'loola socdo in qodobbada xeerkan iyo xeerarka kaleba loo hoggaansamay.
- s- Gali karta goob kasta, si ay u hubiso hannaanada ugu wanaagsan ee macdan qodista iyo macdan kala sifeynta oo ay ku jiraan waxyaabaha la'xidhiidha badbaadada iyo caafimaadka.
- Sh- Amri kartaa joojin kumeel-gaadh ah hawlgallada ay u arkaan in hawlaha macdanta ama hawlaha waxsoosaarku ay halis u yihiin in ay noqdaan kuwo keenaya khatar iyo dhibaato.



Dh- U gudbin kartaa hay'addaha amniga iyo garsoorka cid kasta oo ay u aragto in ay ku gafeen ama jebiyeen waajibaadyada lagu sheegay qodobbada xeerkan.

CUTUBKA AFRAAD HESHIIS MACDANEED

Qodobka 31^{aad} Heshiis macdaneed

1. Wasaaraddu, iyada oo raacaysa Dastuurka, xeerkan, xeerka maalgashiga iyo xeerarka maaliyadda waxa uu heshiis macdaneed la'geli karaa cidda haysata ruqsad macdan baadhais ama qodis.
 2. Heshiiska macdaneed waxa ku jiri doona shuruudaha iyo waxyaalaha loo baahan yahay ee la'xidhiidha:
 - b- Lagu caddeeyo goobaha iyo macdanaha la'sahaminayo ama la soo saarayo.
 - t- Qaabka loo samayn doono hawlgallada macdan baadhista ama macdan qodista
 - j- Waajibaadka ilaalinta deegaanka si'waafaqsan shuruucda deegaanka Jamhuuriyadda Somaliland iyo kuwa caalamiga ahba.
 - x- Hannaanka xallinta khilaafaadka iyada oo loo marayo gorgortan, wadatashi, dhexdhexaadin iyo hababka maxkamadaha Somaliland.
- Kh-Qorshaha sifaynta iyo hagaajinta macdanta Jamhuuriyadda Somaliland laga soo saaro.
- d- Qaabka qiimeynta macdanta iyo xilliyada dib-u-eejista lagu samaynayo.
 - r- Hubinta Heshiisyada caymiska.
 - s- Qorshayaasha horumarinta bulshada.
- Sh- Bixinta ajurooyinka, cashuuraha, lacagaha laga gooyo iyo wixii kale ee waajibaad dhaqaale ah.
- Dh- Heshiisyadda maaliyadeed.
- c- Heshiiska macdaneed looma turjumanayo in qayb ka mid ah ka saamaxayso shirkadda wax sharci ahaan looga baahan yahay.
 - g- Heshiis macdaneed waxa loo diyaarin doonaa si'waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Somaliland iyo habraacyada caalamiga ah.
 - f- Dhammaan heshiisyada macdaneed waxa loo gudbin doonaa Golaha Wakiillada si' ay u ansixiyaan sida uu dhigayo Dastuurka Somaliland.
 - q- Heshiis macdaneed oo kasta oo aan waafaqsanayn Dastuurka, xeerkan iyo xeerarka kale ee dhaqan-galka ah waa waxba kama jiraan.
 - k- Waa in shirkadda ruqsada la'siinayo ee macdanta baadhaysa ama soo saaraysaa ay bixiso lacag curaar ah ama dhigaal ah oo u dhaxaysa \$50,000 USD illaa \$100,000 USD"



- l- In Muddada heshiiska shirkad lagula gali karo in ay baadho ama saarto macdan aanay ka badnaan muddo 5 sanno ah, iyada oo loo cusboonaysiin karo shirkaddii ka soo baxda ujeeddada heshiiska hore.
- m- Iyada oo loo eegayo Dastuurka iyo wixii kale ee sharci qoran ah, dhammaan heshiisyada macdaneed ee loo galo si'waafaqsan xeerkan waa la baahin doonaa waxaana laga dhigi doonaa kuwo bulshadu dariiq ay ku hesho leedahay.
- n- Wasaaraddu waxa ay hubin doontaa in dariiq loo helo warbixinaha xeerkan oo ay ku jiraan in la' hubiyo in heshiisyada macdaneed iyo xaaladahooda daba socda laga heli karo bogga rasmiga ah ee internet-ka ee wasaaradda masuulka ka ah macdanta iyo macdan qodista.

Qodobka 32^{aad}

Faafinta Heshiisyada Macdaneed ee gaarka ah

1. Iyada oo la eegayo Dastuurka iyo xeer kasta oo dhaqan-gal ah, dhammaan heshiisyada noocan ah ee la galo waxa loo faaf-reebayaa nidaam xeerarka dalka waafaqsan.

CUTUBKA SHANAAD RUQSADDAHA MACDANTA

Qodobka 33^{aad}

Ruqsadda ka ganacsi Macdanta

1. Ruqsadlaha haysta ruqsadda ka ganacsiga macdantu waa uu ka ganacsan karaa macdanta; wuu iibsan karaa, sii iibin karaa, dib-u-farsamayn karaa, dhalaalin karaa si' sharci ah oo waafaqsan xeerkan.

Qodobka 34^{aad}

Shuruudaha Ruqsadda ka ganacsiga Macdanta

1. Ruqsadda kaganacsiga Macdanta waxa qaadan kara:
 - b- Shirkad kasta oo saamiga shirkadda ay boqolkiiba boqol (100%) leeyihiin muwaadinin reer Somaliland ahi.
 - t- Codsaduhu waa in uu haysto khibraddii, farsamadii, kartidii iyo dhaqaalihii uu ku fulin lahaa hawsha ka ganacsiga macdanta.
 - j- Shirkaddaas oo aan lagu helin danbi lagu xukumay shantii sanno ee u danbaysay.

Qodobka 35^{aad}

Codsiga Ruqsadda kaganacsiga Macdanta

1. Codsiga lagu dalbanayo ruqsadda kaganacsiga macdanta waxa loo gudbinayaa Wasaaradda iyada oo la'raacayo foomka loogu talagalay laguna soo lifaaqay caddaynta ajuurada codsiga ee la'bixiyay.
2. Codsiga lagu dalbanayo ruqsadda kaganacsiga Macdanta:
 - b- Waxa lagu xusayaa magaca u diiwaan gashan shirkadda, goobta ay deggen tahay shirkaddu, shahaadada Shirkadda, nuqulka xeerarka shirkadda, Magacyada mulkiilayaasha iyo Magacyada dhammaan saamileeyda hela faa'iido dhan boqolkiba toban (10%) ama in ka badan.



- t- Waxa kale oo ku jiraya codsiga, xogta shirkadda oo ay ku xusantahay qaabka ay u fulinayso kaganacsiga macdanta.
- j- Aqoonta iyo khibradda masuulka shirkadda u qaabilsanaanaya iskudubaridka barnaamijka kaganacsiga macdanta.
- x- Sidoo kale waxa wehelinaya codsiga bayaan si'gaar ah ay ugu xusan yihiin farsamada iyo ilaha dhaqaale ee codsaduhu haysto.
- Kh- Codsiga kasta oo ruqsada kaganacsiga macdanta ah sida lagu xusay qodobkan faqraddiisa 2^{aad} waa in lagu diiwaan galiyaa laguna ilaaliyaa diiwaanka ruqsadaha wasaaradda si'waafaqsan xeerkan.
- d- Codsiga kasta oo loo diiwaan galiyay si'waafaqsan qodobkan faqraddiisa 2^{aad} waxa la siinayaa lambarka iyo taariikhda uu soo galay si ay caddayn ugu noqoto codsadaha ama wakiilkiisa in codsiga laga guddoomay.

Qodobka 36^{aad}

Bixinta Ruqsadda kaganacsiga Macdanta

1. Wasaaraddu marka ay hesho codsiga ruqsadda kaganacsiga macdanta, isla markaana uu ku qanco in la'buuxiyay shuruudihii xeerkanii tilmaamay waxa uu u bixinayaa ruqsadda qaabkii loo asteeyay si'waafaqsan xeerkan.
2. Wasaaraddu, waa in ay afar toddobaad gudahood oo ka bilaabmayaa taariikhda codsadaha la'diiwaangaliyay, ku ogaysiisaa in codsadaha ruqsadda ka ganacsiga macdanta loo ogolaaday ama loo diiday, haddii loo diiday waa in uu u raaciyaa sababta loogu diiday.
3. Codsaduhu marka uu helo ogolaanshaha wasaaradda ee ku xusan qodobkan, faqraddiisa 2^{aad}, waxa uu bixinayaa ajuurada ku waajibtay ruqsadda la siiyay.
4. Codsadaha ka noqday codsigiisa hore, qoraalna ku caddaayay, wasaaraddu way laalaysaa ruqsaddiisa, ajuuro celisna ma leh.

Qodobka 37^{aad}

Muddada iyo cusboonaysiinta Ruqsadda kaganacsiga Macdanta

1. Ruqsadda kaganacsiga macdantu waa sannadle; ruqsadda kaganacsiga macdantu waxa ay dhacaysaa maalinta ruqsadda la soo saaray maalinteeda oo ah muddo 12 bilood ah.
2. Ruqsadluhu waxa uu codsan karaa in loo cusboonaysiiyo, ruqsadda ka-ganacsiga macdanta wuxuuna u gudbinayaa codsigaas wasaarada isaga oo raacaya foomka loogu talo galay kuna lifaaqaya warqadda caddaynta ajuurada ee la'bixiyay.
3. Marka codsiga mudo kordhinta la soo gudbiyo, waa in codsaduhu buuxiya dhamaan shuruudaha xeerkan iyo xeer-nidaamiyayaasha la xidhiidha
4. Marka wasaaradu ku qanacdo in dhammaan shuruudihii la'buuxiyay, waxa uu bixinayaa cusboonaysiinta Ruqsadda Kaganacsiga Macdanta.



Qodobka 38^{aad}

Waajibaadka Ruqsadlaha Kaganacsiga Macdanta

1. Waxa dheer shuruud kasta oo lasoo xusay, in ruqsadle kasta oo haysta Ruqsadda Kaganacsiga macdantu in uu: -

b- Waa in uu ilaaliyaa diiwaanka ganacsiga macdaneed sida ugu habboon.

t- Ku keydiyaa diiwaanka xogtan soo socota: -

j- Nooca iyo miisaanka macdanta la iibiyay ama la soo iibsaday.

x- Taarikhda la iibsaday ama la iibiyay.

Kh-Waa in uu wasaaradda u gudbiyaa nuqulka xaqiiqda ah ee diiwaanka xogta hal nuqulna ka sameeyey saddex bilood kasta oo ay weheliyaan caddayn sharci ah oo sax ah, bilaha koobaad, afraad, toddobaad iyo tobnaad ee sannad kasta.

Qodobka 39^{aad}

Xuquuqaha Ruqsadda Kaganacsiga Macdanta

1. Iyada oo la'raacayo qodobbada xeerkan, Ruqsadda Kaganacsiga Macdanta waxa ay siinaysaa ruqsadlaha xuquuqaha soo socda: -

b- Ruqsadlaha waxa u bannaan in uu kaganacsado dhammaan macdanaha kala duwan si'waafaqsan xeerka.

t- Ruqsadluhu waxa uu u iib gayn karaa macdanta waddanka dibaddiisa si'waafaqsan xeerka.

j- Waxa uu ka qayb qaadan karaa bandhigyada macdanta Jamhuuriyadda Somaliland ee lagu soo bandhigayo waddanka gudihiisa iyo dibadiisaba si' xeerkan iyo xeer-nidaamiyayaashiisaba waafaqsan.

x- Waxa uu farsamayn karaa ama dib u hagaajin karaa macdanta waddanka si' tayada loo kordhiyo.

Qodobka 40^{aad}

Waxyaalaha ka reebban Ruqsadda Kaganacsiga Macdanta

1. Qofna kama ganacsan karo macdan, haddii aanu sifo sharci ah ku haysan ruqsadda kaganacsiga macdaneed.

2. Ma geli karo heshiis ku saabsan macdan baadhis ama soo saaris.

3. Ganacsadaha haysta ruqsadda kaganacsiga macdaneed ma dhoofin karo macdan haddii aanu haysan Ruqsadda Ogolaanshaha Dhoofinta Macdanta.

Qodobka 41^{aad}

Soodeejinta iyo dhoofinta macdanta

1. Qofna ma soo dhoofsan karo mana dhoofin karo macdan nooca ay doonto ha ahaatee, haddii aanu haysan ogolaansho ay bixisay wasaaradda ka masuul ka ah macdanta dalka



2. Qof kasta oo doonaya in uu dhoofiyo macdan ama soo dhoofsado macdan nooca ay doonto ha ahaatee, waxa uu u baahanyahay in uu helo ogolaanshaha wasaaradda iyada oo la' raacayo foomka loogu talo galay laguna soo lifaaqayo caddaynta ajuurada codsiga in la' bixiyay.
3. Wasaaraddu waxa ay tixgalinaysaa waxyaabahan soo socda marka uu qiimaynayo codsiga lagaga hadlayo qaybtan: -
 - 3.1. Ogolaanshaha soo dhoofinta macdantu waa in uu haysto-3.1.1. Shahaado uu ka wato hay'adaha u xilsaaran arrimaha macdanta ee waddanka laga keenayo macdanta.
 - 3.1.2. Waa in uu haystaa warqad shaybaadh iyo qiimeyn ah oo uu ka wato hay'adaha u xilsaaran arrimaha macdanta ee waddanka laga keenay macdanta.
 - 3.2. Ogolaanshaha dhoofinta macdanta waa in uu haysto:
 - 3.2.1. Waa in uu ka haystaa ruqsad macdaneed wasaaradda Macdanta.
 - 3.2.2. Waa in uu ka haystaa shahaado shaybaadh macdaneed hay'adaha ama shirkadaha ku shaqada leh ee la' aqoonsan yahay.
 - 3.2.3. Waa in uu haystaa waraaqda caddaynta ee bixinta ajuurada macdanta iyo ajuurooyinka maamul (Admin fee).
 - 3.2.4. Waa in uu soo celiyaa warbixin ku saabsan natijada shaybaadhka Macdanta.
 - 3.2.5. Qof ama Shirkadda aan haysan ruqsadda macdanta ee ay ka mid yihiin dalxiisayaasha, waxa la' siinayaa ruqsad ku meelgaadh ah si' ay u dhoofiyaan muunadda macdanta ka dib, marka ay bixiyaan ajuurada ku waajibtay si' waafaqsan xeerkan.

Qodabka 42^{aad}

Muddada ogolaanshaha, dhoofinta iyo soo dejinta macdanta

1. Ogolaansha soo dejinta macdanta ama dhoofinta macdantu:
 - 1.1 Waxa ay ansax tahay muddo hal bil ah.
 - 1.2 Waxa uu ku koobanyahay xaddigga macdaneed ee lagu xusay ogolaanshaha.
 - 1.3 Waxa la' isticmaali karaa hal mar.
 - 1.4 Waxa dalka ka saari kara macdanta, keliya qofka ama shirkadda ku qoran warqadda ogolaanshaha wasaaradda.

MACDAN QODISTA QADIIMKA AH

Qodobka 43^{aad}

Macdan qodista qadiimiga ah

1. Macdan qodista qadiimiga ah waxa loola jeedaa hawlaha macdan qodiseed ee ku salaysan hab-dhaqameedka qadiimiga ah ee qalabka la'isticmaalayaana yahay mid qadiimi ah. Hawlaha macdan qodista qadiimiga ah waa in aan:



1.1 Loo isticmaalin sahamin xeel-dheer, mishiinno, tiknoolojjiyad, kiimiko ay ku jiraan meerkuri (Mercury) iyo siyanaydh (Cyanide) ama walxaha qarxa.

1.2 Aan la' qodin in aan ka badnayn toban mitir (10 m) oo hoos ah.

Qodobka 44^{aad}

Shuruudaha ogolaansha macdan qodista qadiimiga ah

1. Qof kasta oo doonaya in uu bilaabo hawlaha macdan qodista qadiimka ah waxa uu soo codsanayaa ogolaanshaha macdan qodista qadiimka ah.
2. Ogolaanshaha macdan qodista qadiimka ah waxa la'siinayaa:
 - 1.1 Muwaadin ama muwaadiniin Jamhuuriyadda Somaliland ah; haddii ay yihiin Iskaashato ama shirkad waa in aanay tiradoodu ka badnayn laba iyo toban (12) qof.

Qodobka 45^{aad}

Codsiga ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah

1. Codsiga kasta oo ku saabsan bixinta ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah waxa loo soo gudbinayaa wasaaradda iyada oo la'raacayo foomka loo dejiyay oo koobsanaya:
 - 1.1 Liiska dhammaan magacyada ku hawlgalaya ogolaanshaha.
 - 1.2 Nooca macdanta iyo goobta oo ay soo xaqiijiyeen khubarada culuunka dhulka ee wasaaraddu.
 - 1.3 Warqadda aqoonsiga Somaliland ee codsadaha ka masuulka ah ogolaanshaha.

Qodobka 46^{aad}

Bixinta ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah

1. Wasaaradu marka ay hesho codsiga ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah, isla markaana ay ku qanacdo in la'buuxiyay shuruudihii xeerkanii tilmaamay waxa ay bixinaysaa ogolaanshaha qaabkii loo asteeyay si'waafaqsan xeerkan.
2. Wasaaraddu, waxa ay ku ogaysiinaysaa codsadaha ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga qoraal go'aankiisa codsiga, haddii codsiga la' diidana, iyada oo loo sheegayo sababaha loogu diiday.

Qodobka 47^{aad}

Muddada iyo cusboonaysiinta ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah

1. Ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah waxa ay ansax noqonaysaa muddo hal (1) sanno ah, sannad kastana waa la' cusboonaysiin karaa, waxaase shardi ah in cidda ogolaanshaha haystaa ay u hogaansanto shuruudaha iyo waxyaabaha loo baahanyahay ee ku xusan xeerkan.

Qodobka 48^{aad}

Wareejinta ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah

Ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah lama wareejiin karo

Qodobka 49^{aad}

Waajibaadka haystaha ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah

1. Cidda haysata ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ahi waa in aanu: -



- 1.1. Isaga oo aan ka bixin xayndaabka aqoontiisa iyo kheyraadka uu haysto waxa uu si' niyad wanaag ah uga fulinayaa goobta ogolaanshaha loo siiyay hawlaha macdan sahaminta iyo macdan qodista.
- 1.2. Wasaaraddu waxa ay siinaysaa macluumaadka la' xidhiidha hawlaha qodista Macdanta marka ay wasaaraddu u baahdo ama sida lagu heshiiyo.
- 1.3. Waxa uu si' degdeg ah u uga jawaabayaa amar kasta oo la' xidhiidha hawshiisa qodista macdanta kaas oo ka soo baxa wasaaradda, ujeeddadiisuna tahay hubinta badbaadada ama sida ugu wanaagsan ee loo qodi karo macdanta.
- 1.4. Waxa uu iibinayaa macdanta uu ka helay goobta ogolaanshaha ee macdan qodista qadiimiga ah loo siiyay, sida lagu heshiiyay.
- 1.5. Waxa uu fulinayaa dayactirka iyo dib u soo kabashada goobihii macdanta laga qoday.
- 1.6. Waxaana uu ilaalinayaa diiwaanka saxda ah ee qoraallada ee goobaha ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah loo siiyay, diiwaannadaana waxa la' soo bandhigayaa marka arrimo baadhiseed uga baahdo wasaaraddu ama sarkaalka u xilsaarani arrimahan.
- 1.7. Waa in uu soo gudbiyaa dhammaanba warbixinaha, sida lagu heshiiyay.
- 1.8. Haystaha ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah haddii uu u hoggaansami waayo dhammaan shuruudaha uu waajibiyay xeerkan ama xeerarka kale ee dalka, waxa lagala noqonayaa ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah, ganaax iyo ciqaabta ka waajibaysana waxa go'aaminaysa maxkamadda si'waafaqsan xeerkan.

Qodobka 50^{aad}

Xuquuqda haystaha ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah

1. Iyada oo loo hogaansamayo qodobadda xeerkan oo macdan qodista qadiimiga ahi leedahay, cidda haysata ogolaanshaha waxa ay xaq u leedahay in ay ka fuliso hawlo macdan qodiseed goobta ogolaanshaha loo siiyay.
2. Cidda haysata ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ahi, waxa uu gali karaa goobta ogolaanshaha loo siiyay, macdanta ayuu ka soo saari karaa waanu iibin karaa ama wareejin karaa macdanta ogolaansha loo siiyay.
3. Waxa ka shaqaalaysiin kara dhulka ogolaanshaha loo siiyay shaqaale aan badnayn kuna filan oo aan xirfad lahayn, goobta loo siiyay ogolaanshaha.

Qodobka 51^{aad}

Goobta ogolaanshaha Macdan qodista qadiimiga ah

1. Goob dhuleedka la'tixgaliyay in lagu bixiyo ogolaanshaha macdan qodista qadiimiga ah, waa in aanu ka badan lix iyo toban kiiloomitir oo laba jibaaran (16 km²) dhul kaasina waa in uu noqdaa mid isku dhajisan sida uu qeexayo xeerkan.



RUQSADDA SAHANKA HORDHACA AH

Qodobka 52^{aad}

Sahanka hordhaca ah

1. Sahanka hordhaca ahi waxa weeye hawlgallada sahanka macdaneed ee loo fulinayo si' aan qoto dheerayn laguna baadhayo kheyraadka macdanta iyada oo loo adeegsanayo sahanka jiyoofoosikada, sahanka jiyookimikada, sahanka dhulka ee dusha laga sawiro ama farsamooyinka kale ee isku xidha sawirrada fog ee satalaytka iyo daraasaynta oogada sare ee dhulka.

Qodobka 53^{aad}

Shuruudaha ruqsadda Sahanka hordhaca ah

1. Ruqsadda sahanka hordhaca ah waxa qaadan kara:
 - 1.1. Qof kasta ama shirkad kasta oo ah waddani ama ajanabi ah.
 - 1.2. Codsaduhu waa in uu haysto khibraddii, farsamadii, kartidii iyo dhaqaalihii uu ku fulin lahaa hawsha sahaminta.
 - 1.3. Shirkad kastaa waa in ay ka diiwaan gashan tahay dalka Jamhuuriyadda Somaliland
 - 1.4. Qof kaas ama shirkaddaas oo aan lagu helin danbi lagu xukumay shantii sanno ee u danbaysay.
 - 1.5. Hawlaha sahanka hordhaca ah waa in uu yahay mid ku habboon wax dhibaato ahna u geysanayn deegaanka.

Qodobka 54^{aad}

Codsiga Ruqsadda Sahanka hordhaca ah

1. Codsiga lagu dalbanayo Ruqsadda Sahanka hordhaca ah waxa loo gudbinayaa wasaaradda iyada oo la'raacayo foomka loogu talo galay laguna soo lifaaqay ajuurada codsiga.
2. Codsiga lagu dalbanayo ruqsadda sahanku waxa uu ka koobnaanayaa:
 - 2.1. Haddii uu codsaduhu yahay shaqsi, waa in uu ku xusaa magaciisa oo saddexan, waddanka uu u dhashay, meesha uu deggenyahay iyo sawir nooca baasaaboorka ah oo uu dhawaan galay.
 - 2.2. Haddii uu codsaduhu yahay shirkad, waxa ku xusnaanaya magaca u diiwaan gashan, goobta ay shirkaddu ka jirto, shahaadada Shirkadda, nuqulka xeerarka shirkadda, Magacyada iyo dhalashada agaasimayaasha iyo magacyada dhammaan saamileeyda hela faa'iido dhan boqolkiba toban (10%) ama in ka badan.
 - 2.3. Waxa kale oo ku jiraya codsiga, xogta Shirkadda oo ay ku xusantahay sahanka hordhaca ah ama hawlaha baadhitaan ee ay Somaliland ama waddamada kale ka fulisay.
 - 2.4. Aqoonsiga Magaca iyo khibradda masuulka shirkadda u qaabilsanaanaya iskudubbaridka barnaamijka sahanka macdanta.
 - 2.5. Waxa wehelinaya qorshaha qaabka loo sahaminayo oo waafaqsan inta ruqsadda loo siiyay.
 - 2.6. Sidoo kale waxa wehelinaya codsiga bayaan si'gaar ah ay ugu xusan yihiin farsamada iyo ilaha dhaqaale ee codsaduhu haysto.



2.7.Soo gudbin daraasad ama cilmibaadhis faahfaahinaysa saamaynta hawsha macdan sahamintu ku yeelan karto deegaanka iyo qaababka ay ugu talo galeen in ay wax kaga qabtaan dhibaatooyinka deeganka soo gaadhi kara.

2.8.Dejinta habka ay wasaaradda, maamulka gobol, degmo iyo bulshada deegaanka ula socodsiiyaan nidaamka ay u fulinayaan hawlhooda sahamineed.

2.9.Soo gudbinta barnaamijka ku saabsan sida ay doonayaan in muwaadiniinta Somaliland uga shaqaalaysiiyaan iyo bixinta qandaraasyada.

2.10. Iyo wixii shuruud ah ee kale ee xeer-nidaamiye jideeyay.

3. Codsiga kasta oo Ruqsadda Sahanka hordhaca ah sida lagu xusay qodobkan faqraddiisa 2^{aad} waa in lagu diiwaangeliyaa laguna ilaaliyaa diiwaanka ruqsadaha wasaaradda si'waafaqsan xeerkan.
4. Codsiga kasta oo loo diiwaan galiyay si'waafaqsan qodobkan faqraddiisa 2^{aad} waxa la siinayaa lambarka iyo taariikhda uu soo galay si'ay caddayn ugu noqoto codsadaha ama wakiilkiisa in codsiga laga gudoomay.

Qodobka 55^{aad}

Bixinta Ruqsadda Sahanka hordhaca ah

1. Wasaaradu marka ay hesho codsiga Ruqsadda Sahanka hordhaca ah, isla markaana uu ku qanco in la buuxiyay shuruudihii xeerkan tilmaamay waxa uu u bixinayaa ruqsadda qaabkii loo asteeyay si'waafaqsan xeerkan.
2. Wasaaradu, waa in ay afar toddobaad gudahood oo ka bilaabmaya taariikhda codsadaha la'diiwaangaliyay, ku ogaysiiysaa in codsadaha ruqsadda sahanka hordhaca ah loo ogolaaday ama loo diiday, haddii loo diiday waa in ay u raaciysaa sababta loogu diiday.
3. Codsaduhu marka uu helo ogolaanshaha wasaaradda ee ku xusan qodobkan faqraddiisa 1^{aad}, waxa uu bixinayaa ajuurada waajibtay ruqsadda la'siiyay.
4. Codsadaha ka noqday codsigiisa hore qoraalna ku caddeeyay, wasaaraddu way laalaysaa ruqsaddiisa, ajuuro celisna ma leh.

Qodobka 56^{aad}

Muddada iyo cusboonaysiinta Ruqsadda Sahanka hordhaca ah

1. Mudada Ruqsadda Sahanka hordhaca ah waa in aanay ka badnaan muddo laba sanno ah.
2. Ruqsadlaha sahanka hordhaca ah, waa in uu muddo saddex bilood ka hor dhicitaanka ruqsadda ka soo dalbadaa wasaaradda in muddo kordhin loogu sameeyo qayb ama dhammaan goobta uu ruqsadda sahanka hordhaca ah u haystay.
3. Ruqsadda Sahanka hordhaca ah waxa la cusboonaysiin karaa hal mar.
4. Marka codsiga muddo kordhinta la soo gudbiyo, waa in codsaduhu buuxiyaa dhammaan shuruudaha xeerkan iyo xeer-nidaamiyayaasha la'xidhiidha:
5. Marka wasaaraddu ku qanco in dhammaan shuruudihii la'buuxiyay, waxa uu bixinayaa cusboonaysiinta Ruqsadda Sahanka hordhaca ah.



Qodobka 57^{aad}

Waajibaadka ruqsaddlaha haysta ruqsadda sahanka hordhaca ah

1. Waxa dheer shuruud kasta oo lasoo xusay, in ruqsadle kasta oo haysta Ruqsadda Sahanka hordhaca ahi in uu: -
 - 1.1 Dhulka Ruqsadda Sahanka hordhaca ah loo siiyay ka fulinayaa sahan macdaneed si'waafaqsan barnaamijka sahanka hordhaca ee la'ogolaaday
 - 1.2. Waxa uu ka bilaabayaa goobaha ruqsadda sahanka hordhaca ah loo siiyay sahamin xilliga ku cad barnaamij sahan macdaneed ee lagu heshiiyay.
 - 1.3. Waxa uu u soo gudbinayaa wasaaradda muunadaha, xogta iyo warbixinaha dhanka jiyoolajiga ah sida loogu heshiiyay.
 - 1.4. In aanay samayn qoditaan, godayn, dhul jeexid amaba qaab kasta oo kale oo dhulka guudkiisa lagu bannaynaayo si' loo baadho macdan.
 - 1.5. Waxa uu wargalinayaa isla markaana kala tashanayaa wasiirka iyo bulshadaba hawlaha macdan sahamineedka hordhaca ah ee socota.
 - 1.6. Waxa uu ilaalinayaa bed-qabka dhulka isla markana ku soo celinayaa sidiisii dhulka ku waxyeelooba hawlaha sahaminta hordhaca ah si'waafaqsan halbeegyada iyo xeerarka deegaanka.
2. Kharashka sannadlaha ah ee lagu isticmaalayo hawlaha sahanka hordhaca ahi waxa uu noqonayaa lacag Somaliland shillin ah oo u dhiganta 300 USD (Saddex boqol oo Doollar) ugu yaraan halkii kiiloomitir ee laba jibaaran.

Qodobka 58^{aad}

Xuquuqaha Ruqsadda Sahanka hordhaca ah

1. Iyada oo la'raacayo qodobbadda xeerkan, Ruqsadda Sahanka hordhaca ahi waxa ay siinaysaa ruqsadlaha xuquuqaha soo socda: -
 - 1.1. Waxa uu sahan macdaneed ka fulin karaa goobta la'siiyay.
 - 1.2. Goobta Ruqsadda Sahanka hordhaca ah loo siiyay waxa uu ka fulinkaraa sahan dhulka iyo cirkaba ah si'waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dhaqan-galka ah
 - 1.3. Waxa uu ka fulinayaa dhammaan barnaamijka sahanka hordhaca ah isaga oo raacaya qaabka lagu heshiiyay.
 - 1.4. Waxa uu qaadi karaa soona saari karaa muunado macdaneed oo aan ka badnayn inta lagu heshiiyay.
 - 1.5. Waxa uu ka dhisan karaa taandhooyin, dhismeyaal kumcel-gaadh ah isla markaana waxa uu dhex dhigan karaa qalabyo kala duwan.
 - 1.6. Ruqsaddani ma siinayso xuquuq dhul lahaansho ruqsadlaha, ma kirayn karo ama ajuuro kama qaadan karo dhulka ruqsadda loo siiyay.



2. Waxa uu baabinayaa dhammaan dhismayaasha kumcel-gaadhka ah ee ruqsadluhu ka dhistay goobta ruqsadda muddadii sahanku socday.

Qodobka 59^{aad}

Waxyaalaha ka reebban ruqsadda sahanka hordhaca ah

1. Ruqsadda Sahanka hordhaca ah lama wareejin karo.
2. Ruqsadda Sahanka hordhaca ah looma ogola qodista macdanta iyo noocyada kala duwan ee god macdaneedyada.
3. Goobaha loo bixinayo sahanka hordhaca ah maaha goob hore loogu bixiyay sahanka hordhaca ah oo macdantan ama macdanaha la'xidhiidha ah, goobta ruqsad sahamin, goobta ruqsad siihaysasho ama goobta macdan qodista.

Qodobka 60^{aad}

Goobta ruqsadda sahanka hordhaca ah

1. Goob-dhuleedka la'tixgaliyay in lagu bixiyo ruqsadda sahanka hordhaca ah waa in aanu ka badan boqol iyo laba iyo sagaashan kiiloomitir oo laba jibaaran (192 km²) waana in aanu ka yaraan siddeed kiiloomitir oo laba jibbaaran (8 km²) dhul kaasina waa in uu noqdaa mid isku dhejisan sida uu qeexayo xeer-nidaamiye.

Qodobka 61^{aad}

Warbixinta Sannadlaha ah

1. Muddo lixdan (60) maalmood gudahood ka dib sannad guuradda markii Ruqsadda Sahanka hordhaca ah la'bixiyay waxa ruqsadlaha laga rabaa in:
 - 1.1. In uu usoo gudbiyo warbixin farsamo oo faahfaahinaysa dhammaan hawlihii la qabtay muddadii sannadka ahayd iyo natiijooyinka ka soo baxay.
 - 1.2. In uu soo gudbiyo warbixin maaliyadeed oo koobaysa dhammaan kharashaadka baxay sida kharashaadka mushaharka ku baxay shaqaalaha iyo kuwa qalabaynta ku baxay.
2. Haddii uu ruqsadluhu aanu sida ku xusan faqraddan sare ee 1^{aad} uu muddo sannad ah wax shaqo ah ama baadhitaan ah ku samayn goobta uu ruqsadda u qaatay, rukhsaddaasi way kaa buraysaa oo wax xaq oo dambe uma yeelan karo in uu dhulka loo siiyay sahaminta uu xaq u yeesho.

RUQSADAHA SAHAMINTA MACDANTA

Qodobka 62^{aad}

Ruqsadda sahaminta macdanta

1. Ruqsadda sahaminta macdantu waxa weeyaan ruqsad ama ogolaansho loo qaato sahaminta macdanta iyo keydadkeeda iyada oo la'adeegsanayo farsamooyinka cilmiga dhulka, jiyookiimikada, jiyoofiisikalka ama dariiqooyin kale ee la'xidhiidha farsamooyinka qodaalka, godaynta, dhul jeexidda iyo muunad qaadistaba.

Qodobka 63^{aad}

Shuruudaha ruqsadda Sahaminta Macdanta

1. Ruqsadda Sahaminta Macdanta waxa qaadan kara:



- 1.1.Qof kasta ama shirkad kasta oo ah waddani ama ajanabi ah
- 1.2.Codsaduhu waa in uu haysto khibraddii, farsamadii, kartidii iyo dhaqaalihii uu ku fulin lahaa hawsha sahaminta.
- 1.3.Shirkad kastaa waa in ay ka diiwaangashan tahay dalka Jamhuuriyadda Somaliland.
- 1.4.Qof kaas ama shirkaddaas oo aan lagu helin danbi lagu xukumay shantii sanno ee u danbaysay.
- 1.5.Hawlaha sahanka hordhaca ah waa in uu yahay mid ku habboon wax dhibaato ahna u geeysanayn deegaanka.
- 1.6.Goobaha loo bixinayo sahaminta macdantu maaha goob hore loogu bixiyay sahanka hordhaca ah oo macdantan ama macdanaha la'xidhiidha ah, goobta ruqsad sahamineed, goobta ruqsad siihaysasho ama goobta macdan qodista.
- 1.7.In uu soo gudbiyaa warbixin jiyoolajiyeed oo faahfaahan, kana hadlaysa goobta la' soo codsaday
- 1.8. In uu soo gudbiyo warbixin jiyookimistari oo ka hadlaysa goobta la' soo codsaday.

Qodobka 65^{aad}

Codsiga ruqsadda sahaminta macdanta

1. Codsiga lagu dalbanayo ruqsadda Sahaminta macdanta waxa loo gudbinayaa Wasaaradda iyada oo la'raacayo foomka loogu talo galay laguna soo lifaaqay caddaynta ajuurada la' bixiyay.
2. Ruqsadda Sahaminta macdanta waxa dalban kara qof iyo wax ka badan mid walbana shuruudihiisa ayaa laga rabaa:
 - 2.1 Haddii uu shaqsi yahay waa in codsiga lagu caddeeyo magaciisa oo saddexan iyo waddanka uu u dhashay.
 - 2.2.Haddii ay shirkad tahay, magaca shirkadda, meesha ay ka diiwaan gashan tahay, shahaadada diiwaangalinta, nuqulka saxda ah ee xeer-hoosaadka iyo dastuurka shirkadda, magacayada iyo dhalashada masuuliyiinta shirkadda iyo magacyada saamileyda ee saamigoodu ka badan yahay boqolkiiba Shan (5%).
 - 2.3.Qorshaha dhulka ay rabto in ruqsadda sahamineed loo siiyo, waana in khariirad si' fiican loo sawiray laguna muujiyo dhammaan macluumaadka looga baahanyahay xogta goobta.
 - 2.4.Tilmaamo muujinaya macdanta ruqsadda loo qaadanayo.
 - 2.5.Qoral muujinaya ama caddaynaya awoodda dhaqaale iyo ta farsamo ee shirkaddu haysato si' ay u fuliso hawlaha sahamineed ee ruqsadda loo siiyay.
 - 2.6.Barnaamij baadhiseed dhammaystiran oo sheegaya shaqada sahaminta ee laga qabanayo dhulka ruqsadda loo bixiyay, qiyaas ku saabsan kharashka hawsha lagu qabanayo iyo muddada la'dhammaystirayo barnaamijka, qiyaas la'xidhiidha saamaynta barnaamijka sahaminta macdanta iyo hadhaaga walxaha lagaga tagay ku yeelan karto deegaanka sahaminta laga sameeyay.
 - 2.7.Waxa u furan codsada ruqsadda in uu sheego wax kasta oo uu is leeyahay Wasaaraddu way tixgalinaysaa.



3. Codsiga kasta oo ah Ruqsadda Sahaminta Macdanta sida lagu xusay qodobkan faqraddiisa 2^{aad} waa in lagu diiwaan geliyaa laguna ilaaliyaa diiwaanka ruqsadaha wasaaradda si'waafaqsan xeerkan.
4. Codsiga kasta oo loo diiwaan geliyay si'waafaqsan qodobkan faqraddiisa 2^{aad} waxa la siinayaa lambarka iyo taariikhda uu soo galay si' ay caddayn ugu noqoto codsadhaha ama wakiilkiisa in codsiga laga guddoomay.

Qodobka 66^{aad}

Bixinta Ruqsadda Sahaminta Macdanta

1. Wasaaraddu marka ay hesho codsiga dalabka ruqsadda sahaminta isla markaana uu ku qanco waxa uu u bixinayaa ruqsadda si'waafaqsan xeerkan.
2. Wasaaraddu, waa in ay afar toddobaad gudahood oo ka bilaabmayaa taariikhda codsadhaha la'diiwaangeliyay, ku ogaysiiyaa in codsadhaha Ruqsadda Sahaminta Macdanta loo ogolaaday ama loo diiday, haddii loo diiday waa in ay u raaciysaa sababta loogu diiday.
3. Codsaduhu marka uu helo ogolaanshaha wasaarada ee ku xusan qodobkan; faqraddiisa 1^{aad}, waxa uu bixinayaa ajuurada waajibtay ruqsadda la'siiyay;
4. Codsadhaha ka noqday codsigiisii hore, qoraalna ku cadeeyay wasaaraddu waxa ay laalaysaa ruqsaddiisa, ajuuro celisna ma leh.

Qodobka 67^{aad}

Muddada iyo cusboonaysiinta ruqsadda sahaminta macdanta

1. Muddada Ruqsadda Sahamintu waa ugu badnaan saddex (3) sanno oo ka bilaabmayaa maalinta la'soo saaro ruqsadda, waxaana la'cusboonaysiin karaa laba jeer oo middiiba tahay laba sanno, waxase shardi ah:
 - 1.1. In cabbirka dhulka la'yareeyo 25% cusboonaysiin kasta.
 - 1.2. Ruqsadlaha soo dalbada cusboonaysiintu waa in uu buuxiyay dhammaan shuruudda iyo waajibaadka ruqsad cusboonaysiinta looga baahan yahay sida xeerkan iyo xeer-nidaamiyayaasha ka farcamaya ku cad.

Qodobka 68^{aad}

Waajibaadyada Ruqsadda Sahaminta Macdanta

1. Cid kasta oo hesha Ruqsadda Sahaminta Macdantu waa:
 - 1.1. In ay u fuliso hawsha sahaminta macdanta si' xilkasnimo leh, nabdoon, iskaashi leh, xirfad leh, wax-ku-ool ah oo waafaqsan xeerkan, xeerarka kale ee dalka iyo xeerar nidaamiyayaasha xeerkan laga dheegtay.
 - 1.2. In ay u fuliso hawlaha sahaminta macdanta si' masuuliyaddi ku jirto oo deegaanka iyo bulshadaba aanay dhibi ka soo gaadhin.
 - 1.3. In ay hawlaha sahaminta macdanta ee ay wadaan ku ekaadaan dhulkii ruqsadda loo siiyay oo keliya si'waafaqsan barnaamijka sahanka ee la'ansixiyay.



- 1.4. In ay bilaaban hawlaha sahanka macdanta lixdan (60) maalmood gudahood oo ka bilaabanta maalintii ruqsadda la'siiyay.
- 1.5. In ay sida ugu dhakhsaha badan ugu wergalinayaan wasaaradda keyd kasta oo macdaneed oo ay baadhista ku ogaadaan oo ay ku jiraan kuwa aanay ruqsadda u haysan in ay baadhaan.
- 1.6. In la ilaaliyo deegaanka ruqsadda lagu bixiyay lagana dhigo mid bed-qaba dibna loogu soo celiyo xaaladdiisii hore haddii wax dhibaato ah ama dhaawac ahi ka soo gaadho hawlaha sahaminta macdanta sida:-
 - 1.6.1 In la buuxiyo godadka, ceelasha iyo meelaha kale ee bannaan ee samaysmay markii hawsha sahamintu socotay.
 - 1.6.2 In dib loogu soo celiyo dhulka sidiisii hore iyada oo loo hogaansamayo xaq helidda deegaan bad-qaba oo ammaan ah si'waafaqsan xeerkan, xeer-nidaamiyayaasha ka farcama iyo xeerka deegaanka ee dalka.
- 1.7. In aan biyaha wasakhoobay ama dareerayaasha kale ee sahaminta loo isticmaalo lagu qubin deegaanka, haddii ay wax yeelanayaan, loona keydiyo qaab xeerarka waafaqsan.
- 1.8. In aan la'sahamin dhulka kaymaha ee keydka ah ilaa la helo ogolaanshaha wasaaradda, isla markaana wadatashi lagala sameeyo hay'adaha kale ee dawladda ee ku shaqada leh lana raaco shuruudaha uu xeerku u dejiyay.
- 1.9. In uu ogolaado Sahanka jiyoolajiyeed ee hay'adaha dawladdu ka wadaan goobta ruqsadda lagu bixiyay haddii aanay hawlahaasi waxba u dhimayn shaqada sahaminta ee ruqsadluhu wado.
- 1.10. In uu soo si joogto ah u soo gudbiyo xogaha la'xidhiidha shaqada uu qabanayo si'waafaqsan xeerkan.
- 1.11. In uu bixiyo ajuurada ama khidmadda ku waajibtay iyo kirada sannadlaha ah.

Qodobka 69^{aad}

Xuquuqaha Ruqsadda Sahaminta Macdanta

1. Cid kasta oo hesha ruqsadda sahaminta Macdantu waxa ay xaq u leedahay:
 - 1.1. Iyada oo la'raacayo xeerkan, ruqsadda sahaminta macdantu waxa ay siinaysaa ruqsadlaha goobta ruqsadda in uu ka fuliyo baadhis macdaneed oo dhammaystiran si uu u ogaado xogta macdanta uu rabo iyo kuwa kaleba, isla markaana fuliyaa hawl-kaabayaasha baadhista u fudaydinaaya.
 - 1.2. In ruqsadluhu ama wakiilkiisu uu dhulka ruqsadda loo siiyay ka shaqayn karo.
 - 1.3. In uu ka shaqaalaysiin karo tiro kasta oo dad ah oo uu rabo si uu hawsha sahaminta uga midha dhaliyo.
 - 1.4. Waxa uu ku wargelinayaa si' joogta ah wasiirka iyo bulshada deeganka sida ay hawlaha sahamintu u socdaan.
 - 1.5. In uu qaadi karo, saari karo isla markaana dhoofin karo muunado aan ka badnayn xaddiga macquulka ah ee sahanka macdantu keensanayso, haseyeeshee waa in uu helaa ogolaanshaha wasaaradda oo qoraal ah, ka hor inta aanu qaadin.



- 1.6. Waxa uu samayn kara muunad qaadis iyo tijaabada farsamayn macdan aan ka badnayn xaddiga loogu baahanyahay in lagu ogaado keydka macdanta, waana in ogolaansho qoraal ah laga helaa wasaaradda ka hor inta aan la'samayn muunadda.
- 1.7. Waxa uu degi karaa dhulka ruqsadda loo siiyay, isla markaana ka dhisan karaa dhismeyaal kumeel-gaadh ah sida kaamam (camps) IWM. Si ay ugu suurto gasho in uu hawsha sahaminta macdanta uu si'wax-ku-ool ah ugu fuliyo isaga oo la'tashanaya maamullada deeganka.
- 1.8. In ay ka qodaan godad, hogag iyo ceclal macdaneed si' loo hubiyo macdanta dhulka hoostiisa ku qarsoon.
- 1.9. Waxa uu dhisi karaa waddooyin kumeel-gaadh ah, isaga oo raacaya xeerarka arrintaa la'xidhiidha.
 - 1.9.1. Waxaanu baabinayaa meclaha la'qoday marka muddada heshiisku dhammaado, sida godadka iyo buundooyinka si' aan waxycello u gaadhin bulshada deeganka iyo dadka kaleba.

Qodobka 70^{aad}

Khidmadaha maamulka, cusboonaysiinta, sanadlaha iyo codsiga

1. Khidmadaha kala wareejinta, cusboonaysiinta sannadlaha, kharashka maamul iyo midda codsiga ruqsadda waxa go'aaminaya wasaaradda iyda oo lagu faafinayo wareegto wasiir. Khidmadaha sannadlaha ah waxa la'bixin karaa dhammaadka sannadka, haddii ruqsadda sahanka la'dhiibo ama ay dhamaatay ka hor inta aanu sannadku dhammaan khidmadda waa la'qiyaasayaa.
2. Kharashka sannadlaha ah ee hawlaha sahaminta macdantu waa shan boqol oo Doolar (US\$500) halkii kiiloomitir ee laba jibbaaran (1km²) muddada hore, kun Doollar (US\$ 1, 000) kiiloomitir laba jibbaaran (1km²) ka dib, dib u cusboonaysiinta u horreysa iyo saddex kun oo Doollar (US\$3,000) halkii kiiloomitir ee laba jibaaranba (1km²) ka dib, dib u cusboonaysiinta labaad.

Qodobka 71^{aad}

Xaqa beddelaadda Ruqsadda Sahaminta

1. Iyada oo loo hogaansamay qodobbada xeerkan, cid kasta oo haysata ruqsadda sahaminta macdaneed waxa ay xaq u leedahay in ay codsato ama la'siiyaba ruqsad macdan qodis ah oo la'xidhiidha qayb ama qaybo ka mid ah dhulka sahanka macdanta ee hore ruqsadda sahaminta loogu siiyay haddii: -
 - 1.1 Uu u hogaansamay isla markaana ka soo baxay waajibaadka Ruqsadda Sahanka ee ku xusan xeerkan.
 - 1.2 Uu fuliyo ama buuxiyo dhammaanba shuruudaha ruqsadda macdan qodista.

Qodobka 72^{aad}

Goobta Ruqsadda Sahaminta

1. Goobta Ruqsadda Sahaminta loo bixiyay waa in uu leydi noqdaa qaab ahaan ama sida ugu dhaw, waana in uu yeesho afar jiho isla markaana aanu ka badan boqol iyo laba-iyo sagaashan kiiloomitir oo laba jibbaaran (192 km²) cabir ahaan



Qodobka 73^{aad}
Warbixinta Sannadlaha ah

1. Muddo lixdan (60) maalmood gudahood ah ka dib, sannad guurada markii ruqsadda sahaminta la'bixiyay waxa ruqsadlaha laga rabaa in: -
 - 1.1 In uu u soo gudbiyo warbixin farsamo oo faahfaahinaysa dhammaan hawlihii la' qabtay muddadii sannadka ahayd iyo natiijooyinka ka soo baxay.
 - 1.2 In uu soo gudbiyo warbixin maaliyadeed oo koobaysa dhammaan kharashaadka baxay sida kharashaadka mushaharka ku baxay shaqaalaha iyo kuwa hawsha sahaminta lagu fuliyay.

RUQSADDA MADCAN QODISTA KOOBAN

Qodobka 74^{aad}
Macdan qodista kooban

Macdan qodista koobani waa macdan qodista macdanta lagula soo baxayo qalab farsamo iyo matoorro badka sare iyo dhulka hoostiisaba ah iyada oo aan dhulka la' qodayn wax ka badan labaatan (20) mitir.

Qodobka 75^{aad}
Shuruudaha macdan qodista kooban

1. Macdan qodis kooban waxa soo dalban kara qof ama shirkad hore loo siiyay Ruqsadaha Sahanka hordhaca ah ama sahaminta, heleyna xaddi macdaneed oo la soo saari karo.
2. Ruqsadda macdan qodista kooban waxa la'siinayaa qof kasta ama shirkad kasta oo si sharci ah uga diiwaangashan Soomaalilaan oo leh aqoonta, farsamada haystana dhaqaalihi iyo maaliyaddii ay ku fulin lahayd waajibaadyada ruqsaddu jidaynayso.

Qodobka 76^{aad}
Codsashada ruqsadda macdan qodista kooban

1. Codsiga lagu dalbanayo bixinta ruqsadda macdan qodista kooban waxa loo gudbinayaa wasaaradda iyada oo la'raacayo foomka loogu talo galay iyo habraaca loo asteeyay waxana codsiga: -
 - 1.1. Haddii codsadu yahay shaqsi, waxa uu ka koobnaanayaa magaciisa oo dhammaystiran, waddanka uu u dhashay, halka uu deggan yahay iyo sawir nooca baasaboorka ah oo uu dhawaan galay.
 - 1.2. Haddii ay shirkad tahay, waxa uu ka koobnaanayaa magaca shirkadda, meesha ay ka diiwaangashantahay, shahaadada diiwaangalinta, nuqul sax ah oo xeer-hoosaadka iyo dastuurka shirkadda ah, magacayada iyo dhalashada masuuliyiinta shirkadda iyo magacyada saamiile kasta oo saamigiisu ka badan yahay boqolkiiba shan (5%) saamiga shirkadda.
 - 1.3. Waxa uu ka koobnaanayaa magaca codsadhaha iyo shahadooyinkiisa aqoonneed oo kooban iyo taariikhda macdan qodiseed ee uu leeyahay Somaliland iyo adduunkaba.
 - 1.4. Waa in la'aqoonsadaa magaca iyo shahaadooyinkiisa aqoonneed ee qofka shirkadda u noqonaya maamulaha hawlaha macdan qodista Somaliland iyo kormeerkooda.
 - 1.5. Waa in la caddeeyaa nooca macdanta la' soo saarayo iyada oo loo eegayo warbixinta farsamo ee muujinaysa, qorshaha dhulka macdan qodista kooban loo dalbanayo.



- 1.6. Waa in la keenaa qoraal muujinaya awoodda farsamo iyo maaliyadeed ee codsadaha ruqsadda.
- 1.7. Sidoo kale ay wehelinayaan qorshaha guud ee qaabka macdan qodista loo fulinayo iyada oo la'raacayo habraacyada loo dejiyay.
- 1.8. Waa in ay bixiyaan faahfaahin ku saabsan saamaynta taban ama aan ku talo galka ahayn ee fulinta barnaamijka macdan qodista koobani ku yeelan karto deegaanka, taallooyinka iyo aasaarta qadiimiga ah, kuwaas oo ku yaal goobta loo qoondeeyay macdan qodista kooban iyo tallaabooyinka ay qaadayaan si' ay ula tacaalaan waxna uga qabanayaan iyo kharashaadka ay ugu talogaleen in ay wax kaga qabtaan dhibaatooyinkaas soo gaadhi kara deegaanka.
- 1.9. Waa in ay bixiyaan faahfaahin ku saabsan sida hawlaha u socon doonaan si loogu wargeliyo wasiirka iyo bulshadaba iyada oo laga tashanayo hawlgalka macdan qodista kooban.
- 1.10. Waa in lagu sheegaa arrin kasta oo codsaduhu u arko in wasaaraddu tixgalinayso.
2. Codsiga kasta oo ruqsadda macdan qodista kooban oo waafaqsan faqradda 1^{aad} ee qodobkan si degdeg ah ayaa loo diiwaan gelinayaa waxaana lagu ilaalinayaa diiwaanka codsiyada si' waafaqsan xeerkan.
3. Codsiga kasta oo loo diiwaan galiyay si' waafaqsan xeer-hoosaadka 2^{aad} ee xeerkan waxa la'siinayaa lambarka iyo taariikhda uu soo galay si' ay caddayn ugu noqoto codsadaha ama wakiilkiisa in codsiga laga guddoomay.

Qodobka 77^{aad}

Bixinta ruqsadda macdan qodista kooban

1. Wasaaradu marka ay hesho codsiga Ruqsadda Macdan Qodista Kooban ee ku xusan qodobkan, kuna qancdo dhammaanba shuruudaha iyo waxyaabaha kale ee loo baahanyahay waxa ay bixinaysaa ruqsadda macdan qodista kooban si' waafaqsan hannaankan.
2. Wasaaraddu waxa ay ay codsadaha ku ogeysiinayaa go'aankiisa bixinta ruqsadda macdan qodista kooban qoraal, haddii uu codsiga diidana wasaaraddu waxa ay faahfaahin ka bixinayaa sababta uu u diiday.
3. Wasaaradu, waa in uu afar toddobaad gudahood oo ka bilaabmaya taariikhda codsadaha la'diiwaangaliyay, ku ogeysiiyaa in codsadaha Ruqsadda Macdan Qodista Kooban loo ogolaaday ama loo diiday, haddii loo diiday waa in uu u raaciyaa sababta loogu diiday.
4. Codsaduhu marka uu helo ogolaanshaha wasaaradda ee ku xusan qodobkan faqraddiisa 1^{aad}, waxa uu bixinayaa ajuurada ku waajibtay ruqsadda la'siiyay.
5. Codsadaha ka noqday codsigiisii hore qoraalna ku caddeeyay, wasaaraddu way laalaysaa ruqsaddiisa, ajuuro celisna ma leh.

Qodobka 78^{aad}

Muddada iyo cusboonaysiinta ruqsadda macdan qodista kooban

1. Ruqsadda macdan qodista koobani waxa ay ansax tahay ugu badnaan muddo shan (5) sanno ah waana la'cusboonaysiin karaa waxaase u shardi ah in ruqsadluhu uu fuliyo shuruudaha xeerkan jideeyay.



Waajibaadka ruqsadlaha macdan qodista kooban

1. Ruqsad kasta oo macdan qodista kooban ah waxa loo bixinayaa si'waafaqsan qodobbada iyo shuruudaha lasoo sheegay, ruqsadluhuna:
 - 1.1. Waxa uu bilaabayaa soo saarista macdanta ama farsamaynta macdanta si'waafaqsan barnaamijka la ogolaaday.
 - 1.2. Isaga oo aan ka bixin xeyndaabka aqoontiisa iyo kheyraadka uu haysto waxa uu si niyad wanaag ah uga fulinayaa goobta ruqsadda loo siiyay hawlaha macdan qodista kooban iyo baadhista macdanta.
 - 1.3. Waxa uu ilaalinayaa in uu joogteeyo waxsoosaarka macdanta sida loo qoondeeyay ka dib marka qodaalka waxsoosaarka la'bilaabo.
 - 1.4. Waa in uu xafidaa buug xisaabeedyada hawlaha macdan qodista iyo ganacsiyada kale ee uu ka wado goobta ruqsadda loo siiyay si' ku filan oo run ah , wuxuuna soo saarayaa buugaagtan marka uu ka codsado sarkaalka u xilsaarani.
 - 1.5. In uu soo diro macluumaadka jiyoolojiga iyo muunadaha macdaneed ee la' soo saaray, si joogto ah isaga oo raacaya hannaanka loo dejiyay.
 - 1.6. In uu ilaaliyo hecrarka bed-qabka ee goobta ruqsadda iyo hawlaha macdan qodiseed si'waafaqsan xeerarka jira ee khuseeya badbaadada caafimaad ee shaqada iyo shaqaalaha sida ay tilmaamaan xeerarka u dejiisan.
 - 1.7. Waa in uu u hoggaansamo dhammaan shuruudaha qiimeynta, qorshayaasha iyo barnaamijka ilaalinta deegaanka si' loo maareeyo wasakhawga deegaanka si'waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dhaqan-galka ah.
 - 1.8. Waa in uu u hoggaansamo qorshihiisa xidhitaanka macdan qodista iyo dayactirka deegaanka hawshu ka socotay marka macdan soo saaristu dhammaato.
 - 1.9. Waa in aanu qodin macdanaha khatarta ah illaa ogolaansho qoraal ah laga helo wasaaradda.
 - 1.10. In uu ilaaliyo, ka warbixiyo isla markaana soo gudbiyo qorshaha hawlaha macdan qodista sida uu koobsanaayo.
 - 1.11. In uu ogolaado in hay'adaha dawliga iyo kuwa waxbarashadu ku samayn karaan cilmibaadhis, waxaase shardi ah in aan hawshaas cilmibaadhistu waxba u dhimayn hawsha macdan qodista.
 - 1.12. In uu ogolaado, lana isticmaalo, dhismeyaalna laga dhiso goobta ruqsadda sida: biyo-mareenno, kannaal, dhuummo, bullaacado, xadhko, laymanka wax gudbiya, waddooyinka dadweynaha iyo waxyaabaha kale ee bulshadu u baahantahay hadii wasaaraddu ku qancdo in aanay xanibayn hawsha macdan qodista.
 - 1.13. In uu calaamadiyo ilaaliyana xuduudaha goobta ruqsadda loo siiyay.
 - 1.14. In uu usoo diro wasaaradda dhammaanba warbixinaha khuseeya hawsha macdan soo saarista.



2. Ruqsadleyaasha macdan qodista kooban waxaa looga baahanyahay in ay u hoggaansamaan hecrarka caalamiga ah ee la'ogolyahay ee badbaadada shaqada, ilaalinta iyo dayactirka deegaanka sida ay wasaaraddu ku go'aamiso tilmaamaha u gaarka ah. Haddii ruqsadluhu u hoggaansami waayo hecrarkan, waxa ay sababaysaa in loo diido cusboonaysiinta ruqsadda marka ay ka dhacdo ama la'ganaaxo, ganaxaas oo ay wasaaradda ama maxkamaddu ay go'aamiso.

Qodobka 80^{aad}

Xuquuqda ruqsadleyaasha ruqsadda macdan qodista kooban

1. Iyada oo la raacayo qodobada xeerkan, qofka haysta ruqsadda macdan qodista koobani waxaa uu xaq gaar ah u yeelanayaa in uu fuliyo hawlo baadhis iyo macdan qodiseed ee goobta ruqsadda loo siiyay, isaga oo xaqaaas ka faa'iidayasanayana waxa uu gali karaa goob kasta oo ruqsaddiisa macdan qodista koobani la xidhiidho isaga oo ay weheliyaan shaqaalihiiisa iyo wakiiladiisuba waxaa ay-
 - 1.1 Qaadayaan tallaabooyin macquul ah gudaha ama oogada sare ee goobta ruqsadda macdan qodista kooban loo siiyay si uu macdanta uga qodo uguna farsameeyo macdanta ruqsadda loo siiyay;
 - 1.2. Waxaa uu ka taagi karaa ama keeni karaa qalab kasta oo muhiim u ah hawsha macdan qodista, sida dhisidda dhismeyaal ay hoy ka dhigtaan muddada ay wadaan macdan qodista. rarista, hagaajinta, kala shaandhaynta iyo sifaynta macdanta uu soo saaray muddada hawsha macdan qodista kooban uu wado.
 - 1.3. In uu ku tasarrufo macdan kasta oo uu soo saaro ama ogaado.
 - 1.4. In uu u ururiyo ama uu u qubo hadhaaga iyo qashinka macdanta ka soo baxa sida ay ogolaatay wasaaraddu isaga oo la'tashanaya hay'adaha deegaanka iyo caafimaadka.

Qodobka 81^{aad}

Warbixinta Sanadlaha ah

1. Muddo lixdan (60) maalmood gudahood ka dib sannad guurada markii ruqsadda macdan qodista kooban la'bixiyay waxa ruqsadlaha laga rabaa in:
 - 1.1. Uu usoo gudbiyo warbixin farsamo oo faahfaahinaysa dhammaan hawlihii la qabtay muddada sannadka ahayd iyo natiijooyinka ka soo baxay.
 - 1.2. Uu soo gudbiyo warbixin maaliyadeed oo koobaysa dhammaan kharashaadka baxay sida kharashaadka mushaharka ku baxay shaqaalaha iyo kuwa hawsha sahaminta lagu fuliyay.

Qodobka 82^{aad}

Goobta ruqsadda macdan qodista kooban

1. Goobta macdan qodista koobani ama loo qoondeeyay macdan qodistu waa ugu badnaan lix baloog oo isku xiga.
2. Ruqsadda macdan qodista kooban waxa loogu baahanyahay hawlaha macdan qodiseed ee wax-soo-saarkeedu ka yar yahay hal milyan (1,000,000) oo tan sannadkii oo walxaha dhiismaha ah; boqol kun (100,000) oo tan oo ah dhagxaanta macdanta leh.
3. Hawlaha macdan qodista ballaadhan ama hawl macdan qodiseed ee isticmaalaya walxaha kiimikada ee halista ah ama soo saaraba hadhaaga macdanta waxa loo baahan yahay ruqsad macdan qodiseed.



Qodobka 83^{aad}
Wareejinta Ruqsadda

1. Ruqsadda macdan qodista kooban waa la'wareejin karaa, la'rahmi karaa ama la'ballanqaadi karaa.

RUQSADDA MACDAN-QODISTA

Qodobka 84^{aad}
Macdan qodista

1. Macdan qodistu waa samaynta ficil kasta oo suurta gal ka dhigaya in macdan lagu soo saaro; macdantaasi ha noqoto macdanta warshadaha, dhismaha, dhagaxaanta la isku qurxiyo IWM. macdantaas oo la farsameeyo, lana iibiyo si'waafaqsan ruqsadda ama ogolaanshaha

Qodobka 85^{aad}
Shuruudaha ruqsadda Macdan Qodista

1. Ruqsadda macdan qodista waxa la siinayaa oo kaliya shirkadda si sax ah u jirta isla markaana u diiwaangashan shirkad ahaan si'waafaqsan Xeerka Shirkadaha Somaliland si sax ahna loogu ogolaaday in ay hawlo ganacsi ka qaban karaan Somaliland, kartidii iyo awooddii dhaqaale ay ku fulin lahaayeen waajibaadyada ruqsadda ka dhashana masuuliyadeed qaado.
2. Jamhuuriyadda Soomaalilaan waxay xaq ugu leedahay shirkadda ruqsadda macdan qodista la'siiyay ugu yaraan boqolkiiba toban in ay ku yeelato (10%) iyada oo aan waxba looga baahnayn in ay dawladdu ku darsato wax qaadhaan ah, raasamaal ah ama qarash ah.
3. Cidkasta oo haysata ruqsadda sahamintaa macdanta ama ruqsadda sii haysashada dhul macdaneed waxa ay xaq u leeyihiin in ay marka ay doonaan ay dalban karaan ruqsadda macdan qodista.

Qodobka 86^{aad}
Codsiga Ruqsadda Macdan Qodista

1. Codsiga lagu dalbanayo ruqsadda macdan qodista waxa loo soo gudbinayaa wasaaradda iyada oo loo raacayo foomka loogu talo galay iyo khidmadda xeerku tilaamay:
2. Codsiga kasta oo lagu dalbanayo ruqsad macdan qodiseed si'waafaqsan qodobkan waxa uu ka koobnaanayaa:
 - 2.1. Magaca shirkadda, meesha ay ka diiwaan gashan tahay, shahaadada diiwaan gelinta, nuqul sax ah oo xeer-hoosaadka iyo dastuurka shirkadda ah, magacyada iyo dhalashada masuuliyiinta shirkadda iyo magacyada saamille kasta oo saamigiisu ka badan yahay boqolkiiba shan (5%) saamiga shirkadda.
 - 2.2. Taariikhda macdan qodiseed ee shirkadda ruqsadda dalabanaysaa ku leedahay Soomaalilaan iyo aduunkaba.
 - 2.3. Magaca iyo khibradda masuulka shirkadda u qaabilsanaanaya hawlaha macdan qodiseed ee Soomaalilaan.
 - 2.4. Tilmaan dhulka ay macdanta ka qodayso oo aan ka badnayn inta ruqsadda ay dalbanayso waana in ay keenaan naqshad faahfaahsan oo tilmaamaysa dhulkaas si' ay wasaaraddu u garato una aqoonsato.



- 2.5 xogta saxda ah ee keydka macdaneed ee dhulkaa ku jirra iyo xaddiga macdaneed ee ay rabaan in ay soo saaraan sanadkii.
- 2.6 Daraasad ama cilmibaadhis faahfaahinaysa saamaynta taban ee hawsha macdan qodistu ku yeelan karto deegaanka, qaabka ay ula tacaalayan ee ay wax uga qabanayaan iyo kharashaadka ay ugu talo galeen in ay wax kaga qabtaan dhibaatooyinka deegaanka soo gaadhi kara.
- 2.7. Qoraal faahfaahinaya barnaamijka macdan qodista sida:
- 2.7.1. Qiyaas ku saabsan wakhtiga faa'iido laga gadhi karo macdan qodista.
 - 2.7.2. Inta ay leeg tahay awoodda waxsoosaar iyo mugga shaqada
 - 2.7.3. Qiyaasta inta macdan ee la soo saari karo
 - 2.7.4. Nooca macdanaha la soo saarayo
 - 2.7.5. Qorshaha ka hortagga wasakhawga hawada, sida ay u maareynayaan qashinka, ilaalinta kheyraadka dabiiciga ah, dib u soo celinta iyo badbaadinta dhulka waxycelladu ka soo gaadhay macdan qodista si' loo yareeyo saamaynta uu ku yeelan karo biyaha sare iyo kuwa dhulka hoostiisa ah goobta macdan qodistu ka socoto iyo hareeraheedaba.
 - 2.7.6. Saamaynta uu hadhaaga macdantu ku yeelan karo deegaanka iyo qorsheyaasha arrintaa lagaga hor tagayo.
 - 2.7.7. Khataraha gaarka ah sida kuwo caafimaad ama qaar kalaba haddii ay jiraan ee ka dhalan kara macdan qodista iyo qaabkii loo xakameyn lahaa.
- 2.8. Qorshaha shirkadda ee shaqa abuurka muwaadiniinta Somaliland si'waafaqsan xeerka shaqaalaha rayidka ah.
- 2.9. Caddaymo muujinaya awoodda farsamo iyo dhaqaale ee shirkadda ruqsadda dalbanaysa.
- 2.10. Qorshaha alaabta iyo adeegyada ay u baahanyihiin ee Somaliland laga heli karo;
- 2.11. Qorshahooda ku aaddan qaabka ay ula shaqaynayaan maamulada dawladda, hogaamiyeyasha dhaqanka iyo bulshada deeganka ay macdanta ka qodayaan iyo deegaamada kale ee u dhawba.
- 2.12. Iyo wixii kale ee macluumaad ah ee wasaaradu uga baahato in ay ku soo daraan codsiga.
3. Codsiga kasta oo ruqsad macdan qodiseed oo waafaqsan faqradda 2aad ee qodobkan, si' degdeg ah ayaa loo diiwaan galinayaa waxaana lagu ilaalinayaa diiwaanka codsiyada si'waafaqsan xeerkan.
4. Codsiga kasta oo loo diiwaan galiyay si'waafaqsan faqradda 3aad ee xeerkan waxa la siinayaa lambarka iyo taariikhda uu soo galay si ay caddayn ugu noqoto codsada ama wakiilkiisa in codsiga laga guddoomay.



Qodobka 87^{aad}
Bixinta ruqsadda macdan qodista

1. Iyada oo loo hogaansamayo qodobbada xeerkan, wasaaraddu marka ay hesho codsiga ruqsadda isla markaana ay ku qanacdo in dhammaan shuruudihii xeerku u dejiyay la' buuxiyay waxa ay u soo saaraysaa ruqsadda macdan qodista oo waafaqsan ujeeddada codsiga.
2. Wasaaraddu, waa in ay afar usbuuc gudahood oo ka bilaabmaya taariikhda codsadaha la'diiwaangaliyay, ku ogeysiisaa in codsadaha ruqsadda macdan qodista loo ogolaaday ama loo diiday, haddii loo diiday waa in ay u raacisaa sababta loogu diiday.
3. Codsaduhu marka uu helo ogolaanshaha wasaarada ee ku xusan qodobkan; faqraddiisa 1^{aad}, waxa uu bixinayaa ajuurada ku waajibtay ruqsadda la'siiyay.
4. Codsadaha ka noqday codsigiisii hore qoraalna ku caddeeyay, wasaaraddu way laalaysaa ruqsaddiisa, ajuuro celisna ma leh.

Qodobka 88^{aad}
Muddada iyo cusboonaysiinta ruqsadda macdan qodista

1. Muddada bilawga ah ruqsadda macdan qodista waxa laga go'aan qaadanayaa warbixinta faahfaahsan ee xaddiga macdaneed iyo qaab soo saarka, kamana yaraan karto muddo shan (5) sanno ah, waana la cusboonaysiinayaa muddo dheeri ah iyada oo lagu salaynayo keydka macdanta iyo awoodda soo saariseed.
2. Codsadaha/codsadeyaasha cusboonaysiinta ruqsadda macdan qodistu waxa ay u soo gudbinayaan wasaaradda laba nuqul oo ah warbixin farsamo oo faahfaahinaysa xaaladda macdan qodiseed, ugu yaraan saddex bilood ka hor dhicitaanka ogolaanshaha macdan qodista hore.
3. Lixdan (60) maalmood gudahood, wasaaradda ayaa ogolaanaysa cusboonaysiinaya ruqsadda ama waxa ay ku wargalinaysaa ciladaha codsiga ee u baahan in la soo saxo, codsiga waxa lagu soo saxayaa sagaashan (90) maalmood gudahood kadibna dib ayaa loo soo gudbinayaa, haseyeeshee haddii wasaaraddu diiddo in ay cusboonaysiiso ruqsadda waa in uu sharaxaad ka bixiyo sababaha uu u diiday.
4. Wakhtiga ruqsadda macdan qodista laga bilaabayaa waa taariikhda la'bixiyay isla markaana lagu sheegay ruqsadda lafteeda.

Qodobka 89^{aad}
Waajibaadka ruqsadlaha macdan qodista

1. Iyada oo loo hogaansamayo qodobada xeerkan, cid kasta oo haysta ruqsadda macdan qodistu:
 - 1.1. Waxa uu bilaabayaa qodista keydka macdanta ee ruqsaddiisu khusayso si' waafaqsan barnaamijka loo ansixiyay ee hawlaha macdan qodista iyo maaraynta deegaanka:
 - 1.2. Waxaa uu ku bilaabayaa hawshiisa macdan qodiseed boqol iyo siddeetan (180) maalmood oo ka bilaabanta maalintii ruqsadda la siiyay.
 - 1.3. Waxa uu qeexayaa ama calaamadinayaa dhulka macdanta laga qodayo si' loo hubiyo in dhulku yahay dhulkii ruqsadda macdan qodista loo bixiyay.



1.4. Waxaa uu ilaalinayaa bed-qabka shaqaalaha hawlaha macdanta si'waafaqsan shuruucda badbaadada caafimaadka shaqadda iyo shaqaalaha iyo in uu u hogaansamo shuruudaha kale ee badbaadada iyo caafimaadka ee ay sheegaan xeerar kale.

1.5. In ay u hogaansamaan wixii shuruudo ah ee qiimayntu keensato isla markaana dhawraan ama ilaaliyaan qorsheyaasha iyo barnaamijyadda dhawrista deegaanka wasakhawga, hawaddana u maareeyaan si'waafaqsan xeerkan ama xeerarka kale ee arrintan khuseeya.

1.6. In uu la socodsiiyo haddii uu beddelo ciwaankiisa ama degganaanshihiisa Somaliland si'wixii xidhiidh ahna loogu hagaajiyo.

1.7. In u ogaysiiyo wasaaradda sida ugu dhakhsaha badan marka uu bilaabo faa'iidsiga ama macaashaka uu ka helo dhulka ruqsadda loo siiyay.

2. Ruqsadlaha macdan qodista waxa:

2.1. Ay diyaarinaysaa isla markaana dhammaystiraysaa warbixin farsamo oo sax ah oo ku saabsan dhulka macdan qodista loo siiyay waxayna u soo diyaarinayaan qaabka wasaaraddu u ogolaato.

2.2. Nuqullada dhammaan maababka (maps), warbixinaha deegaan oo ay ku jiraan caddaymaha madcanta, baadhista iyo kala hufidda macdanta, sawiradda macdanta ee hawadda ay ka qaadeen, tijaabooyinka ay sameeyeen iyo dhammaanba macluummadka kale ee ay ka heleen dhulka ruqsadda macdan qodista loo siiyay

2.3. In ay soo gudbiyaan warbixino maaliyadeed ku saabsan hawlaha macdan qodiseed ee ay ka wadaan dhulka ruqsadda loo siiyay oo sax ah oo sida buug xisaabeedyada iyo warbixinaha kale ee maaliyadeedba marka ay wasaaraddu u baahdo.

2.4. In ay u ogolaadaan sarkaalka wasaaradda u xilsaartay ama ku shaqada leh in uu baadhi karo buugaagta xisaabaadka iyo xogaha kale ee u keydsan si'waafaqsan xeerkan isla markaana waxaa uu siin karaa dhammaan xogta xisaabta oo aan waxba ka reebin nuqulladda marka uu u baahdo

2.5 Waxa ay wasiirka u keenayaan nuqulka warbaxintooda maaliyadeed ee sannadlaha ah lixdan (60) maalmood gudahood marka uu dhammaado sannad maaliyadeedkoodu, waa in warbixintaasi muujisaa faa'iidada iyo khasaaraha sannadkaas iyo xaaladda maaliyadeed sannadka dhamaadka ah.

2.6 In uu u soo gudbiyo dhammaanba warbixinaha sida loogu talo galay

Qodobka 90^{aad}

Xuquuqda ay leedahay cidda haysata ruqsadda macdan qodista

1. Iyada oo loo hogaansamayo/la raacayo Qodobada xeerkan, ruqsadda lahu wuxuu xaq u leeyahay inuu macdanaha loo ogolyahay ka qodo goobta macdan qodista sida daraadeed waxaa ruqsadluhu ama wakiilkiisu:

1.1. Geli karaa dhulka macdan qodista waxaaanu qaadi karaa talaabo kasta oo macquul ah dhulkaas dushiisa iyo hoostiisaba oo lagu fudadaynayo laguna fulinayo hawlaha macdan qodista



- 1.2. Uu ka taagi karaa ama keeni karaa qalab kasta, wershada ama dhismeyaal muhiim u ah hawsha macdan qodista, rarista iyo u diyaarinta macdanta ay soo saareen in la qaado ayaa ah iyana xuquuq uu leeyahay ruqsadluhu
- 1.3. Iyada oo loo hogaansamayo bixinta ujuurada si'waafaqsan xeerkan iyo xeer-nidaamiyayaasha kale ee ka farcama, waxa uu ruqsadluhu soo bandhigayaa waxsoosaar kasta oo macdaneed oo uu sameeyay.
- 1.4. In uu u isticmaalo ama u qubo macdanta ama waxyaabaha hadhaaga ah ama qashinka ah ee ka soo baxaba si sharciga waafaqsan.
- 1.5. In uu shaqaaleeyo isla markaana tababaro muwaadiniinta Somaliland si'waafaqsan xeerka shaqaalaha iyo xeer-nidaamiyayaasha xeerkan.

Qodobka 91^{aad}

Dhulka ruqsadda macdan qodista

Dhulka ruqsadda macdan qodista lagu bixinayaa waa ugu yaraan lix baloog

Qodobka 92^{aad}

Faafinta go'aanka codsiga ruqsadda macdan qodista

1. Wasaaradu, waxa ay ku wargalinaysaa codsadhaha ruqsadda Macdan qodista in la siiyay ama loo diiday muddo afar toddobaad gudohood ah oo ka bilaabmayso maalintii codsiga ruqsad loo soo gudbiyay.
2. Codsaduhu marka uu helo wargalinta wasaaradda ee ku xusan faqradda 1^{aad} ee qodobkan, waxa uu ku waragalinayaa wasaaradda in uu aqbalay ruqsadda la siiyay muddo afar toddobaad gudahood ah, waxaana uu bixinayaa ajuurada ku waajibtay.
3. Haddii wakhtiga ku xusan faqradda 2^{aad} ee qodobkan uu codsadhaha ruqsaddu ku guuldaraysto in uu ku wargaliyo wasaaradda aqbalaadda ruqsadda, wasaaradu waxa ay u aqoonsanayaan in ruqsadaa dib loola noqday.
4. Wasaaraddu waxa ay ay afar toddobaad gudahood oo ka bilaabma maalinta codsaduhu caddeeyay aqbalaad ruqsadda ku soo saaraysaa ruqsadda rasmiga ah ee codsadhaha.
5. Ogaysiiska ruqsad bixinta waxaa lagu daabacayaa mareegta rasmiga ah ee wasaaradda.

Qodobka 93^{aad}

Joojinta hawlaha macdan qodista

1. Cid kasta oo haysata ogolaanshaha qodista macdanta waxa uu ogaysiinayaa wasaarada: -
 - 1.1. Laba iyo toban (12) bilood ka hor haddii uu damco in uu gebi ahaanba joojiyo hawsha macdan qodista ee uu wado;
 - 1.2. Lix (6) bilood ka hor haddii uu damco in uu hakiyo muddo.
 - 1.3. Sadex (3) bilood ka hor haddii uu damco in uu yareeyo soo saarista macdanta.
 - 1.4. Waxa uu ku sheegayaa ogaysiiska sababta uu u joojiyay, u hakiyay ama uu yareeyay macdantii uu soo saarayay.



2. Marka sabab ka baxsan awooddiisa uu ruqsadluhu u joojiyo, u hakiyo ama u yarceyo waxsoosaarka macdanta ee goobta ruqsadda loo siiyay, waa in uu toddoba (7) maalmood gudahood maalintii uu joojiyay, hakiyay ama yarceyay ku ogaysiiyaa wasaaradda.

Qodobka 94^{aad}

Awoodda wasaaradda ee joojinta macdan qodista

1. Marka hawsha joojinta macdan qodista lagu wargaliyo wasaaradda si'waafaqsan xeerkan ama uu si kaleba u ogaato joojinta, hakinta ama yaraynta waxsoosaarka macdanta waxa ay amrayaan wasaaraddu in arrinta la baadho ka dibna wasaaraddu: -
 - 1.1. Waxa ay ansixinaysaa shuruud la'aan ama iyada oo shuruudo ku xidhaysa joojinta, hakinta ama yaraynta macdanta ee uu ku soo wargeliyay ruqsadluhu/ruqsadlayaashu:
 - 1.2. Waxa uu u tilmaamayaa ruqsadlaha/ruqsadleyaasha isaga oo ogaysiis siinaya in uu dib u bilaabo/bilaabaan waxsoosaarka macdanta oo dhammaystiran ama qayb ahaan sida marba loogu sheego ogaysiiska wakhtiga loo cayimo isaga oo ruqsadluhu/ruqsadleyaashuna arintaa u hogaansamayaan.

Qodobka 95^{aad}

Warbixinaha iyo buug xisaabeedyada sanadlaha ah

1. Maalinta lixdannaad (60^{aad}) ama ka hor ee ku xigta dhammaadka sannadka, cid kasta oo haysata ogolaanshaha macdan qodista waxa ay u soo gudbinaysaa wasaaradda:
 - 1.1. Warbixin farsamo oo faahfaahinaysa dhaqdhaaqaada loo ogolayhay ee ay fuliyeen muddadii saddexda bilood ahayd iyo natiijadeedii;
 - 1.2. Warbixin maaliyadeed muujinaysa tiradda dadka la shaqeeleeyay, tiradda guud ee shaqaalaha, wadarta dakhliga shaqada iyo kharashka la galay;
 - 1.3. Warbixino maaliyadeed oo loo diyaariyay si'waafaqsan heerarka caalamiga ah ee loo qoray warbixinaha maaliyadeed

RUQSADDA SII HAYSASHADA MACDANTA

Qodobka 96^{aad}

Ruqsadda Sii-haysashada Macdanta

Ruqsadda Sii-haysashada Macdanta waa ruqsadda loo qaatay dhul laga helay keyd macdan oo ganacsi gal ah, hase ahaate duruufo dhaqaale oo jira awgeed aan loo soo saari karin.

Qodobka 97^{aad}

Shuruudaha ruqsadda Sii-haysashada Macdanta

1. Ruqsadda Sii-haysashada Macdanta waxa qaadan kara:
 - 1.1. Ruqsadle hore u haystay ruqsad sahaminta macdaneed helayna keyd-macdaneed oo ganacsi gal ah ama ruqsadle haysta ruqsad qodis macdaneed.
 - 1.2. Ruqsadluhu waa inuu caddeeyaa in duruufo farsamo, dhaqaale ama amni awgeed u fulin karin macdan soosaarista



1.3. In wasaaradda iyo shirkaddu guddi madaxbannaan u saaraan cadeynta duruufaha jira, guddiguna warbixinta u soo gudbiyaan wasaarada. warbixintaas oo tilmaamaysa:

1.3.1. Baaxadda caqabadaha jira, inta lagaga bixi karo, muhiimadda dhaqaale, keydka macdaneed, xaaladaha suuqa, dhaqdhaqaaqa suuqa, xaaladaha farsamo iyo dhaqaale ee hortaagan soo saarista keydka.

Qodobka 98^{aad}

Codsiga ruqsadda sii haysashada

1. Codsiga lagu dalbanayo ruqsadda sii-haysashada macdanta waxaa loo gudbinayaa wasaarada iyada oo la raacayo foomka loogu talo galay laguna soo lifaaqay caddaynta ajuurada la bixiyay
2. Codsiga kasta oo ruqsadda sii-haysashada macdanta sida lagu xusay qodobkan faqraddiisa 1^{aad} waa in lagu diiwaan galiyaa laguna ilaaliyaa diiwaanka ruqsaddaha Wasaaradda si waafaqsan xeerkan.
3. Codsiga kasta oo loo diiwaan galiyay si'waafaqsan qodobkan faqraddiisa 2^{aad} waxa la siinayaa lambarka iyo taariikhda uu soo galay si ay cadayn ugu noqoto codsadhaha ama wakiilkiisa in codsiga laga guddoomay.

Qodobka 99^{aad}

Bixinta ruqsadda sii-haysashada dhul macdaneed

1. Haddii wasaaraddu ku qancdo in kheyraadka macdaneed ee ruqsaddu khusaysaa aanay wakhtigan suurto gal ahayn in la soo saaro, haseyeeshe ay suurto gal noqon karto in la soo saaro labo (2) sanno gudahood waxa ay soo saarayaa ruqsadda sii-haysashada dhul macdaneedkaa oo la siinayo ruqsad haystaha dhulkaas marka hore ruqsadda loo siiyay;
2. Haddii wasaaraddu ku qanci waaydo codsiga waxa ay ruqsadlaha u sheegaysaa sababta loogu diiday.

Qodobka 100^{aad}

Xuquuqda iyo waajibaadka Ruqsadda sii-haysashada

1. Ruqsadda sii-haysashadu waxa ay xaq u siinaysaa cid kasta oo la' siiyo in ay codsan karaan ruqsadda qodista macdanta ku duuggan dhulkaas ruqsadda loo siiyay.
2. Wasaaraddu waxa ay shardi kaga dhigi kartaa soo saarista ruqsadda sii-haysashada in cidda la' siinayaa fuliso waajibaadyo gaar ah sida: -

1.1. In ay sii wadaan hawlo sahan macdaneed oo la cayimo.

1.2. In ay si buuxda u ilaaliyaan kheyraadka macdaneed.

1.3. In ay qaadaan tallaabooyin gaar ah oo la' xidhiidha ilaalinta deegaanka.

Qodobka 101^{aad}

Muddada iyo cusboonaysiinta ruqsadda sii-haysashada dhul-macdaneed

1. Ruqsadda sii-haysashada macdaneed waxa la bixinayaa muddo aan ka badnayn labo (2) sannadood.
2. Haddii duruufihii hore ay wali jiraan, ruqsadda sii-haysashadda waa loo cusboonaysiin karaa hal mar oo labo (2) sannadood ah



3. Inta aan la cusboonaysiin ruqsadda sii-haysashada, wasaaraddu waxa ay ka dalbanaysaa qiimayn madaxbanaan oo ay fuliso shirkad karti aqooneed u leh qiimaynta suurtagalnimada in si ganacsi gal ah looga faa'iidaystay keydka macdanta, kharashaadka ku baxaya qiimayntaas waxa bixinaya ruqsadlaha.

Qodobka 102^{aad}

Dib-u-ecgista Muddada Ruqsadda sii-haysashada

1. Ruqsad kasta oo sii-haysasho ah oo muddadeedu ka badantahay hal (1) sanno waa in wasaaradu sannadkiiba dib u cegto. Marka lagu jirro dib-u-ecgistaas sannadlaha ah, ruqsadluhu waxa uu siinayaa wasaaradda warbixinihii iyo qiimaynihii kala duwanaa ee u danbeeyay ee ay sameeyeen isla markaana looga baahnaa in ay sameeyaan si waafaqsan ruqsadda laad ee asalka ah:
2. Haddii, inta dib-u-ecgista lagu jirro, ay wasaaraddu ogaato in xaaladihii suuqa iyo arrimihii kale ee dhaqaaleba is beddeleen, sidaa daraadeed ay go'aansato in aan loo baahnayn cusboonaysiinta ruqsadda sii-haysashada wakhtigan, Wasaaraddu waxa ay joojinaysaa ruqsadda sii-haysashada isaga oo muddo sagaashan (90) maalmood ah oo ogaysiis ah siinaya ruqsadlaha/ruqsadleyaasha.

CUTUBKA LIXAAD

BAADHITAANKA SHILALKA

Qodabka 103^{aad}

Waajibaadka ammaanka ruqsadlaha ruqsadda macdan qodista

1. Ruqsadlaha haysta ogolaansha ama ruqsadluhu waxa uu qaadayaa dhamman taxadarka habboon ee la'xidhiidha ammaanka dhammaan shaqaalaha oo ay ku jiraan:
 - 1.1. Taxadirka habboon oo lagaga hortagayo dhaawaca dadka ee uu sababayo qaraxyada ka dhasha hawsha macdan qodista, hawsha warshadda, qalabka ama mishiin iyo shaqo kale ama qalab kale.
 - 1.2. Waxa lagu samaynayaa dayr ku habboon, ilaalo iyo ogaysiska digniinta ah meelaha khataruhu ka jiraan ama laga yaabo in ay khatar ka timaado lagu dhejiyo.
2. Ruqsadlaha haysta ogolaanshaha ama ruqsadaha macdan qodistu waxa uu qaadayaa taxadir kasta oo lagu xaqiijinayo ilaalinta deegaanka.

Qodabka 104^{aad}

Baadhista waxyeelada

1. Wasaaradu way baadhi kartaa shaqo kasta oo ogolaansho loo haysto wakhti kasta iyo haddii wasaaraddu u aragto in shaqadaa loo qabtay si waxyeelaysa caafimaadka, daryeelka ama badbaadada qofka ama deegaanka, hadii aan waxyeeladaasi la xidhiidhin fal-dambi kaas oo baadhistiisa ay leeyihiin laamaha dambi baadhista ee bilaysku.
2. Wasaaradu marka ay waajibaadka faqradda laad ee qodobkan lagu xusay gudanayso waxa waajib ah in uu adeegsado khabiir aqoon durugsan u leh hawlaha uu baadhitaanka u dirayo.
3. Khubarada arrintan baadhay warbixinta ay soo saaraan haddii ay muujiso gafaf sharci oo lageystay, waxaa wasaarada ku waajib ah inay u gudbisoo warbixinta hay'addaha kale ee qaranka ee ay khusayso si ay talaabo sharci ah uga qaadaan cid kasta oo geystay gefkaasi si waafaqsan xeerarka dalka.
4. Wixii qaladaad ah ee kale ee la xidhiidha arrimo maamul Wasiirka ayaa talaabo ka qaadaaya cidda geystay si waafaqsan xeerkan iyo habraacyadda ka dhalandoona.



5. Qofkasta oo ay dhibaato ka soo gaadho shaqo kasta oo macdan qodiseed oo ogolaansho/ruqsad loo hasytay wuxuu xaq u leeyahay inuu maxkamadda awooda u leh uu uga dacwodo waxyeeladaasi si uu u helo magdhow si waafaqsan xeerarka dalka.
6. Haddii ay wasaarada u caddaato in ruqsadluhu talaabooyinka uu qaaday ay keeni karaan waxyeelo caafimaad, deegaan iy nafeed waxa ku waajiba wasaarada inay qaado tallaabo ay kaga hakinayso si wadista shaqadaas.
7. Marka ay dhacdo arrinta lagu sheegay faqrada 2aad, wasaaradu waxa ay ku wargalinaysaa talaabaday qaadday oo qoraal ah ruqsadlaha ama wakiilkiisa oo ay arrintaas ku faahfaahinayso.
8. Talaabada wargelintu waa inay ka koobnaato machuumaadka arrinta loo tixgaliyay in ay khatar tahay ama aan sax ahayn waana in loo saxayo sida ugu dhakhsaha badan ama wakhtiga loo cayimay in la saxo. Wasaaraddu waxa ay amri kartaa in la joojiyo shaqada ilaa inta khatartaa meesha looga saarayo.
9. Haddii ruqsadluhu diido ama muran ka keeno ogaysiiska, waxa uu sida ugu dhakhsaha badan ugu soo gudbinayaa diidmadiisa oo qoraal ah wasaaradda oo iyaduna go'aan ka gaadhaysa diidmadaas shan (5) maalin shaqo gudahood. Marka arrintan oo kale dhacdo ruqsadluhu si degdeg ah ayuu u joojinayaa shaqada uu ogaysiisku khuseeyo ilaa inta wasaaradu go'aan ka gaadhayso diidmadaas.
10. Haddii wasiirku uu go'aankii maamul ee wasaaraddu ku joojisay shaqada ku adkaysto mar labaad, ruqsadluhu wuxuu xaq u leeyahay inuu go'aankaas maamul uga rafkaan qaato maxkamadda sare muddo 30 cisho ah oo ka bilaabmayso maalinta go'aanka labaad soo baxay, maxkamada sarena waxay awood u leedahay inay dib u eegis ku sameeyso go'aanka wasiirka/wasaaradda si'waafaqsan xeerkan iyo xeerka habka madaniga ah.

Qodabka 105^{aad}

Awoodaha baadhista fal-dambiyada iyo shilalka

- 1) Hadii uu shil sababay dhaawac ama dhimasho ka dhaco goob macdan qodiseed, waxa loo aqoonsanaya goob dembi ka dhacay "Scene crime". waana la'xidhaya.
- 2) Booliska iyo laamihiisa baadhista dembiyadu waxay bilaabayaana baadhis dhamaystiran oo la xidhiidha shilka goobta ka dhacay, goobtuna way xidhnanaaysaa illaa iyo baadhista laga gungaadhayo.
- 3) Baadhista goob macdan qodiseed oo shil ka dhacay bilaysku waxay u racayaan xeerka Habka Ciqaabta, Xeerka Ciidanka Booliska, iyo Xeerkan Macdanta qaranka.
- 4) Marka ay boolisku ka gun gaadhaan baadhitankooda hadii ay u soo baxdo inuu dembi dhacay ama dayacaad laga baaqsan karayay, cidda masuuliyadaas leh waxay u gudbinayaan xeer ilaalinta iyo maxkamadda awoodda u leh ee Goobta shilku ka dhacay.
- 5) Haddii Wasaaraddu ka war hesho fal-dambi ama shil ka dhacay goob macdaneed Wasaaradda waxa ku waajib ah sida ugu dhakhsaha badan inay ku wargalinayso Saldhiga boolis ee ugu dhaw ama maamulka gobolka ama degmada uu shilku ka dhacay.
- 6) Wasaaraddu waxa ay sidoo kale magacaabi kartaa hadii loo baahdo guddi khabiiro ah oo ka kooban ugu yaraan 3 xubnood oo ka kaalmaysa baadhista dhinaca farsamo/aqoonneed saraakiisha baadhiseed ee amniga ee shilkaasi baadhaaya.



Qodobka 106^{aad}
Soo sheegidda shilalka

1. Marka uu shil ka dhaco shaqo la qabanayay oo la xidhiidha lahaanshaha macdaneed ee ruqsadlaha kana dhalato dhimasho ama dhaawac halis ah oo soo gaadhay qof, ruqsadluhu waxa uu u soo warinayaa ama shegayaa shilkaas sida ugu dhakhsaha badan wuxuuna ku wargalinayaa xogta shilkaas: -
 - 1.1. Saldhigga boolis ee ugu dhaw ama maamulka gobolka ama degmada uu shilku ka dhacay ama Isuduwaha Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta
 - 1.2. Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta
 - 1.3. Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta

CUTUBKA TODOBAAD
WAREEJINTA, JOOJINTA IYO HAKINTA XUQUUQAHA MACDANEED
Qodobka 107^{aad}
Wareejinta

1. qof kasta oo haysta ruqsad macdaneed nooca ay doonto ha ahatee oo doonaya in uu wareejiyo gabi ahaanba ama qayb ka mid ah dhulka ruqsadda macdan qodiseed uu u haysto waxa uu codsi u soo qorayaa wasaaradda si loogu sameeyo shahaadada wareejinta dhulkaas saddex bilood ka hor tariikhda uu doonayo in wareejintaasi dhaqan-gasho.
2. codsiga ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan:
 - 2.1 Waa in uu sheegaa codsadihiisa taariikhda uu rabo in wareejinta ruqsaddu dhaqan gasho.
 - 2.2 Haddii uu qayb ka mid ah dhulka wareejinayo waa in uu caddeeyaa qaybta uu wareejinayo.
 - 2.3 Waa in uu bixiyo macluumaad ku saabsan hawlaha macdan qodiseed, macdan baadhiseed iyo macdan sahamineed ee laga fuliyay dhulka la'wareejinayo.
 - 2.4 Waa in uu bixiyo qorshe lagu kalsoonaan karo qaab ahaan iyo nuxur ahaanba oo wasaaraddu aqbali karto oo ku saabsan dhulka uu wareejinayo.
 - 2.5 Waa in uu soo gudbiyo warbixin farsamo oo dhammaystiran oo ka koban xog sugan, natiijooyinka, tafsiiirka iyo xog kasta oo la xidhiidha dhulka la wareejiyay ilaa wakhtigii la bilaabay ruqsadda macdanta:
3. iyada oo la raacayo xarfaha (2.4) iyo (2.5) ee tilmaamaya codsiga la soo gudbiyay si waafaqsan faqradda 1aad, wasaaraddu waxa ay soo saaraysaa shahaadada wareejinta shuruud la'aan ama isaga oo shuruudo ku xidhaya dhulka la codsaday in la wareejiyo;
4. wasaaraddu soo saari mayso shahaado wareejineed:
 - 4.1.1.1. Haddii wareejiyuhu daymaysanyahay;
 - 4.1.1.2 Haddii wareejiyuhu u hogaansami waayo shuruudaha loo baahnaa sida ku cad faqradda 2aad xarafka isa d ama



4.1.1.3 Haddii wasaaradu ayna ku qancin in ruqsaddlaha wareejinaya dhulku aanu ka tagin ama wareejin dhulka maadaama oo uu si wanaagsan oo waafaqsan hannaanka wanaagsan ee macdan qodista u fuliyay hawlaha macan qodiseed ee uu dhulkaa ka wadday.

5. xuquuq kasta oo macdaneed oo la wareejiyay dhaqan gal noqon mayso ilaa wasaaradu soo saaro shahaadada wareejinta ee dhulkaas ruqsaddluhuna bixiyo kharashaadka lagu waajibayay;
6. Wareejinta xuquuqda macdaneed waxba u dhimi mayso wixii daymo ama waajibad kale ahaa ee uu galay qofka wareejinayaa wareejinta ka hor.

Qodobka 108^{aad} **Dhaqan-galka shahaada wareejinta**

1. Marka ay wasaarada soo saaraysaa shahaadada wareejinta
 - 1.1 Haddii wareejintu la xidhiidho gabi haanba dhulka ruqsadda macdaneed ee uu haystay ruqsaddaasi wey dhamaanaysaa;
 - 1.2 Haddii ay wareejintu la xidhiidho qayb ka mid ah dhulka uu ruqsadda u haystay, waa in ruqsadda wax ka bedel lagu sameeyo si haboon;
 - 1.3 Wasaaraddu waxa ay ogaysiinaysaa codsadaha wax-ka-badelka shahaadada wareejinta ama haddii kale joojinta iyo soo saarista shahaadada wareejinta.
2. Dhulka shahaadada wareejinta lagu soo saaray waxa loo tixgalinayaa dhul la wareejiyay marka ogaysiiska wareejinta la sameeyo si'waafaqsan qodobkan.

Qodobka 109^{aad} **Hakinta ama joojinta ruqsadda macdanta**

1. Iyada oo la raacayo xeerkan iyo xaalad kasta oo kaleba, marka uu ruqsadle ruqsad macdaneed noocce ay doontaba ha ahaatee-
 - 1.1 Uu ku guuldaraysto in uu ruqsaddaa u adeegsado si niyad wanaag ah isla markaana u hogaansamin ujeeddada ruqsadda loo siiyay.
 - 1.2 Dhulka ruqsadda loo siiyay uu u isticmaalo ujeeddo aan ahayn ujeeddadii ruqsadda loo siiyay.
 - 1.3 Ku guuldarraysto in uu u hogansamo shuruudaha xeerkan ee ay tahay in uu u hogansamo.
 - 1.4 Ku guuldarraysto in uu u hogaansamo shuruudaha ruqsadda.
 - 1.5 Ku guuldarraysto in uu u hogaansamo amarrada loo siiyay si'xeerkan waafaqsan ama shuruud loogu soo saaray shahaadada wareejinta ama wax ka dhaafitaan ama ogolaansho la siiyo si'waafaqsan xeerkan.
 - 1.6 Ku guuldarraysto in uu u hogaansamo shuruudo la xidhiidha isticmaalka xaq macdaneed ee ruqsadda ku xusan taas oo ku jirta heshiisyo la'xidhiidha.
 - 1.7 Ku guuldarraysto in uu ku bixiyo kharashaadka xeerkan ku waajibiyay bil gudaheed ka dib marka ay waajib ku noqotay bixinteedu.



- 1.8 Ku guuldarraysto in uu qabto barnaamijka sannadlaha ah ee shaqo ee ugu yar ama shuruudaha kharashka ee shaqo.
- 1.9 Uu gabi ahaanba jabiyo xeerarka caafimadka iyo badbaadada ama uu sababo dhibaato deegaan
- 1.10 Uu shaqaaleysiyo ama ka faa'iidaysto carruur aan qaangaadh ahayn;
- 1.11 Ku guuldarraysto in uu soo gudbiyo warbixinaha xeerkani jideeyay in la soo gudbiyo.
- 1.12 Uu jabiyo qodob ka mid ah qodobbada xeerkan ama shuruudaha xaqiisa macdaneed ama uu jabiyo xeer kasta oo la xidhiidha macdan qodista iyo macdanta
- 1.13 Uu dhinto dhaxal sugiisuna aanu buuxinayn shuruudaha xeerkani jideeyay si uu xaq macdaneed u dhaxlo, ilaa codsi laga helo dhaxal sugaha sagaashan (90) maalmood gudahood dhimaashada ruqsadlaha lagu wareejinayo xaq macdaneed dhinaca kale oo saddexaad shuruudahana buxiyay isla markaana aqbalay dhammaan waajibaadyada xaq macdaneed;
- 1.14 Marka uu noqdo qof kacay ama dhimirkiiisu dhimanyahay.
- 1.15 Marka qoraal ay wasaarad u soo qortay oo la xidhiidha xuquuq macdaneed la ogaado in ay been ahayd
- 1.16 Si weyn ugu guuldaraysto in uu ixtiraamo qodobada heshiiska hormarinta bulshada marka xeerkani sidaas faro
2. Wasaaraddu sababahaas awgeed, waxa ay qoraal ku ogaysiinaysaa ruqsadlaha ruqsadda macdaneed hakinta ama joojinta ruqsaddaas.
3. Marka la joojiyo ruqsadda macdaneed si waafaqsan qodobkan, xuquuqda ruqsadluhu wey istaagaysaa iyada oon waxba u dhimayn daymaha iyo waajibaadyada kale ee uu galay ruqsadluhu ka hor amarka joojinta.
4. Wasaaraddu ka hor inta aanay hakin ama joojin waxa ay ogaysiinaysaa soddon (30) cisho ka hor in uu magdhaw ka bixiyo ruqsadluhu jabinta shuruudaha xuquuqdiisa macdaneed.

Qodobka 110^{aad}

Keenista xogta marka la tirtirayo xuquuqda macdaneed

1. Marka xaq macdaneed, ruqsadluhu waxa uu wasaarada usoo gudbinayaa-
 - 1.1 Dhammanba wixii xog ahayd ee ruqsadlaha xeerkani ku waajibiyay in uu ilaaliyo oo ay ku jiraan warbixino faahfaahsan oo ka kooban xogtii, natiijooyinkii, tafiirkii iyo dhammaan macluumaadka kale ee la xidhiidha baadhistii iyo macdan qodistii ay xuquuqda macdaneed xaq u siisay ruqsadlaha.
 - 1.2 Dhammaan qorsheyaashii, maababkii goobta ruqsadda loo siiyay ee uu diyaariyay ruqsadluhu amaba talo bixintiisa lagu diyaariyay.
 - 1.3 Marka laga reebo ruqsadlaha ruqsadda macdan qodista qadiimiga ah, warbixin rasmi ah oo koobaysa warbixin sanadeedyadii hore oo ay la socdaan warbixin faahfaahsan oo ku saabsan xogta iyo natiijooyinka hawlihii la fuliyay wixii ka danbeeyay warbixin sannadeedkii hore.



2. Marka ruqsadlaha hore ku guuldarraysto in uu keeno xogta iyo macluumaadka loo baahanyahay ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, wasaaraddu waxa ay u yeedhaysaa ruqsadlihii hore si uu ugu hogansamo faqradda 1aad ee qodobkan;

CUTUBKA SIDEEDAAD
AJUURO MAAMUSEEDKA, AJUURADA KIROOYINKA IYO KHARASHAADKA KALE
Qodobka 111^{aad}
Ajuuro maamuseedka

1. Iyada oo la raacayo xeerkan, ruqsadlaha xaq macdaneed waxaa uu siinayaa dawladda Somaliland ajuuro maamuseedka macdanta uu u helay si waafaqsan xaqiisa macdaneed;
 2. Wasaaradu waa inay qeexdaa ajuuro maamuseedka boqoleyda ee la bixinayo dhamaan macdanaha kala duwan ee sida ku cad xeer-nidaamiyaha.
 3. Wasaaraddu waxa ay ubaahan kartaa in ay haysataha xuquuqda macdanta soo celiyo wax kasta oo la'xidhiidha bixinta ajuuro maamuseedka muddo iyo hab ku habboon hadba sida lugu war galiyo
 4. Muunad kasta oo macdaneed oo ay ku jirto muunadda dhuuxa (core Samples) taas oo laga saaray si loo tijaabiyo, lagama yaabo in ay noqoto mid ajuuro maamuseed lugu qaato haddii aanay ka badneyn qiimaha ugu sarreeya ee lagu qeexay xeer-nidaamiyeyaasha.
 5. Ajuurada (Royalty) la bixinayo ee uu tilmaamay faqradda 1aad ee qodobkani waxa ay tahay:
 - b- Boqolkiiba shan iyo lixdan 65%, dawladda dhexe.
 - t- Boqolkiiba shan iyo toban 15%, maamulka gobolka. taasi oo lagu horumarinaayo gobolka arrimahiisa bulshada sida caafimadka nabad geliyada wadooyinka IWM.
 - j- Boqolkiiba toban 10%, maamulka degmada ee ay ka socoto macdan qodista taasi oo lagu horumarinaayo adeegyada bulshada iyo maamulka degmada arrimahiisa bulshada sida caafimadka waxbarashada waddooyinka iyo nabad geliyada IWM.
 - x- Boqolkiiba toban 10%, tuulada laga sameenayo macdan qodista. Taas oo lagu horumarinaayo adeegyada bulshada sida caafimadka, waxbarashada, korantada iyo waddooyinka.
- Kh-Dhammaan adeegyadaas waxa loo maamulayaa si waafaqasan qodobada xeerkan xeer-nidaamiyaashiisa iyo dhammaan habraacyada ka farcama,
- d- Maamulka gobolka ka degmada iyo kan tuuladuba midna wax ka baxsan sida xeerkani tilmaamayo ugama faa'iidayasan karo, masuuliyada xeerkani tilmaamay.

Qodobka 112^{aad}
Waxyaabaha ka reebban ajuurada

1. Wasaaraddu waxa ay ka dhaafi kartaa masuuliyadda in wax ajuurro ah laga bixiyo muunadaha macdaneed ee loo qaadayo in la soo baadho, lasoo shiilo amaba la soo tijaabiyo.



Qodobka 113^{aad}

Ajuuradda sanadlaha ah ee xuquuqaha macdaneed

1. Waxaa uu bixinayaa ruqsadlaha xaq macdaneed oo uu siinayaa dawladda ajuurro sanadle ah qaddarka ku xusan xeer-nidamiyaasha uu go'aamiyo wasiirku.

Qodobka 114^{aad}

ku guuldaraystaha bixinta ajuurada

1. Haddii Qofka ama Shirkadda ay wasaaraddu ruqsad ogolaansho ah oo macdaneed u siisay si waafaqsan xeerkan uu ku guuldaraysto in uu ku bixiyo ajuuradda ku waajibtay mudada ay wasaaraddu ku amartay inuu ku bixiyo, ruqsadluhu wuxuu xaq u leeyahay haddii ay jiraan sababo macquul ah oo ka hor istaagay inuu ku bixiyo ajuurada muddada ay wasaaraddu u qabatay in uu wasaaradda ka codsado muddo kordhin macquul ah in loo sameeyo.
2. Ruqsadluhu waa in uu codsigiisa uu qoraal ku keenaa isagoo sababaynaaya sababaha uu ugu bixin waayey ajuuradda muddada ay wasaaraddu u cayintay bixinteeda.
3. Wasaaraddu waxa ay awood u leedahay in ay kordhiso muddada faqradda hore ee qodobkan lagu sheegay ka dib marka ay hesho codsiga ruqsadluhu uu kaga codsanaayo dib ugu dhigista bixinta ajuuradda ku waajibtay, haddii ay ku qancdo sababaha uu ruqsadluhu u cuskaday fulin la'aantiisa muddadii hore ee wasaaraddu ku amartay in uu ku soo bixiyo ajuurada.
4. Haddii uu ruqsadluhu muddada labaad ee faqradda 3aad ee qodobkan lagu xusay la siiyo oo uu mar labaad ku guuldaraysto inuu fuliyo amarka wasaaradda ee bixinta ajuuradda, wasaaradda waxa waajibku ah inay ka joojiso ruqsadlaha soo saarista macdanta ilaa inta uu ka fulinaayo amarka bixinta ajuurada lagu leeyahay
5. Ruqsadle kasta oo xuquuq macdaneed jabiya ama ku guuldaraysta in uu u hogaansamo amarradda ku xusan faqradda 1aad iyo 3aad ee qodobkan iyo qof kasta oo isaga oo og amarka lagaga joojiyey ruqsadlaha soo saarista macdanta, ka helay ruqsadlaha ama dhulka ruqsaddiisa macdan soo saaristeed la joojiyey waxaa uu galay fal- dambi jabin amar maamul waxaanu mutaysanayaa ciqaabta lagu xusay qodobka 128aad faqradihiisa 1.1 iyo 1.2 ee xeerkan iyada oo loo raacaayo xeerka habka ciqaabta baadhista iyo oogista falkaasi.

CUTUBKA SAGAALAAD

CAAFIMAADKA, AMNIGA IYO ILAALINTA DEEGAANKA

Qodobka 115^{aad}

Ka shaqaynta caafimaadka iyo badbaadada

1. Qodobbada xeerkan ee lahaanshiyaha u siinaya ruqsadle macdaneed macnaheedu maaha in uu san fulin ama laga saamaxey ilaalinta iyo bed-qabka deegaanka taas oo la xidhiidha bed-qabka shaqaalaha goobta macdanta si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka deegaanka
2. Wasaaradda ayaa samaynaysa xeer-nidamiyaha badbaadada iyo caafimaadka dadka ka shaqeeya macdan qoddida iyo qabashada hawlaha sahaminta ama qoddida macdanta iyada oo la kaashanaysa hay'addaha ay khusayso



Qodobka 116^{aad}

Ilaalinta kheyraadka dabiiciga ah iyo tixgalinteeda

1. In la go'aamiyo iyo in kale in la siiyo xaq macdanta, wasaaradu waa inay tixgaliso baahida loo qabo in la keydiyo kheyraadka dabiiciga ah ee dhulka gudihiisa ama guudkiisa saaran, kaas oo loo qaadnayo xaq macdanta si loo baadhio.
2. Ruqsadluhu waa in uu haystaa caddeynta qiimeynta deegaanka taas oo ay ogolaatay wasaaradda deegaanku.

Qodobka 117^{aad}

Waajibaadka guud ee ilaalinta deegaanka iyo yaraynta wasakheynta

1. Qof kasta ama shirkad kasta oo haysta ruqsad macdaneed, si'waafaqsan xeerkan isla markaana dhawraya hab-dhaqanka wanaagsan ee warshadaha macdantu (Mining industry) u shaqeyaan, waxaa uu u fulinayaa ama fulinaysaa hawlaha macdaneed qaabka ugu habboon ee uu u ilaalin karo deegaanka dabiiciga ah, isaga oo raacaya habraaca iyo talo bixinta ilaalinta deeganka iyo xerarka kale ee deeganku tilmaameen.

Qodobka 118^{aad}

Qiimaynta saamaynta deegaanka

1. Si waafaqsan heerarka warshadaha macdanta caalamiga ah ee wanaagsan, codsadhaha ruqsadda macdan qodista, heshiiska macdanta ama heshiiska bixinta dhul-macdeendka gaarka ah ama dib-u-cusboonaysiinta kor ku xusan waa in ay diyaarisaa wasaaradda deegaanku soona gudbiysaa qiimeynta saameynta balaadhan ee deegaanka iyo bulshada ee ay keeni karto hawlaha macdaneed waana in ay soo raaciyaan qiimayntaasi qorshahooda ganacsi si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee deegaanka.
2. Sida ay dhigayaan xeerkan iyo xeerarka deegaanku ilaalinta deegaanka, qiimaynta saamaynta deegaanka ee ay diyaariyeen codsadhayaasha kor ku xusan waxaa saldhig u noqonaya shaqada qiimaynta aasaasiga ah ee deegaanka waxayna koobsanaysaa noocyada xogta iyo falanqaynta hab-dhaqanka fiican ee macdan qodiseed ee caalamiga ah waxaana ku jiraya:
 - 2.1 Sharaxaad faahfaahsan oo ku saabsan deegaanka taas oo lugu taageerayo oo lagu dabaqayo (tayada hawada, tayada biyaha IWM.) si loo soo bandhigo macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan deegaanka goobta ruqsadda macdan qodiseed loogu talo galay ka hor inta aan hawsha macdan qodista la bilaabin;
 - 2.2 Sharaxaad faahfaahsan oo ku saabsan mashruuca iyo dhammaan wajiyada sida horeumarka, hawlaha dib-kabashada deeganka iyo xidhiitaanka.
3. Codsade kasta oo ruqsadd macdaneed ama ruqsaddle kasta waxaa looga baahan yahay inuu raaco xeerkan iyo xeerar ka kale ee deegaanka si loo soo gudbiyo barnaamijka qiimeynta saameynta deegaanka:
 - 3.1 In ay la tashadaan dadweynaha oo u soo bandhigaan mashruuca hawsha si uu ugu faahfaahiyo saamaynta suurta galka ah ee laga yaabo in mashruucani yeesho aragtiyaha daneeyayaasha, wuxuuna soo gudbinayaa barnaamijka maamulka deeganka si loo ansixiyo marka uu xeerku sidaa farayo ama markasta oo hawlaha macdan qodista wax-ka-bedel lagu sameeyo taas oo keenaysa in qorshahan wax-ka-bedel lagu sameeyo;



4. Nuqul kasta oo ka mid ah qiimaynta saameynta deeganka iyo barnaamujka maaraynta deegaanka ee uu soo gudbiyay codsadhaha ruqsadda macdan qodista ama ruqsaddle macaneed waxaa loo tixgalinayaa in aanay ahayn sir

Qodobka 119^{aad}

Warbixinta deegaanka ee sanadlaha ah

1. Ruqsaddle kasta oo looga baahanyahay in uu soo gudbiyo barnaamujka maaraynta deegaanka waxaa uu sanadkasta marka laga reebo sanadka 1aad ee uu bilaabay wax soo saarkiisa ganacsi waxa uu u soo gudbinayaa wasaarada warbixin saddex (3) nuqul ah oo ah warbixinta barnaamujka maaraynta deegaanka oo daboolaysa waxyaabaha ku sheegan faqradda 2aad ee qodobka 118^{aad} ee cutubkan;
2. Warbixinta barnaamujka maaraynta deegaanku waa in ay noqoto mid aad u faahfaahsan si ay wasaaraddu u go'aamiso in barnaamujka maareynta deegaanku yahay mid guuleysanaya oo wax-ku-ool ah.

Qodobka 120^{aad}

Qorshaha xidhista macdan qodaalka iyo dayactirka deegaanka

1. Mar kasta oo ay suurtagal noqoto, ruqsadlaha waxa waajib ku ah in uu dayac tir logo sameeyo dhulka ay dhibaataadu ka soo gaadhay hawlaha macdan qodida oo loogo soo celiyay sidii uu ahaa macdan qodista ka hor amaba xaalad kale oo u dhaw oo amaan ah taas oo la ogolaaday si waafaqsan qorshaha xidhistaanka macdanta iyo dayac tirka deeganka.
2. Wasaaraddu waxay uga baahanaysaa ruqsaddlaha in uu ku keeno wakhtiga loo cayimay damaanad maaliyadeed (damiin ama lacag dhigaala (cash deposit)) si wax lagaga qabto waxyaabaha aan waajibadkiisu ku filayn ee ka dhasha qorshaha maaraynta iyo qiimaynta samaynta deegaanka;
3. Qaddarka damaanada maaliyadeed ee ku xusan faqrada 2aad ee qodobkan, waxaa go'aaminaya qorshaha maareynta iyo qiimaynta saamaynta deeganka waana laga yaaba inay kala duwanaasho is bedel ku yimaado wakhti ka wakhti iyada oo ku xidhantahay isbedelka qiimaha waxqabadka xaalad kasta;
4. Marka ruqsadda macdanta la cusboonaysiiyo, wax shaqo macdaneed ah lagama qabanayo dhulka ruqsadda macdantu khusayso marka ay dhacdo ruqsaddaasi, ilaa wax ka bedelka qorshaha xidhitanka macdanta iyo dayac tir loogu sameeyo deeganka la ansixiyey.
5. Marka dhulka ruqsadda macdaneed noocay doonto ruqsaddu ha ahaatee la balaadhiyo, wax hawl macdaneed ah lagama qaban karo dhulkaa lagu daray dhulkii hore ruqsadda loogu haystay ilaa wax ka bedelka qorshaha xidhitanka macdanta iyo dayac tirka deeganka la ansixiyo.

Qodobka 121^{aad}

Dayac tirka socoda ee deeganka

1. Iyada oo aan waxba loo dhimayn macnaha guud ee qodobada xeerkan, marka ay socoto hawsha macdan qodista, macdan soo saarista iyo qashin qubka, ruqsadlaha waa inuu qaadaa tallaabooyinka sida loo baahan yahay waqti ka waqti si loo ilaaliyo loona soo celiyo ciidda sare ee goobaha ay saameyntu gaadhay iyo haddii kale si ay u soo celiyaan dhulka si weyn xaaladda uu horey u ahaa bilowgii hawlgallada



Qodobka 122^{aad}

Jihada u hogaansamidda ilaalinta deegaanka

1. Marka xaq macdaneed oo dhul guud ahaan ama qayb ahaan la go'aamiyo in la joojiyo ama xaqaasi dhaco, wasaaradda ayaa ogaysiis gaadhsiinaysa qofkii ugu dambeeyay ee xaq u lahaanshaha ruqsadd macdaneed, ku amrayasa ruqsadd laha in uu qaado talaabooyin wakhtiga loo cayimay si uu u dhaqangaliyo talabooyin sida loogu caddeeyay ogeysiiska, si wax looga qabto, marka la eego dhulka aan ku xidhnayn xuquuqda macdanta iyo xaalad kasta oo ku jirta xuquuqda macdanta.
2. Qof kasta oo la siiyay amarka ku xusan faqradda koobaad kaas oo cudurdaar la'aan ku guuldaraysta ama dayacay in uu u hogaansamo amarka la siiyay, wuxu sameeyay fal danbiyeed:
 - 2.1 Haddii uu shakhsi yahay, ganaax aan ka yarayn sadex kun (3,000) oo dolar ama wax u dhigma Somaliland shillin, ama xadhig laba sano ah ama labadaba; ama
 - 2.2 Haddii ay shirkad tahay, ganaax aan ka yarayn soddon kun (30,000) oo dolar ama wax u dhigma Somaliland shillin.
3. Haddii qofka amarka la siiyay si waafaqsan faqradda 1aad ee qodobkan aanu u hogaansamin amarka, waxa ay wasaaradu amraysaa in laga qaado talaaboyinka ku habboon ee lagu sheegay ogaysiiska amarka.
4. Lacagta iyo kharashka la galo marka la qaadayo talaaboyinka uu sheegayo faqradda 3aad ee qodobkani waa dayn ay jamhuuriyadda somaliland leedahay waxaana lagu bixinayaa maxkamadda awooda u leh horteeda.
5. Dacwad kasta oo loo furo si looga magdhabo qofka amarka la siiyay si waafaqsan faqradda 1aad daynta Jamhuuriyadda Somaliland ku leedahay si waafaqsan faqradda 4aad, caddaynta wasaarada ee qadarka daynta ayaa caddayn ahan loo qaadanayaa iyada oon waxba loo dhimayn xaq in la beenayn karo caddayntaas.
6. Daynta ku waajibtay qof kasta ee Jamhuuriyadda Somaliland leedahay sida uu sheegayo faqradda 1aad ee qodobani waa la magdhabayaa haddii aan qofkas lagu helin fal danbiyeed sida uu tilmaamay faqradda 2aad ee qodobkani;
7. Marka laba qof ama wax ka badani sameeyaan, ruqsadda xaq macdaneed, dadkaasi si wada jir ah ama si gooni ah ayay masuul uga noqonayaan bixinta lacagta iyo kharashaadkaas ay waajibka tahay in la magdhabo si waafaqsan qodobkan oo laga magdhabo ruqsaddaha macdaneed ama ruqsaddihii ugu danbeeyay, lakiin aan waxba loo dhibayn xaq kasta oo ka dhashay macaamil iyaga dhex maray.

Qodobka 123^{aad}

Aasaaska sanduuqa dayac tirka iyo ilaalinta deegaanka

1. Wasaarada Macdanta iyo Tamartu iyada oo la kaashanaysa wasaarada horumarinta maaliyadda waxa ay aasaasaysaa sanduuqa dayac tirka iyo ilaalinta deegaanka iyada oo looga dan leeyahay ilaalinta waajibbaadka deegaan ee ruqsadlayaasha macdaneed sida uu sheegayo xeerkani:
2. Sanaduuqa waxa muumulaya gudi ka kooban 5 xubnood ka kala socota: -

b- Labo (2) xubnood oo ka socda Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta



- t- Hal xubin oo ka socota Wasaarada Deegaanka
- j- Hal xubin oo ka socota Wasaarada Maaliyada
- x- Hal xubin oo ka socota Wasaarada Horumarinta Reer-miyiga

3. Wakiilada loo magacaabay si waafaqsan faqradda 2aad ee qodobkan waxa ay u maamulayaan sanduuqa barnaamujka dayac tirka iyo ilaalinta deegaanka ee lagu aassaasay faqradda 1aad ee qodobkan.
4. Ruqsadle kasta oo xaq macdaneed leh waxa uu ku bixinayaa qaadhaanka sanduuqa si waafaqsan qadarka qaadhaanka la la ansixiyay barnaamujka dayac tirka iyo ilaalinta deegaanka wax ka yarayn hal sano oo ka bilaabanta marka la ansixiyo barnaamuka.
5. Maamulayaasha sanduuqa waxa ay ilaalinayaan diiwaanka hawlaha sanduuqa waxaana baadhitaan sanadlah ah oo dhinaca xisaabaadka ah ku samayn doona hanti dhawraha guud waxaana si daahfuran uu ula wadaagi doonaa cidkasta oo ay khusayso,
6. Maamuleyaasha sanduuqu ugu danbayn saddex bilood kadib dhamaadka sanad maaliyadeed kasta marka la helo warbixinta xisaabeedka farqada 5aad dhigayso waxa lagaga go'aan qadanayaa habmaamulkooda iyo sida ay u raaceen barnaamijka u degsan.
7. Lacagta Sanduuqa dayac tirka iyo ilaalinta deegaanka iyo lacag kasta oo sababtan lagu helo sida hirgalinta barnaamujkan waxaa lagu isticmaalayaa kaliya barnaamujka dayac tirka iyo ilaalinta deegaanka ee lagu talo galay iyada oo la raacayo jadwalka bixinta lacagta loo aasaasay barnaamujkan.
8. Ruqsadle kasta oo macdaneed waxaa uu fulinayaa isla markaana u hogaansamayaa waajibaadyada lagu sheegay barnaamujka dayac tirka iyo ilaalinta deegaanka muddada ruqsaddaasi taagantahay.

CUTUBKA TOBNAAD

DAMBIYADA GANAAXYADA IYO WAXSOOSAARAYAASHA

Qodobka 124^{aad}

Awoodda joojinta iyo qabashada macdanaha lagu diray boosta iyo waraaqaha

1. Sarkaalka booliska ah ee sabab macquula awgeed rumaysta in shixnad macdan ah noocay doonto ha ahaatee lagu diray boos ama waraaq taas oo xidhiidh la' leh samaynta fal-dambiyeed xeerkan ama xeerarka ka farcamaa tilmaameen waxa uu joojinayaa shixnaddan ama waxa uu amrayaa in la joojiyo oo lagu joojiyo kaantarool kasta oo ku yaal Somaliland.
2. Sarkaalka booliska ahi waxaa uu furayaa shixnadda iyada oo uu goob joog yahay qofkii lagu qabtay iyo haddii qofkan ama wakiilkan goob joog yahay joogitaanka qofkaas baadhis ka dib waxaa uu siidanaya shixnadda ama waa la haynayaa ilaa maxkamad awood u lihi siidayso.

Qodobka 125aad

Awoodda Xadhiga

1. Laamaha amnigu way xidhi karaan, baadhi karaan, xayiri karaan qof kasta oo faraha kula jira fal uu xeerakani ama xeerarka kale ee ciqaabta ee dalku u aqoonsaday fal dambi iyaga oo aan wax amar ah ka haysan maxkamad si waafaqsan qodobka 25aad, faqraddiisa 2aad ee Dastuurka, balse waxaa waajib ku ah laamaha amniga in ay qofkaasi ku horgeeyaan Maxkamadda awooda u leh dhigaysiga dacwadiisa mudo 48 saacadood guduhood ah si waafaqsan qodobka 27aad, faqradiisa 2aad ee Dastuurka.



2. Si waafaqsan qodobka 25aad, faqradiisa 2aad ee dastuurka, Xaaladaha kale ee saraakiisha amnigu ay qof u xidhi karaan iyagoo ku tuhuran inuu geystay fal uu dambi ka dhigaayo xeerkani waxaa waajib ah in ay ka helaan Maxkamadda awooda u leh amar ay kusoo qabanayaan qof kaasi amar kaas iyagoo muujinaaya asbaabaha xadhiga.
3. Tallaabooyinka baadhista, horgeynta, rumaanka iyo eedaynta fal-dambiyeedka ka dhasha xeerkan waxaa loo raacayaa Xeerka Habka Cigaabta ee dalka.

Qodobka 126^{aad}

Awaamiirta maxkamadda ee joojinta hawlaha macdaneed

1. Wasaaraddu waxa ay ka codsan kartaa xeer-ilaaliyaha guud in ay codsi u gudbiyaan maxkamadda ay kaga codsanayaa in qof ama shirkad macdaneed si dhakhso ah u joojiso hawl kasta oo la xidhiidha macdan sahamin, macdan baadhis ama macdan qodis ama keyd macdaneed oo ku yaal Somaliland marka uu garawsado in hawshan macdaneed loo fulinayo si khilaafsan qodobadda xeerkan

Qodobka 127^{aad}

Awooddaha dacwad oogista

1. Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ama mid ka mid ah Kuxigeennadiisa ayaa ka oogaya dawacadaha ku saabsan jabinta qodobada xeerkan ama fal-danbiyeed kasta oo xeerkani tilaamay maxkamadda awoodda u leh horteeda
2. Ka dib markay ku cadaato in qodobada xeerkan lagu gefay.

Qodobka 128^{aad}

Danbiyadda la xidhiidha hawlaha aan ogolaansha loo haysan

1. Qof kasta oo faraha kula jirra shaqo ama hawlo la xidhiidha ganacsi, isticmaal, baadhis, sahamin, qodis, farsamayn, sifayn, dhoofin ama soo dejin macdaneed ama keydin macdaneed Somaliland ha lagu farsameeyo ama yaan lagu farsameeyne isaga oo aan haysan ruqsad ansax ah ama ogolaansho loo bixiyay si waafaqsan xeerkan wuxuu galay fal danbiyeed marka lagu helo waxaana lagu xukumayaa: -

1.1. Xadhig aan ka badnayn laba (2) sanno

1.2. Ganaax aan ka badnayn shan kun oo doollar (5000).

2. Maxkamaddu marka ay ku heshay qofka danbiga ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan ama haddii ay ku qanacdo in aan fal-danbiyeedkaa la galay aan cidna loo ciqaabin, waxaa amraysaa in macdantaa lagu helay fal-danbiyeedkaa lagu wareejiyo dawladda lana isticmaalo sida ay maxkamadu amartay.

Qodobka 129^{aad}

Danbiyadda la-xidhiidha haysasho macdaneed si'aan sharci ahayn

1. Qof kasta oo lagu helo ama la ogaado in uu haysto macdan si aan waafaqsanayn xeerkan ama xeer kale oo khuseeya waxa u galay danbi waxana lagu xukumayaa marka lagu helo.

1.1. Xidhig aan ka badnayn laba sanno ama ganaax lacageed maxkamadda ayaa qiimaynasa waa laysku dari karaa.

1.2. Ganaax aan ka badnayn shan boqol (500) oo Doollar



Qodobka 130^{aad}

Danbiyadda la'xidhidha xuquuqaha macdaneed ee ruqsadleyaasha

1. Qof ka isku daya in uu iska hortaago ama carqaladeeyo ruqsadlaha xaq macdaneed, wakiilka ama shaqaalaha ruqsadlaha in uu qabsado shaqo si waafaqsan xeerkan ama qodobada heshiska xaq macdaneed waxaa uu galay danbi waxaana lagu xukumayaa marka lagu helo: -

1.1. Xadhig aan ka badnayn hal sanno (1)

1.2. Ganaac aan ka badnayn (500) oo dolar

Qodobka 131^{aad}

Danbiyada la'xidhiidha kormeerka iyo dabagalka

1. Qof kasta oo: -

1.1. Iska hortaagga ama u diida wasaarada, Hay'adda korjoogtaynta iyo sarkaalka u xilsaaran fulinta waajibaadyada xeerkan iyo xeernidaamiyeyasha ka farcama

1.2. Ku guuldaraysta in uu u hogaansamo awaamiirta sharciga ah ee wasaarada ama sarkaalka u xilsaaran si waafaqsan xeerkan ama xeerarka kale ee ka farcama

1.3. Iska hortaagga hay'adda ama wasaaradda ama sarkaalka u xilsaaran galitaanka dhul, dhisme, gaadhi ama diyaarad ay amar sharci oo maxkamadeed u haystaan galitaankeeda si waafaqsan qodobadka 29 aad ee Dastuurka JSL

1.4. Ka been abuura wasaaradda, hay'adda ama sarkaalka u xilsaaran

1.5. U diida wasaarada, hay'adda ama sarkaalka u xilsaaran in ay helaan xogaha iyo macluumaadka ay hayaan si waafaqsan xeerkan ama xeernidaamiyeyasha ka farcama waxaa uu sameeyay faldanbiyeed.

2. Qofkasta oo faldanbiyeedka ku xusan faqrada 1aad ee qodobakan gal waxaa lagu xukumayaa marka lagu helo: -

2.1 Xadhig aan ka badnayn hal (1) sano; ama

2.2 Ganaax aan ka yarayn Shan boqol (500) oo dolar.

Qodobka 132^{aad}

Danbiyadda la xidhidha diiwaannadda iyo warbixinaha

1. Qofkii ama shirkadii ku: -

1.1 Guuldaraysta in ay ilaaliyo diiwaannada xeerkan tilmaamay in la ilaaliyo

1.2 Sifo khaainnimo ah wax uga bedela xogta diiwaanka xeerkan tilmaamay

1.3. Sameeya cadaymo, codsiyo, warbixino, ogaysiisyo, diiwaano been abuur ah ama marin habaabin ah, ama faafiya qiimo macdaneed iyo warbixino xeerkan tilmaamay oo been abuur ah waxaa uu galay danb;



2. Qofkasta oo lagu helo faldanbiyeedka ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan waxaa lagu xukumayaa: -

2.1 Xadhig aan ka badnayn sadex (3) sano; ama

2.2 Ganaax aan ka yarayn laba Kun (2000) oo dolar

Qodobka 133^{aad}

Danbiyadda laxidhidha xaaladdaha ruqsadda iyo ogolaanshaha

1. Qofkasta ama shirkadkasta oo: -

1.1 Jabisa qodobada xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaasha ka farcama ee ku saabsan fulinta xuquuqaha iyo waajibaadyada xaq macdaneed ama isticmaalka xuquuqaha iyo waajibaadyada ku xusan ruqsadda ama ogolaansha lagu helay si waafaqsan xeerkan

1.2 Jabiya shuruudaha xaq macdaneed; ama

1.3 Jabiya shuruudaha ruqsaddaha kala duwan sida ta ganacsiga macdanta, dhoofinta ama soo dajintu waxaa uu galay danbi;

2. Qof kasta oo gala danbiga ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxaa lagu xukumayaa marka lagu helo: -

2.1 Xadhig aan ka badnayn sadex sano (3); ama

2.2 Ganaax aan ka yarayn laba Kun (2000) oo dolar

Qodobka 134^{aad}

Danbiyada laxidhiidha marin-habaabinta

1. Qofka ama shirkada-

1.1 Dhigta ama ku kaydista alaab meel iyada oo ula jeeda in ay marin habaabiso isla markaana ka hor istaagto qof kale in la siiyo dhulkaa macdaneed ama goobtaas dihin; ama

1.2 Icticmaasha muunad macdaneed si ay kor ugu qaado qiimaheeda ama si uun wax uga bedesha dabecadda muunaddaa iyada oo ula jeeda in ay ku khayaamayso qof kale, waxaa uu galay danbi waxaanu mutaysanayaa xadhig aan ka badnayn laba iyo toban (12) bilood, ama ganaax aan ka badnayn shan boqol (500) oo dolar

Qodobka 135^{aad}

Danbiyadda la xidhiidha ku xasaynta macdanta dhismeyaal kale dadka leh dhibaato uga soo gaadho

1. Qof kasta oo isaga oo ku xumaynaya macdanta uu haysto dhiga dhisme qofkale leeyahay iyada oo ujeedadu tahay in qofka dhismahaa leh lagu ciqaabo faldanbiyeedka xeerkan ama xeerarka ka farcamaa tilmaamen waxaa uu sameeyay fal-danbiyeed waxaanu mutaysanayaa xadhig aan ka badnayn afar iyo labaatan (24) bilood, ama ganaax aan ka yarayn shan boqol (500) oo Doollar

Qodobka 136^{aad}

Danbiyadda la xidhiidha ka takhalusidda, soodajinta iyo dhoofinta macdanta ee aan xeerka waafaqsanayn

1. Qof kasta oo katakhalusa, qaada, dhoofiya ama soodajiya macdan aan xeerkan iyo shuruudaha ruqsaddaha macdanta waafaqsanayn, waxaa uu galay danbi waxaana lagu xukumayaa marka lagu helo:



1.1.Xadhig aan ka badnayn laba (2) sano, ama

1.2.Ganaax u dhiqma qiimaha macdanta oo marnaba aan ka yareen shan boqol (500) oo doolar

1.3.Ama labadaba oo wada socda

Qodobka 137^{aad}

Danbiyada la xidhiidha bixinta xogta sirta aheen xeerka waafaqsanayn

1. Qofkasta oo bixiya ama shaaciya xog sir ah si aan waafaqsanayn xeerkan waxaa uu galay danbi waxaana lagu xukumayaa marka lagu helo: -

1.1 Xadhig aan ka badnayn laba iyo toban (12) bilood.

1.2.Ganaax aan ka badnayn lacag Somaliland shilling ah oo u dhiganta Shan boqol (500) oo dolar.

Qodobka 138

Danbiyada ay Sababaan Falalka Taxadaradda iyo Feejignaan La'aanta ee ka yimaada Dhinaca

Ruqsadlaha:

1. Qof kasta oo ruqsadle ah oo gaysta fal ay sabab u tahay dayaacad ama taxadarro ka timid dhinaciisa ama ku guuldarraysta in uu qaado tallaabo waajib ku ahayd in uu qaado oo uu kaga hortagaayo amaba ay ahayd inuu muujiyo taxadir haboon oo macquul ah si looga hortago falkaasiyoo keenay shil ay ka dhalatay dhimasho ama dhaawac wuxuu geystay fal-dambi. Waxaanu mutaysanayaa

1.1 Xadhig ciqaabdeed aan ka badnayn 2 sanno iyo

1.2 Ganaax lacageed aan ka badnayn lacag Somaliland shilling ah oo u dhiganta ugu badnaan (2000) oo Doollar

2. Balse haddii uu falkaasi keeno dhimasho waxaa sidoo kale lagu yeelanayaa ruqsadlaha di'yada (magta) qofka ay dhimashaddu ku timid si waafaqsan shareecadda islaamka.
3. Haddii uu sidoo kale sababo falkaasi dhaawac, qofka ruqsadlaha ah waxaa ku waajib ah in uu siiyo qofka uu dhaawacu soo gaadhay xuquuq magdhabeed si waafaqsan shareecadda islaamka.
4. Sidoo kale haddii uu ruqsadluhu bixin waayo xuquudaasi magdhabeed ee ka dhalatay dhaawaca uu falkiisu sababay, Qofka dhaawacu soo gaadhay wuxuu xaq u yeelanayaa inuu Maxkamadda awooda u leh uu ka furto dacwad madaniya oo uu kaga dalbanaayo ruqsadlaha inuu siiyo magdhawgaasi isagoo raacaaya habraaca dacwad furasho ee uu jidaynaayo Xeerka Habka Madaniga ee dalku.

Qodobka 139

Noocyada Dhaawacyada

1. Dhaawacyada lagu sheegay xeerkan ee qofka soo gaadhi karaa waa laba nooc mid uun: dhaawac fudud iyo mid culus.

2. "dhawaac culus waxa loo aqoonsanayaa

2.1 Jabitaanka lafaha madaxa, miskaha, gacanta, bawdada, xangulaha, fadhiga gacanta ama lugta.

2.2.Garabka oo meeshiisa ka dhaqaaqa.

2.3.Waayista gacanta gabi ahaanba ama qayb, far ama faro badan oo isla gacanta ah, lugta ama cagaha.



2.4. Waayidda aragga indhaha mid ahaan.

2.5. Waayidda maqalka.

2.6. Dhaawac kasta oo kale oo halis u ah jidhka oo ay ku jiraan waxyeelladda dhuumaha dhiigga qaada ama gubasho ama qabatin, haddii ay u badan tahay in dhaawacu khatar galiyo nafta, sababo awood joogto ah oo nolosha khatar ku ah ama in qofka awooddiisu daciifto oo uu waxba qabsan kari waayo.

3. Dhaawac fudud waxa loo aqoonsanayaa dhaawac kasta oo waxyeeladiisu ay ka hoosayso ama ka sahlantahay dhaawacyadda culus ee faqradda 2 aad ee qodobkani lagu qeexay
4. Iyada oo aan waxba loo dhimayn dhaawacyada lagu sheegay faqradda 2 aad iyo 3 aad ee qodobkan waxa ay Maxkamaddu awood u leedahay in ay iskeed u aqoonsanto dhaawac fudud inuu yahay mid culus ama mid fudud inuu yahay dhaawac culus haddii ay jiraan sababo macquul ah oo taasi keeni kara marka ay daristo inta ay halistiisu le'egtahay, xaaladdaaha caafimaad daro ee uu qofka u gaysan karo dhaawacaasi amaba waxyaabaha kale ee uu qofka ku sababay amaba ku sababi karo caafimaadkiisa ama jidhkiisa. Waxaan isla markaa waajib ku ah Maxkamadda in ay sababayso go'aankeeda iyadoo tilmaamaysa asbaabaha ay sharci ahaan ugu aqoonsatay dhaawaca mid culus ama fudud.

Qodobka 140^{aad}

Danbiyada ay galaan shirkadaha, iskaashatooyinka maamuleyaasha iyo shaqaaluhu

1. Marka shirkad macdaneed ay gasho fal-danbiyeed, shirkadda iyo masuul kasta ama sarkaalka shirkadaasi ee wax ka'ogaa samaynta fal-danbiyeedkaas ee aan gudan waajibaadkii ka saarnaa ka hortagga danbigaas si'waafaqsan xeerkan waxa uu galay danbi wuxuuna mutaysanayaa cigaabta uu xanbaarsanyahay fal-danbiyeedkaasi.
2. Qof ku waxa uu masuul ka noqonayaa fal-danbiyeed kasta oo uu u sameeyay shakhsiyan ha ahaado wakiil ama shaqaale qof kale'e
3. Loo shaqeeyaha ama maamulaha shirkad macdaneed waxaa uu masuul ka noqonayaa faldanbiyeed kasta oo ku xusan xeerkan oo galay shaqaalihiiisu ama wakiilkiisu, haddii aanu caddayn in faldanbiyeedkas loo galay si ka baxsan awaamiirtiisa iyo tilmaamihiisa

Qodobka 141^{aad}

Isku-dayidda iyo caawinta fal-danbiyeedka

1. Qof ka isku daya in uu sameeyo, kaalmeeeyo ama caawiyo fal-danbiyeed xeerkan ku qeexan, wuxu galay faldanbiyeed wuxuuna mutaysanayaa cigaabta ay yeelanayso falka uu isku dayay oo laga dhimay saddex- meelood hal meel

Qodobka 142^{aad}

Masuuliyadda caddaynta

1. Mar kasta oo ay daruuri noqoto in la'caddeeyo ruqsad macdaneed in loo bixiyay si'waafaqsan xeerkan, masuuliyadda caddayntu waxa ay saarantahay qofka haysta ama sheeganaya in uu yahay qofka ruqsadlaha saxda ah.



Qodobka 143^{aad}

Awaamiirta Maxkamadda ee La noqoshada Ruqsadda iyo Ogolaansha Macdaneed

1. Marka fal-danbiyeed lagu sheegay xeerkan lagu helo ruqsadle macdaneed, maxkamaddu waxa ay amri kartaa in lagala noqdo ruqsadda, xaquuqda ama ogolaanshaha macdanta ee ruqsadlahaasi.
2. ka dib marka wasaaraddu xaqiijiso fal-danbiyeedka ruqsadana laga hakiyo si'waafaqsan xeerkan.

CUTUBKA KOW IYO TOBNAAD

QODOBO QUBANE AH

Qodobka 144^{aad}

Wadaagga waxsoosaarka macdanta

1. Dawladdu waxa ay la'geli kartaa heshiis rasmi ah oo ah wadaagga waxsoosaarka macdanta sherkad haysata waxaayaabahan soo socda:
 - 1.1 Ruqsadda sahanka
 - 1.2 Ruqsadda macdan qodista kooban
 - 1.3 Ruqsadda macdan qodista
 - 1.4 Heshiis macdaneed
 - 1.5 Macdan bixin gaar ah
2. Sifooyinka iyo shuruudaha uu leeyahay heshiiska rasmiga ah ee ah wadaagga waxsoosaarka macdanta ee hal-beegga ah waxa lagu sheegi doona xeer-nidaamiye wasiirku uu soo saaro.

Qodobka 145^{aad}

Kal-dhaafigga takaaliifta cashuureed iyo faa'iidooyinka Kale:

1. Qalabka, alaabta, adeegyada iyo wax kasta oo loo isticmaalayo hawsha sahanka iyo baadhista macdanta waa laga dhaafay cashuurta soo dejinta iyo dhoofinta iyo qaadista. Qalabka, alaabta iyo agabka loo soo dajiyay hawlaha macdan qodista waxa lagu leeyahay boqolkiiba shan (5%) cashuur soo dejin ah lakiin laguma laha cashuurta gadista.
2. Dhoofinta macdanaha kala duwan sida, art stones iyo qalabka dhismaha waa laga dhaafay cashuur oo dhan marka laga reebo gemstoneska oo isaga la cashuuraayo.
3. Cashuurta gadista (Value added tax) ee boqolkiiba shanta (5%) ah ayaa lagu leeyahay qiimaha shaqada ee hawsha macdan qodista.
4. Shaqaalaha ajaanibka ah ee hawlaha macdan qodiseed oo la ogolaaday ka wada dalka laguma laha wax cashuur qofeed ah.
5. Wareejinta iyo kala iibsiga faa'diido ruqsaddeedana ogolaansho lagu kala qaadanayo lacag caddaan ah ama wax u dhigma oo ka badan hal (1) milyan oo Doollar boqolkiiba labaatan (20%) cashuur ah ayaa lagu leeyahay oo Jamhuuriyaddu iska leedahay. Dawladdu waxay xaq u leedahay in ay la socoto oo eegto macaamil kasta oo ka dhaca Jamhuuriyadda dhulkeeda si'loo hubiyo in isbedelkaa lahaanshuhu ka faa'iiday hirgalay. Qarashka baadhista, horumarintaa, macdan qodista iyo dhismaha ee gudaha dalka waa laga jarayaa cashuurta raasamaalka lakiin laga jari maayo cashuurta dakhliga.



6. Wareejinta iyo kala iibsiga faa'diido ruqsaddeed ama ogolaansho iyadoo ah qarash laba ama dhowr sherkadood wadaagayaan lagu sameeyo rukhsadda ama ogolaanshaha waxaa laga jarayaa cahuurta raasamaalka
7. Shirkadaha ka hela faa'iido iibka macdanta iyo qalabka dhismaha laga soo saaro Somaliland waxa ay dhigan karaan faa'iidadaasi bangiyo dibadeed.

Qodobka 146^{aad}
Xalinta khilaafadka

1. Wasaaraddu iyada oo raacaysa habraaca lagu sheego xeer-nidaamiyayaasha waxa ay baadhaysaa isla markana go'aan ka gaadhaysaa khilaafaadka ka dhex dhasha ruqsadleyaasha ama ruqsadleyaasha iyo dhinaca saddexaad kaas oo ku saabsan xaq macdaneed ka dhashay ruqsadda la'siiyay. Wasaaraddu waxa ay awood u leedahay in ay go'aamiso in la'bixiyo magdhaw isla markaana fuliso.
2. Go'aanka wasaaradda ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxa looga racfaan qaadan karaa maxkamadda awoodda u leh muddo (30) maalmood gudahood ah si'waafaqsan qodobbada xeerka habka madaniga ah.
3. Wasaaraddu waxa awood u leeyaday in ay maamusho isla markaana fuliso dhaar ku saabsan dacwad la'horkeenay inta xeerkani awood u siiyey masuuliyaddiisa shaqo.
4. Khilaaf kasta, muran ama tabasho soo kala dhexgala dawladda iyo ruqsadleyaasha oo ka dhalatay heshiis ay wada galeen tafsiiirkiisa, jebintiisa ama tirtiriddiisa waxa inta suuragalka ah lagu xalinayaa wada xaajood.
5. Haddii wada xaajoodkaas heshiis lagu gaadhi waayo, waxa la'horgeenayaa maxkamadaha awoodda u leh ee dalka Somaliland.

Qodobka 147^{aad}
Wareejinta ruqsadda macdaneed

1. Xaqa macdaneed ee ka dhasha Ruqsad Macdaneed aan ahayn ruqsadaha sahanka guud iyo sahanka gaar ka ah ee xeerkani tilmaamay gabi ahaan iyo qayba ahaanba waa la'wareejiin karaa, cid kale ayaa la'siin karaa waana la rahmi karaa marka ay wasaaraddu ogolaato isla markaana la'diiwaangaliyo wareejintaas.
2. Ruqsadluhu waxa uu codsiga ogolaanshaha wareejinta u gudbinayaa wasaarada isaga oo isticmalaya foomka loogu talo galay oo laba nuqul ah islamarkaana bixinaya ajuurrada kala wareejinta.
3. Wasaaraddu waxa ay ku ogolaanaysaa codsiga ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan soddon (30) maalmood gudahood oo ka bilaabmayso maalinta uu si rasmi ah ay heshay codsiga haddii wareejiyaha ruqsaddu buuxiyo shuruudaha xeerkani tilmaamay.
4. Codsiga wareejinta ruqsadda macdaneed, ruqsadluhu waa in uu wasaaradda siiyo faahfaahinta shaqada ama hawsha wareejinta oo ay la'socdaan xog kasta oo wasaaraddu uga baahito.
5. La'wareegaha ruqsadda macdaneed, waxa uu masuul ka noqonayaa fulinta waajib kasta oo ka dhashay xeerkan ama heshiis lagu galay dhulka ruqsadda macdaneed ee uu la wareegay oo ay ku jiraan waajibaadyada ilaalinta deeganka ee la'galay ka hor taariikhda wareejinta iyo sidoo kale sheegasho kasta oo magdhaw ama dhaawac oo uu sheegto dhinaca saddexaad si'niyad wanaag ah.



6. Ruqsad macdaneed ama xaq macdaneed ah oo la'wareejiin karo, cid kale la siin karo ma jirto haddaan qofka lagu wareejiinayo aan lasiin lahayn ruqsaddaas marka horeba si'waafaqsan xeerkan

Qodobka 148^{aad}
Macdanaha shucaaca leh

1. Haddii la helo macdan shucaac leh iyada oo la gudanayo xuquuq uu bixiyay xeerkani ama sharci kale, waa in uu qofka haysta xuquuqdaas macdaneed ama qof kale ogaysiiya isla markiiba wasaaradda helintaanka.
2. Haddii laga helo macdan shucaac leh dhul aan ahayn dhulka hoos imanaya xuquuq macdaneed, xaqdaha iska leh dhulkaas laga helay macdanta shucaaca leh isla markaaba waa inuu ogaysiiyaa Wasaarada helintaanka.
3. Qofka haysta xuquuq macdaneed waa inuu usoo gudbiya Wasaarada wiiga ugu horreeya bil kasta gudhiisa; warbixin qoraal ah oo run ah oo ku saabsan hawlaha sahaminta iyo macdan qodista ee khuseeya macdanaha shucaaca leh; ee uu fuliyay qofka xuquuqda macdaneed haysta bishii hore ee bishan ku xigtay

Qodobka 149^{aad}
Ogolaanshaha gurashada ciidaha iyo dhagxaanta dhismaha

1. Ogolaansho Gurashada Ciidaha iyo Dhagxaanta Dhismaha ayaa loo baahan yahay si'loo sameeyo hawlgallo gurasho ciidaha iyo dhagxaanta dhismaha.
2. Codsiga Ogolaansho Gurashada Ciidaha iyo Dhagxaanta Dhismaha waxa uu ahaan doonaa qaab uu wasiirku ku soo saarayo xeer-nidaamiyayaal.
3. Xuquuqda helitaanka iyo waajibaadka la'xidhiidha cidda haysata waxa lagu sheegi doonaa xeer-nidaamiyayaal uu wasiirku soo saaro.

Qodobka 150
Xidhiidhka ka dhexeeya xeerkan iyo xeerarka kale ee ciqaabta ee dalka

1. Mabaa'diida guud ee uu dhigaayo Xeerka Ciqaabta Guud ee dalku waa la' dabbaqayaa marka la' fulinaayo fal-dambiyeeyada iyo ciqaabta uu jecdeeyey xeerkani.
2. Haddii qodobbada xeerkan ee jidaynaaya fal-dambiyada iyo ciqaabtu ay ka hor yimaaddaan qodob ama qodobo ka mid ah Xeerka Ciqaabta Guud ee dalka, waxa la'dabaqayaa qodobbada xeerkan maaddama oo xeerkani yahay mid gaar ah si'waafaqsan mabaa'diida guud ee ku xusan qodobka 13^{aad} ee Xeerka Ciqaabta Guud ee dalka.
3. Haddii Xeerkan iyo Xeer kale oo dalka dhaqan-gal ka ahi ay iska horyimaaddaan waxa la'raacayaa xeerkan.

Qodobka 151^{aad}
Xeer-nidaamiye

- 1- Wasiirku, waxa uu wareegto ku soo saarayaa xeer-nidaamiye, awaamiir, hageyaal iyo foomam lagu fulinayo hirgelinta qodobbada xeerkan, kaas oo aan ka hor imanayn Xeerkan iyo xeerarka kale ee dhaqan-galka ah.



- 2- Xeer nidaamiyeyasha, awaamiirta, hageyaasha iyo foomamka lagu sheegay faqradda hore ee qodobkan waxa waajib ah in aanay ka hor iman xeerkan macdanta, haddii ay ka hor yimaaddaana way burayaan wax saamayn sharciyana ma yeelandoonaan.

Qodobka 152^{aad}

Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani waxa uu dhaqan-gelayaa marka ay goleyaasha xeer-dejintu ansixiyaan Madaxweynuhuna saxeexo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL

Md. Siciid Mire Faarax (Giire)
Gudoomiye Ku-xigeenka 1^{aad}, ahna ku simaha
Gudoomiyaha Golaha Wakiillada



A. MACDANAHA DHISMAHA IYO WERSHADAHA

NO	M. DHIS/WAR	NO	M. DHIS/WAR
1.	Alunite	26	Kaolin
2.	Andalusite-Sillimanite Kyanite	27	Leucoxene
3.	Anhydrite	28	Lithium minerals
4.	Aplite	29	Limestone iyo Marble
5.	Asbestos	30	Magnesite
6.	Barite	31	Potash Mica
7.	Ball clay	32	Nepheline
8.	Beryl, (Marka Laga reebo Macdanta Beryl, marka laga saarayo birta beryllium ama ay gaadho darajada 2aad ee macdanahan qaaliga)	33	Nitrate
9.	Boron minerals	34	Olivine
10.	Calcium carbonate	35	Perite
11.	Celestite	36	Phosphate
12.	Corundum	37	Picture-stone
13.	Diatomite	38	Potash
14.	Dolomite	39	Pumic
15.	Epsomite	40	Pyrophyllite
16.	Feldspar	41	Quartz oo loo adeegsanayo isticmaal warshadeed
17.	Fluorite	42	Salt
18.	Garnet loo adeegsado Istimaal wershadeed	43	Sepiolite
19.	Graphite	44	Silica sand
20.	Gypsum	45	Soda-ash iyo isku dhafyada kale ee Sodium
21.	Hectorine	46	Srotianite



- | | |
|-------------------------|-----------------------|
| 22. Halloysite | 47 Sulphur and Pyrite |
| 23. Heavy mineral sands | 48 Syenite |
| 24. Fossil guano | 49 Talc |
| 25. Iodine minerals | 50 Vermiculite |

B. DHAGAXAANTA QAALIGA AH

No	Dhagaxaanta qaaliga ah
1	Diamonds
2	Emeralds
3	Rubies
4	Sapphires
5	Green garnet or Tsavorite

C. MACDANAHA QAALIGA AH

No	Maacdanha Qaaliga Ah
1	Gold
2	Osmium
3	Paladium
4	Platinum
5	Iridium
6	Silver
7	Rhodium
8	Ruthenium

D. MACDANAHA QAALIGA AH EE DERAJADA 2AAD

No	Mac. Qali. Ah Ee D2	No	Mac. Qali. Ah Ee D2
1	Agatha	12	Diopase
2	Amazonite	13	Dumortierite
3	Amber	14	Garnet marka laga reebo green garnet
4	Amethyst	15	Jade



5	Aquamarine	16	Milarite
6	Aventurine	17	Opal
7	Beryl, (oo ay ku jiraan aquamarine, Heliodor and morganite, laakiin aanay ku jirin Beryl marka laga saarayo Berylium ama loo adeegsanayo isticmaal warshadeed).	18	Quartz (oo ay ku jiraan amethyst, citrine, rock crystal, rose iyo strawberry quartz, agate, carneline, chelcedony, chrysoprase, jasper, moss agate, hyalite, pietersite and tiger's eye)
8	Chrysoberyl	19	Sodalite
9	Chrysocolla	20	Topaz
10	Chrysolite	21	Tourmaline
11	Cordierite	22	Turquoise

E. BASE AND RARE METALS GROUP

No	Base & Rare Metals Group	No	Base & Rare Metals Group
1	Antimony	19	Mercury
2	Arsenic	20	Molybdenum
3	Beryllium	21	Nickel
4	Bauxite	22	Niobium
5	Bismuth	23	Rhodium
6	Cadmium	24	Radium
7	Caesium	25	"Rare Earths" ama lanthanides, oo ay ku jiraan actinides, Scandium iyo Yttrium
8	Chromium	26	Rhenium
9	Cobalt	27	Rubidium
10	Copper	28	Selenium
11	Gallium	29	Tantalum
12	Germanium	30	Thallium
13	Hafnium	31	Tin
14	Indium	32	Titanium
15	Iron	33	Tungsten
16	Lead	34	Vanadium
17	Magnesium	35	Zinc ama zirconium, laakiin aanay ku jirin macdan kasta haddii macdantaasi



ku jirto macadam kale oo koox kale
lagu daray

18 Manganese

F. KOOXDA MACDANAHA TAMAR DHALIYAYAASHA

No Kooxda Macdanaha Tamar Dhaliyaaasha

- 1 AAN NUKLIYEER AHEYN: dhuxul-dhagax
- 2 NUKLIYEER AH: Walxaha aasaaskoodu uu ku jiro Uranium iyo Thorium

G. MACDANAHA GAASKA AH

No Macdanaha Gaaska Ah

No Macdanaha Gaaska Ah

- | | | | |
|---|----------------|---|--|
| 1 | Carbon Dioxide | 3 | Gaas ku jirta lakabyo dhuxul-dhagax ah |
|---|----------------|---|--|

